MAGDHAWGA DUMARKA
OO LOO EEGAYO
SHARIICADA

(Sil. Dum. Lam: 3)

W.Q: Qaasim Xirsi Faarax

MAGDHAWGA DUMARKA OO LOO EEGAYO SHARIICADA

(Sil. Dum. Lam: 3)

W.Q: Qaasim Xirsi Faarax

GOGOL DHIG

Naagtu waa Boqolleey sida uu ninkuba u yahay Boqollow.

Naagta waa loo dooran karaa Madaxtinimo iyo Qaadinimaba sida ninkaba loogu dooran karo.

Naagtu waxa ay furi kartaa Markhaati kaste si la mid ah sida ninkuba ugu furi karo nooc kaste oo dacwo markhaati ah, haba dhacdo in waxyaalaha daymaha iyo ganacsiga ku saabsan si gooni ah loo eege.

Naagtu Kama yaraysato dhaxalka ninku qaato, mana ku kala duwana nin iyo naagi dhaxal qaybin, balse waxaa jira xisaabo kale duwan si cadaalad loo sugo.

Intaas oo dhan ayaan leeyahay, aniga oo xujjo ahaan u cuskanaya Quraanka iyo Sunaha, ee bal car waa sheekha keena daliil caqli gal ah oo ka soo horjeedda daliilaha aan ku caddaynayo (buuggaan gudihiisa iyo kuwa kale ee la silsiladda ah).

Intaas aan soo sheegay oo dhan ama mid ka mid ah.

INTAAS KA HORSE WAXAA IGA XUSUUSIN AH: FADLAN SI DHAB AH OO KA FIIRSI LEH U WADA AKHRI KITAABKAAN, KA DIBNA HADAAD KA HESHO GEF KA SOO HORJEEDA DIINTA ISLAAMKA, KAALAY OO ANIGA AFKA IGA DHOOBEE. HADAADAN WADA AKHRIN AMA AADAN KU EEGIN IL CADDAALADEED IYO CAQLI ADEEGSI YAANAAN ISKU DAALIN EE KU SII MAQNOW SIDAADA. TAN UGU DAMBAYSANA WAXA AY IGA TAHAY FADLAN HUBSO WAX KASTE OO KUGU CUSBOONAADA AAD GAARTID XAQIIQADE.

HORDHAC

Buugani waxa uu ka mid yahay silsiladda qoraalka dheer ee ku saabsan baadi goobka xuquuqdii dumarka ee luntay. Waxa uu qoraaga Qaasim[1] tan iyo mar horeba si naftii horenimo ah ugu hawlanaa cilmi baaris la xiriirta "Xuquuqda dumarka".

Cilmi baaristaas oo ahayd mid inteeda badan uu baaruhu ka eegayey dhanka diin iyo dhaqan ahaaneed, waxa uu xoogga saarayey diimaha samaawiga ah ee kala ah; Yahuudda, Kiristaanka iyo Islaamka. Si taa garab socota waxa uu iyana xoog saarayey dhaqamada iyo caadooyinka ka soo horjeeda xuquuqda dumarka ee ay qabatimeen dadyowga aaminsan saddexdaas diimood ee aan soo xusnay.

Natiijada cilmi baaristaas awgeed ayuu qoraagu soo bandhigayaa mas'alada la xiriirta xaqqa ay haweeneyda Muslimadda ihi ku leedahay hawlaha maxkamadda Islaamiga ah la xiriira. Kuwaas oo isugu jira dhawr su'aalood oo kala ah; "Madaxtinimada Dumarka", "Maxkamad Islaam ka qaadi noqoshada dumarka", "Markhaati furka dumarka", "Magdhawga dumarka", "Mas'uuliyadda saaran dumarka", "Maaliyad yeelashada dumarka" iyo "mulkinteeda go'aanada guurka iyo furriinka". Haddaba midda haatan in hortaalla, "Magdhawga Dumarka", ayaa waxa looga hadli doonaa canaawiinta soo socota si tifatiran oo faahfaahsan.

Cutubka koowaad ayaa waxa uu noqon doonaa mid si toos ah uguda gala ujeedad uu qoraaklku leeyahay iyo guud ahaanba macnaha uu xambaarsan yahay. Taas oo ah in ragga iyo dumarku ay magta laga bixinayo haddii la dilo

[1] - Qaasim Xirsi Farax, oo ka diyaariya derajada "Ph.D" dalka Malaysiya ee bariga fog, kuna diyaariya cilmi baaris la xiriirta "Qorshaynta Qaanuunka Deegaanka",

ama la dhaawaco ka siman yihiin. Waxa uu si toos ah u cadaynayaa in naagtu ay boqoley tahay. Sidoo akle waxa uu cadaynayaa bal si fahamka ujeedada loo gaaro, hadafka dhabta ah ee Eebbe ka leeyahay waajibinta magta la bixinayo mar haddii la dilo ruux Muslim ah.

Intaas waxaa sii dheer in uu cutubku ka sii hadlayo sida ay rag iyo dumar ugu siman yihiin xagga Eebbe oo aysan asal u lahayn caado jaahiliyeedka xusaya in rag iyo dumar kala sareeyaan oo Alle kala sare mariyey asal ahaanba. Wuxuuna cutubku geban gebo ahaan usoo jeedinayaa guud ahaanba xujooyinka ama daliilaha ay cuskanayaan culimada mucaaradaya in dumarka iyo ragu ay siman yihiin ayna isku la' egyihiin diyada qiimaynteeda. Kuwaasi waa kuwa ku dhegan fikrada ah in dumarku ay mar walba raga bar ka matali karaan. Sidaas darteed diyadoodu aysan ka badnaan karin nus inta ay tan ninku tahay. Isla markaas waxaa kale oo cutubkaan lagu falanqaynayaa xujooyinka ay culimada labada dhanba haystaan ee ay ku xoojinayaan doodohooda. Waxa hadabna taas daba yaalla dhexdhexaadin labad muran iyo xoojin la xoojinayo kuwa garta u dhaw.

Cutubka labaad, waxa uu soo bandhigayaa ugu horayntaba dood culus oo dhex maraysa culimada Islaamka ee aaminsan in diyada dumarku tahay kala badh tana ragga iyo kuwa aaminsan in ay isku qiimo yihiin. Waxa kale oo halkaan lagu xusayaa walax bartood oo xadiis ku sheeg ah kaas oo loo saarinayo Cali bin abi dhaalib. Waxaana la cadayn doonaa sida uu xadiis ku sheegaasi been abuur u yahay.

Cutubka saddexaad waxa uu la go'doomay dhiraan dhirinta dhawr xadiis ku sheeg oo la cadaynayo sida ay u taag daran yihiin ama u yihiin been abuur. Cutubka afraad waxa uu la ban baxay hab fiqhiyeed u baahan aqoon fiqhiyo iyo asal fiqhi. Waxaa halkaa lagu bayaaninayaa qalabka lagu sugo dariiqada lagula soo baxo shariicada ee ay ka mid yihiin Qiyaas, Ijmaac, Ijtihaad, iwm.

Cutubka Shanaad, waxa uu isagu aad u sii dhex galayaa dariiqooyinka Ijmaaca oo ah isha ugu horaysa ee sababtay in haweenka mu'minaat ka ah diyadooda laga dhigto nus, tiiyoo aan la ogayn halka halka nuskii kale lala maray. Markaas ka dib waxaa la cadaynayaa sida ay bee n abuur u yihiin dhawr war oo laga soo kala gudbiyey qaar ka mid ah asxaabtii ama taabiciyiintii. Intaas ka dfib aya awaxa inoo soo baxaya ama qoraalka lagu cadaynayaa in ay isku mid yihiibn, isku qiimo yihiin, iyo isku dhig intaba yihiin diyada laga bixinayo haweeney la dilay iyo mid laga bixinayo nin la dilay. Ugu dambayntiina waxaa qoraalkaan lagu soo geban gebaynayaa su'aal la is weydiinayo ka dibna laga jawaabayo ee ah; halka ay ka soo askuntay fikrada ah in dumarka diyadooda nus keliya laga dhigo.

Waxaa soo diyaariyey, soona bandhigay:

Qaasim Xirsi Farax.

UJEEDADA QORAALKA OO KOOBAN

Waxa ugu weyn ee igu kallifay qoritaanka buuggaan iyo guud ahaanba kuwa kale ee bar bar socda waa:

1. In laga qaado Shareecada Islaamka ceebaysiga lagu ceebaystay wax aysan faraynin. Sidaas darteed la ilaaliyo sharafka Islaamka isla markaasna la dhawro xuquuqda aadanaha mar hadduu qasadka shariicadubva sidaas ahaa.
2. In la diyaariyo xukunno Islaami ah oo la qabsan kara xilliga maanta la joogo. Sidoo kale in laga dhigo Shariicada mid waafaqsan waqti kaste, qola kaste, meel kaste iyo guud ahaanba waxa jira iyo wixii jiri doona. Sidaasina waa si waafaqsan habsami u socodka shariicada Islaamka. Sababtuna waxay tahay in xukunada Islaamka ee kitaabka iyo sunnaha ku qorani ay yihiin qalab ceeriin (asal si guud u hadlaya) oo u baahan in aan warshadayno si aan u isticmaalno (aan dhab u fasirno si aan farac kaste oo yimaada ugu salayno iyaga asalka ah).
3. In laga faa'iidaysto cududa bisil ee ku jirta dumarka oo ah tirada ugu badan dadkeena maanta. Taas oo lagaga faa'iidaysanayo dhan walba; xag maskax, xag muruq iyo xag maaliyadba, iyada oo looga faa'iidaysanayo si waafaqsan awaamirta Eebbe inagu faray Islaamka. Taasina waa sida ugu horaysa ee lagu soo celin karo dalkii Soomaaliya ee burburay gaar ahaan, guud ahaana loo soo hinqin karo Muslimiinta maanta dunida ka habsaantay.
4. In la soo celiyo dumarkii qarnigan iyo kii ka horeeyey ku fasahaaday xornimadii dhalanteedka ahayd ee ku salaysnayd maadada iyo fisqiga. Taasina waxa ay si hal haleel ah u imaanaysaa marka iyagii la tuso

oo lagu qanciyo xornimada sare ee uu Islaamku siiyey. Halkaasna ay ka qaataan xorninmo ka fiican midda ay ku lug go'een.

5. In lagu dhiiri geliyo culimada Islaamka in ay maskaxdooda ka shaqaysiiyaan oo ka guuraan macangagnimada aan meelna haysan. Taasi waa in ay ogaadaan in cilmigu ku yimaado doodo madax banaan oo aan la isku dirqinaynin rumaysadyo qof ahaaneed. Taasina waa in laga saaro diinta xaraysadka ama xajiska shakhsiyeed ama qoyseed *(manapoly system*) ee ku jiidaya in loo fahmo in dadku kala yahay dad diimeed iyo dad adduunyo. Ama haddan si kale u dhahno weedha; culimo iyo caamo.

CUTUBKA KOOWAAD

MAGTA LAGA BIXINAYO HADDII HAWEENEY LA DILO

1. 1: MA BOQOLLEYBAA MISE WAA KONTONLEY?

Waxa ay magta ama diyada dumarku tan iyo mar aan dhaweynba dunida Islaamka inteeda badan ka ahayd kala badhka diyada ragga. Waxaa iska dabiici ah in aan laga hadlin in dumarku ay ku caan yihiin kontonley ragguna boqollow. Waxaana la yaab iyo af kala hays noqonaysa haddii uu maanta qof xujaysanaya diinta ama Shareecada Islaamka ku doodo in ay ragga iyo dumarku ku siman yihiin diyada oo aysan jirin inaba haba yaraatee wax farqi ama kala duwanaansho ah oo dhex yaalla.

Qaalliyow, Sheekhow, wadaadow, macallinow, ardayow, xerowow, ninow, wiilow, gabadhey iyo guud ahaanba rag iyo dumarow kulligiinba maanta iga maqla oo akhriya in ay haweeneydu boqolley tahay sida uu ninkuba boqollow u yahay. Eebbaha awoodda sare leh ee ina wada abuurtay ayaa middaa iyada ah si shaac ah ugu dhawaaqay oo inaku amray. Eebbe waxa uu ku yiri Qura'nka dhexdiisa: "[2]. "Uma banaana ruux Mu'min ah in uu dilo Mu'min si kama' ah mooyee". Hadday dhacdo in uu dilana laguma hayo diinta Ilaahay sabab ama cadayn loogu kala saaro jinsi –rag iyo dumar ee waxa la raacayaa dilitaan la dilay qof mu'min ah, oo mar hadduu dhiig dhaco dhabaqo meel beeshay.

Intaa keliya Eebbe ugama harin bayaaninta amarkaan ee waxa uu sida caadaduba ahayd xilligii Quraanku soo degayey, ku sii sharraxay

qodobkaan Xadiiska Nebiga ee sheegaya qiimaha nafta Bani aadamka, tiiyoo aan loo kala saarin rag iyo dumar. Nebiga Nabadgelyo iyo Naxariis korkiisa Ha ahaatee (hada ka bacdi NNKHA tee) waxa uu yiri: “ "[3](Muslimiinta dhiigoodu waa isu dhigmaa –rag iyo dumarba).

Al-Xaafith Ibnu Kathir oo ka sii amba qaadaya xadiiskaan ayaa waxa uu yiri: “Runtii dadkii isku hal diin ah, isku heer unbay ka yihiin xagga nafta”[4]

Kolkuu Nebigu caddeeyey in dhiigga Muslimiinta oo idili uu isu dhigmo aysana innaba haba yaraatee jirin in laba ruux oo Muslim ihi ay kala dhiig qaalisanaadaan, waxa uu hadana Nebigu caddeeyey qiimaha uu joogo dhiigga Muslimku ee magdhaw ahaan loogu qaadan karo oo waxa uu yiri: "Naftii Muslimad ahba waxaa laga bixinayaa boqol geel ah".

[2] - Quraanka. An-nisaa: 92
[3] - Waxaa weriyey; Abu da’ud, Nisa’I, iyo Axmad BN Xambal.
[4] . Tafsiirka Ibnu Kathir, Juska: 1 aad, bog: 376

Guud ahaanba xukunka diya bixinta ama magdhawgu waxa uu boos waasac ah helayaa marka uusan gacan ku dhiigluhu kas cad u dilin marxuumka, ee uu shilku si kama’ ah ku dhacay. Mar hadduu dilku ku yimid si ula kac ah, arinku aad ayuu intaa uga sii khatarsan yahay oo Alle weyne waxa uu taas ka yiri; " Ruuxiise u dila Mu'min si kas ah, abaalkiisu waa Jahanamo oo uu ku waari doono dhexdeeda, Eebena wuu u caroonayaa, wuuna lacnadayaa oo u diyaarinayaa cadaab weyn"[56].

Marka uu dilku ku dhaco si kama’ ah qudheeda waxa keliya oo loo kala saari karaa, sida ay Aayadduba u caddaysay, dhibanaha ama marxuumka saddex nooc oo kala ah:

1- in dilkaasi uu ku dhacay qof mu’min, Alle rumeeye, ah, kuna nool dal Islaami ah – *darul-islam,* ehelkiisu/keeduna ay Muslimiin yihiin.

4 - Quraanka. An-nisaa: 93

2- In uu dilkaasi ku dhacay qof mu'min ah, laakiin ku dhexnool ciddiisa oo aan iyagu Muslimiin ahayn, hase ahaatee ay ballan nabadgelyo ihi kala dhexayso Muslimiinta.
3- In kan/tan la dilay ahaa Mu'min ku dhexnool ciddiisii oo aan Muslimiin ahayn, laguna kari waayey Islaamka, kulana jiray Muslimiinta dagaal ka fool ka fool ah.

Xukunka labada xaaladood ee hore waa laba ciqaabood oo wada socota: midda koowaad waa in uu soo buuxshaa tiradii Muslimiinta ee uu dhimay, oo keenaa qof cusub halkii uu ka dilay qofka. Taasi waxa ay ku dhacaysaa in uu xoreeyo qof Mu'min ahaa oo laga haystay Mu'miniinta kale si gumaysi ah ama xabsi dheer ah (in uu dad cusub diinta gaarsiiyo iyadu awalba waajib ayey ku ahayd). Midda labaadna waa in uu/ay faraha ka saaraa/taa magdhaw la yaqaan ciddii uu/ay qofka ka dilay/shay si gaar ahaaneed. Taas macneheedu waxaa weeye in ruuxa Muslimka ihi uu ka baxay laba qoys. Qoyskii uu ka dhashay ama u dhaxay (*civil law)* iyo qoyska Muslimiinta adduunka oo dhan ah *(public law*). Sidaa darteed gacan ku dhiigluhu waa in uu labadiiba qanciyaa.

Xukunka xaaladda dambe waa mid keliya oo ah in uu xoreeyo naf Mu'min ah oo loo haystay gumaysi ahaan ama xabsi lahaystenimo ku ahaa maxbuus loo haysto madaxfurasho, ama la madaxfuran karo. Taas macneheedu waxaa weeye. Ruuxaas Mu'minka ihi ma lahayn tol iyo qaraabo aan ka ahayn Muslimiinta adduunka oo dhiigiisa leh. Sidaa darteed waa in uu gacan ku dhiigluhu u magdhawaa Mu'miniinta adduunka ku nool oo faraha ka soo saaraa naf ruux cusub halkii uu ka

maqnaysiiyey midkii hore[7]. Hadduuse gacan ku dhiigluhu waayo cid uu xoreeyo, si kastaba ha ku dhacdee, waa in uu/ ay soomaa/ntaa laba bilood oo xiriir ah si uu/ay isaga gudo magtii dadweynaha Muslimiinta ah iyo Eebeba ay u haysteen[8]. Guud ahaanba sharaxaadaasi waxa u si toos ah iyo si dadbanba u haysatay marka la gooyo nafta ruux Mu'minah iyada oo aan loola kicin ee shil lama filaan ihi ku dhacay. Marnaba Aayaddaan iyo Aayad kale toona makala saarin nafta qofka Muslimka ah, nooca uu doono ha noqdee. Haddaba waxaa is weydiin weyn noqon karta mar hadday diinta Islaamku sidaas aan caadku saarnayn u cadaysay qiimaha nafta Muslimadda ah ee gar darrada ama shilka lama filaanka ah lagu gooyey rag ahaataa iyo dumar ahaataaba, xaggee laga keenay in lakala qiima saraysiiyo oo qolana badh qudh ah laga siiyo diyadoodii qolana loo dhamays tiro?

[7] - Mustafa Ciid Siyaasina. Diyatul mar'at fi dawi' al kitaab wa sunnah. (Daaru Ibnu Xazam, Bayruut, 1995) bog:13

[8] - sii eeg: Tafsiirka Quraanka ee Thilaalul qura'an ee uu qoray Sayid Qudub. Jus: 1. 730-736

WAA MAXAY UJEEDADA MAGTA LOO WAAJIBIYEY?

Waxaa lama huraan ah in uu Muslimku ogaado macnaha dhabta ah ee looga dan leeyahay in diya laga baxsho naftii la gooyey. Laakiin inta aanaan qodobkaas u sii dhaadhicin an isla garano midda ka horeysa ee ah "maxay tahay ujeedada rasmiga ah ee Shareecada Islaamku"?. Qasadka shareecada Islaamku waa wax iska cad, kutubtana kuwada qoran (in waayahaan dambe lagu dhaqmaase iyadu waa su'aal kale). Waxa ay si kooban u tahay in qof kaste loo xifdiyo shan arimood oo xuquuqda aadanaha ee asaasiga ah. Waxa ay shantaasi kala yihiin;

1- Nafta.
2- Maalka.
3- Diinta.
4- Caqliga.
5- Sharafta ama nasabka

Hadaba waxaa si adag u reebban in ruux aadane ah loogaga xad gudbo mid ama wax ka badan ee ka mid ah shantaas xuquuq aadane ee an soo xusnay. Si gaar ah waxa xusid ugu mudan "nafta", waayo iyadu waa tan ugu qaalisan uguna mudan. Mar hadday arintu sidaa tahay waxa aan ku qasbannahay in aan si aad iyo aad u culus u dhawrno nafta aadanaha. Taas iyada ah ayaa hadaba nagu sii qasbaysa in aan ku oodnaano xerada ama seerada caddaalad sugidda, oo waa in aan ka dhawrnaa caddaaladda wax kaste oo dacal ka fakin kara sugitaankeeda.

Haddaan sii bal-ballarino, waxaa lagama maarmaan ah in la ogaado in naf kaste oo naf goysaa ay qiimo ahaan u dhiganto naftii ay goysay. Haddii aan hadalka si kale u dhanana, haddii ay nafi naf kale goyso waxa ay si aan gabad

lahayn u goysay isla iyada nadfteedii. Waxa uu Eebbe weyne Qura'nkiisa ku leeyahy;

" Bal eeg, Markii aan qaadnay axdigiinna ahaa; Ha daadinina dhiiggiinna, Hana iska saarina guryihiinna[9]", taas oo macneheeda loola jeedo idinku dhexdiina ha islaynina oo ha isku jirabinina qixitaan iyo kala hantaawilif. Markaa sida uu hadalka eebbe ujeediyey waa si cajiib ah oo dhab ahaan u taabanaysa ujeedada, oo bal eeg llolama jeedo toosnaanta hadalka ha is deldelina oo yuunan qofu naftiisa toos ugoyn ee waxa loola jeeda in la leeyahay ha dilin qof kale si aan adna laguu dilin. Sidoo kale ha qixinin cidna si aan adna laguu qixin[10]. Waxaan shaki ku jirin in haddii qofi uu qudh gooyo isna tiisa la goynayo hab maxkamad sharci ha ahaataa ama hab rabaani ahaataaba. Sidoo kale waxaan shaki ku jirin in ciddii cid kale guryeheeda ka saarta colaad iyo gar darro ahaan iyagana guryahooda laga saarayo si sharci ah iyo si xissi ah tay ahaataba. Bal eeg waxa ka dhacay Soomaaliya, siiba Muqdisho. Aayad kale oo taas sii kabaysa ayuu Eebbe ku leeyahy; " "Ha dilinina naftiina"[11], taas oo macneheedu yahay ha dilinina naf kale si ayanan tiinnu u go'in. Haddaan arinta ku saabsan ujeedada diyada u soo dhaadhacno; waxa ay tahay ujeedada guud ee laga lahaa magdhawgu in la helo baddelkii wax u dhigma naftii qaalliga ahayd ee laga qaaday tirada Muslimiinta, Eebbe xagiisana naftu isma dooriso. Waxaa arintaa dhab ahaan u sii caddaynaya macnaha muuqda ee Aayadda Qura'anka ah ee Alle ku leeyahay;"Uma banaana Ruux Mu'min ah in uu/ay dilo/disho Mu,min si kama' ah mooyee. Ruuxiise u dila Mu'min kama' ahaan waxaa saaran

[9] . Qura'nka: al-Baqra: 84-85.

[10] . Waxaa wax qalbigii wax garanayaa in uu ku quusto ah sida ay tani ugu dhacday dadkeena Somaliyeed dhawrkaan sano ee aan indheheena ku aragnay in cidii cid qixisa ama laysaba ay cid kale oo aysan kaba filanaynin qixinayso oo laynayso, ama ugu yaraan ay iyaga dhexdooduba casharo lama illawaan ah isu dhigayaan. Hadaba maxaadba ka sugin xaq kala saarkii qiyaamo sow adigaa hadaad wax garanayso adba indhahaaga ku arkaya, tiiyoo aysan weliba xukuumad wax kala saartaa jirinin ayey cid walba ciqaab ku habooni ku dhacaysaa marka ay dambi gasho.

xorayn qoor Mu'min ah, iyo mag la siiyo ehelkiisii/keedii, in ay iska sadaqaystaan mooyee"[12].

Halkaan waxaa lagu xukumay qofkii Muslimiinta qof ka dila in uu baddelkiisii qof kale oo u dhigma keeno. Taasina waa in uu soo xoreeyo mid ka mid ahaa Muslimiinta oo lagaga haystay addoonsi ama xataa maxbuusnimo. Sidaa darteed ujeedadu wax kale maahan ee waa noolaysiin naf Muslim ah maadaama uu dilay naf Muslim.

Marka uu qof kastaaba caqligiisa ku fiiriyo xikmadda saraysa ee uu xukunka Aayadani xambaarsan yahay, waxa uu helayaa in ay ujeedadu ka weyn tahay, inkastoo ay iyaguna muhimad aad u weyn oo muuqata leeyihiin, qoys la qanciyo, dagaal iyo cadaawad la joojiyo, iwm. Sidaa darteed ma dhici karto in qodobkaa iyo ku la mid ah toona lagu kala saraysiiyo laba nafood oo Muslim ah iyada oo loo eegayo; qolo, qabiil, nooc, midab, sharaf, da', iwm. Hadaan si kale hadalka u dhahno, marna kuma kala duwana xuquuq dhiigeed iyo tu kale toona; faqiir iyo taajir, nasab iyo nasab dhimad, nin iyo naag, wiil iyo gabadh, saqiir iyo kabiir, caqlilow iyo dabbaal, jiis iyo mid bed qaba toona.

[11] . Qura'anka: al-Nisaa: 29.
[12] - Quraanka; al-Nisa'; 92.

SINAANTA DHIIGGA MUSLIMIINTA RAG IYO DUMAR

Haddii cid ama qof laga dilo qofkiisii uu dhiigga ama dhaqanka la wadaagay waxa uu xaq u leeyahay in uu helo xaqqii qofkiisii. Markaa ayey arintu laba mid soo istaagaysaa; in loo dilo kii/tii ka dilay/dishay ama in faraha laga saaro magtiisii/teedii. Nebiga (NNKHA) oo arintaa ka hadlaya ayaa waxa uu yiri; "Qofkii qof laga dilo laba midood isagaa u door leh; in la siiyo magtii ama in loo dilo ciddii ka dishay" [13].

Waxaase kaba sii caddayn og Xadiiska Hadalka Eebbe weyne ee uu ku simay diyada rag iyo dumarba. Kuwaas oo ay ka mid yihiin Aayadaha Quraanka ee ah ee aan kor ku soo xusnay ee ku jira Suurada al-nisa; 92-93.

[13] - Waxaa soo weriyey; Bukhaari. Kitaabu diyaat; X. Lam: 688

Waxa uu nin walba maanta ku akhrin karaa indhihiisa aayadaha faraha badan ee ku baaqaya sinaanta dhiigga aadanaha ee aan u kala saaraynin rag iyo dumar, balse aan u kala saarayn Muslim iyo gaal. Waa yaabe, haddii la yiraahdo ninku waa boqollow, naagtuse waa kontonley ama shan iyo labaatan ley, midkee baa qiimaynta ku saraynaya ninka gaalka ah iyo naagta wadaadda Muslimadda ah?. Waxaase taas oo dhan ka sii daran yuu yahay ninka yeelaya in gabadhiisii shaqada iyo dadaalka badnayd, tacliinta lahayd, baariyadda ahayd, dhan walba ku wanaagsanayd ee reerka oo dhan kala wadday inta uu ka dilo nin urduf ah oo aan dhana ku fiicnayn ee lagu khasaaray ku raalli noqonaya in uu diya ahaan uga qaato nus intii qofka caadiga ah laga qaadayey – konton geel ah ama wax u dhigma?.

Runtii haddii uu mid magdhawgaas dhiman ku qanco, sababta oo ah in uu/ay aaminsanaa/nayd in ay taasi tahay xukun rabbaani ah oo ay waajib tahay in gar iyo gardarro labadaba sidaa lagu

adeeco, waxa ay arintaasi tilmaamaysaa in eex iyo caddaalad darro lagu tuhmo Shariicada Islaamka. Halkaasna waxaa ka dhalan kara diin ku gef iyo weliba diin ka carar ama ku kalsooni la'aan. Haddaba shaki la'aan fahamyada qaldan ee noocaan ihi waa waxyaalaha ugu horeeya ee sababay in ay Muslimiinta intooda badani ku qanci la'yihiin in lagu dhaqo ama xukumo shariicada, ayna kaga door bidayaan qodobo uu gaal daroogaysani soo allifay.

Annaga Soomaali ahaan waxaaba taas inoo sii dheer in ay iska caan baxday oo ay noqotay wax aan laga xishoonin in haddii ay dhacdo in la dilo qof haween ah oo ayba noqoto in laga baxsho diyadii nuska ahayd, waxaa dhacaysa in aan la siinin hantidaas ciddii xaqqa u lahayd ee ay haweeneydaasi ka dhimatay. Waxaa iska qaybsada xoogaagii awalba kala dhimanaa dad lagu tilmaamo in ay haweeneydaas ku cid ahaayeen, hase ahaatee aan ahayn qaraabadeeddii ugu mudnayd ee dhaxalkeeda lahayd.

Iyada oo la iska ogyahay in magta ruuxa la dilay la siinayo dadkii dhaxalkiisa/keeda xaqqa u lahaa, ayey dhacaysaa in dumarka loo quuri waayo in ay xoolo uga tagto ehelkeedii. Waxaase nasiib darro ah in ay dadka sidaas yeelayaa garan la'yihiin cidda ay dhibayso fal fal xumadaas ay samaynayaan. Waxay u maleeyaan in ay sidaas ku xaq duudsiinayaan qoftii haweeney ahayd ee la dilay, laakiin kuma xisaabtamayaan in ay dhacayaan xaqqii dadkii noolaa ee ay ka dhimatay. Dadkaasina waxaaba laga yaabaa in ay wada rag yihiin.

Haddaba xaq duudsiinta noocan ihi ma mid ku lid ah dumarka oo keliya baa mise waa mid guud oo ku dhisan dhac iyo boob. Marka uu qof walba arintaas u dhaba galo waxa uu ogaan karaa in maadaama ay taniba jirto uu go'aanka sheegaya in haweeneydu tahay kontonley uu yahay go'aan ku dhisan dhaqan ee aan shuqul ku lahayn diin.

Waxaa xusid mudan, si loo ogaado isku qaska dhaqamada iyo sharciyada habka uu dhaqan

jaahilgaan Soomaalida u gaarka ihi usoo dhex xaluushay qaanuunkii wadciga – dad sameega ahaa ee u dhignaa Soomaaliya waagii uu jiray xukunkii Madaxweyne Siyaad Barre oo weliba ahaa kan keliya ee udoonay dumarka wax uun ka mid ah xuquuqdoodii . Waxaa sharci ahayd in marka naag magteed la bixinayo la siiyo qabiilkeedii ee aysan qaadanaynin dadkii iyada dhaxli lahaa[14].

Waxaa ah mid uu ka yaq yaqsado ruuxa damiirka aadaminimo uu kujiro, in marka ay nooshahay qofka dumarka ihi aysan wax shuqul ah ku lahayn qolada ay ka dhalatay hiil iyo hoona aan looga baahnayn, laakiin maalinka ay dhimato ay magteeda iska qaadanayaan dad ay isku qabiil wadaagaan. Marka ay nooshahay waxaa la yiraahdaa; “Naagi tag mooyee tol ma leh”. Laakiin dhiigeeda ayaa hadhaw laga dhacaa ilmeheedii iyo saygeedii. Halkaasna waxaa ka caddaanaya in ay mararka qaarkood ay dumarku yihiin badeeco si khayaano ah ugu yaalla maal ka samayn. Marka ay guursanayso waxaa si aan qarsoodi lahayn looga gaday ninka guursanaya iyo ehelkiis haddii ay kaalmaynayaan. Marka ay dhimatana ninkii horay xoolihiisa ugu baxshay iyo caruurtii ay ka geeriyootay waxba kama helayaan.

Sida aan ogsoonnahay waxa uu Ilaahay ku caddeeyey guud ahaanba aayadaha ka hadlaya magdhawga, in dhibanaha la door geliyo tii u roon laba midood; in mag laga siiyo qofkii laga dilay iyo in loo dilo qofkii ka dilay. Khiyaar gelintaasi waxa ay qof kaste oo caqli adeegsanaya tusinaysaa in Shariicadu ay la muusanowsan tahay qofka qofkiisii waayey. Sidaa awgeed uu Islaamku ku dadaalayo sidii lagu qancin lahaa isla markaasna loo sugi lahaa habsami u socodka caddaaladda. Haddaba miyey suurtoobi kartaa in diinta sidaa u door gelinaysa una raalli gelinaysa qofka qofkiisii waayey ay hadana farayso ama dhiiri gelinayso caddaalad darada gaarsiisan heer qof lagu

[14] . Xaawo Aaden, Agaasimihii Guud ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta; Waraysi Xog aruurineed. July, 1999

qiimeeyo kala badhka intii qofka kale lagu qiimaynayey?.

Ka dib markii dhibanaha qofkiisii la dilay laba midood la doorri gelinsiiyey, ayaa hadana waxaa lagula taliyey middii sii wanaagsanayd ee ahayd in uu diyadii ruuxaa iska qaato iskana aamuso. Ilaahaybaa markuu diyada sheegay dadkii u tilmaamay in ay taasi sida ugu wanaagsan tahay, ayna tahay fududayn iyo naxariis xaggiisa ka timid oo waxa uu yiri; "Taasi waa fududayn iyo naxariis xagga Eebihiin idinkaga timid ee kii markaa ka dib xadguudba waxa uu leeyahy cadaab kulul"[15]

Inkastoo uu Alle nagu dhiirri gelinayo magdhawga iyo qaadashada iyo sama ka taliska, haddana dhanka kale ee dil ku aarsashadu waa mid meesha yaalla oo mararka qaarkood muhim ka noqonaya diya qaadashada iyo maslaxa ku meel gaarka. Marka ay gar darro culisi jirto ama si aad ah looga cabsi qabo in ay fidna dambe ka dhex dhacdo labadii reer ee dhiigu ka dhex dhacay, waxaa daawo noqonaysa in naftii wax dishay loo dilo baddelkeedii. Taasi waxa ay hor istaagaysaa sabab sheegasho dambe ee ka timaada qoladii markii hore wax laga dilay. Sidaa darteed macnuhu waxa uu noqonayaa in la xifdiyo nafta Muslimka guud ahaanba, iyo in laga hortago caddaalad darada, is gardaraysiga, xaqdiga, uur kutaallada, iyo colaada. Waana halkaa halka uu Alle weyne noo tilmaamayo marka uu leeyahay; "Waxaana idinkugu jirta Qisaasta (in naf naf loo dilo, ama dhaawac dhaawac loogu aaro) nolol". Taas aan soo xusnay ee sama kuwada noolaanshaha iyo uur isu furnaanta ah, ayaa hadaba waxaa lagu sugi karaa in la helo caddaalad iyo sinaan wada deeqda dadka oo aan cidna cid iska saraysiin. Haddaba ma noqon karto in qolo ay ku qanacdo qiimayn badh ka ah qiimaynta qofka kale ee dhan walba kala siman.

Haddiise taas la waayo waxaa imaan kara halaagyo kale oo sii cirib iyo cawaaqib xumaada.

[15] - Quraanka; al-Baqara

Maalin walba kumanaan ayaa qudha looga jari karaa macno darro iyo aarsi fool xumo ku dhisan. Hadday taasi dhacdana waxa ay dhan kale ka " sii buuxinaysaa macniihii aayadda Eebe ee ah; "Cidii disha Naf iyada oo aan naf loo dilaynin ama fasahaadiya ardigawaxay la mid tahay isaga/iayada oo dilay dhammaanba dadkii, ciddii noolaysa nafna (korisa ama badbaadisa) waxay la mid tahay isaga/iyada oo nooleeyay dadka oo dhan"[16] . Qaalinimada nafta Muslimka awgeed oo lala le'ekaysiiyo nafaha dadka adduunka oo dhan ka sokow, waxaa caddaalad darada awgeed si dhab ah u imaanaya in naf go'day awgeed malaayiin kale oo aan waxba galabsan qudha looga jaro.

[16] - Quraanka; al-Ma'idah; 32.

DALIILAHA CADDAYNAYA IN DIYADA NINKA IYO HAWEENEYDU AY ISLA EGYIHIIN

Waxaa laga soo weriyey Maalik oo isna ka soo weriyey Yaxya bin Saciid al-musayab in uu Nebigu (NNKHA) yiri; " Waa looga qisaas (Dhiig siin si isla eg la isaga gudayo) qaadayaa naagta ninka ilaa saddex u dhig dhig diyadii. Calaacasheedu waxa ay u dhigantaa calaacashiisa, iligeeduna waxa uu u dhigmaa iligiisa, iwm."[17].

Sidaas oo kale waxaa la soo weriyey in uu Nebigu (NNKHA) qaaday dacwad la xiriirtay kala dhiigsiin oo uu u kala qaaday rag iyo dumar kuna simay qisaas- magdhaw ninkii iyo naagtii"[18]. Waxaa kale oo intaa sii wehlisa in Nebiga afkiisa laga hayo; " magdhawga naagtu waxa uu la mid yahay magdhawga ninka"[19].

Xataa guud ahaanba culimada Islaamka ee laga yaabo in ay dadka qaarkood hadalkooda u cuskadaan mucaaradnimada xuquuqda dumarka ee aan ka hadlayno, ayaa sugaya in ay diyada dumarka iyo raggu siman tahay. Hase ahaatee marka ay dadka qaarkood hadallada culimadii hore dhanka ay uyara jiidan karaan ka eegaan ayey waxa ay tusinayaan in ay xataa culimadii hore sharciyeynayeen in dumarka diyadooda laga dhigo mid ka badh ah tan ragga. Waxaa yaraha iska soo horjeed u muuqda in lagu adkaysto in nafta dumarku ay ka rakhiisisan tahay tan ragga, laakiin haddii jidhkeeda xubin xubin loo xisaabiyo ay isku

---

[17] - eeg; Dr. Cabilladhiif Maxamad Caamir. Axkaamu diyaat.
[18] - eeg; kitaabka; Aclaamul muwafiqiin. Jus: 4. Kitaab al-diyat.
[19] - Xadiiskaan waxaa soo weriyey; Camra bin Shuceyb oo ka soo weriyey Aabihii oo isna ka soo weriyey Awoowgii. Eeg; kitaabka; Jaamicu al usuul al diin. Jus: 5. Kitaab al-diyaat; bog: 160

mid noqonayaan. Sidaasi waa sida laga hayo qaar culimada ka mid ah. Waxaa ku qoran kitaabka "Al-Umma" ee Shaafici in guud ahaanba dhaawacyada la gaarsiiyo qof dumar ah ay mutaan magdhaw la mid ah isla midka dhaawacyada la gaarsiiyo ninka ragga ah ee aysan innaba haba yaraatee waxna isku khilaafsanayn[20].

Intaas keliyana maahee waxaa kale oo ka mid ah go'aanada uu shaafici ku soo aruurshay kitaabkiisa "Al-umma" in ay naagtu kala mid tahay ragga dhammaanba axkaamta, haddii loo qisaas qaadayo iyo haddii laga qisaas qaadayo intaba[21]

Waxaana Cumar bin al- Khidhab (Allaha ka raalli ahaadee) laga soo sheegay in uu yiri; "Waa looga gudayaa si dhiig ahaan isla eg ah ninka dhaawaca uu si kas ah u gaarsiiyo naagta, ha gaaro nafteeda ama dhaawac ka hooseeye"[22]. Carwat Al-baariqi oo sharax ka bixinaya odhaahda Cumar waxa uu sheegay in uu yiri; " Dhaawac isugu dhiig kala qaadistu waa isku tab iyo isku qadar rag iyo dumar dhan walba oo ay ahaataba"[23].

Qaacidadani waxa ay qofka Soomaaliga ah soo xusuusin kartaa halku dhegga ah; "mar hadduu dhiig dhaco dhabaqa meel beeshay". Taas oo ku tusinaysa khatarta uu leeyahay dhiig la daadshaa iyo sida aan la isugu dayi karin in daldaloolo kale loo raadsho si loo duugo dhiigga la daadshay.

Waxaa kale oo intaa sii dheer xadiiska caanka ah ee uu ku soo saaray Beyhaqi dariiqa Cabdiraxmaan bin Abi Zanaad oo ka soo weriyey Aabihii in uu yiri; " Waxaa iigu muhiimsan ee aan ka soo gaaray maqalka Fuqahadeenii waxa ay ahayd in ay dhihi jireen: " Naagta waa looga diya qaadayaa ninka si isla eg. Ishii ilbaa u baxda,

[20] - Shaafici., Al-Umma. Jus: 6. Diyatul khadha'. Bog: 92.
[21] - Shaafici. Al-Umma., Kitaab Jaraaxul camdi. Bog: 17
[22] - eeg; Fatxul baari. Jus: 26. Baabul al-qisaas. Sidoo kale eeg; Cabdiladhiif maxamad caamir. Axkaamul mar'at fil qisaas wa diyat. Munaaqashat wa taxliil. Bog: 48

[23] - eeg; Naylu al-awdhaar. Jus: 8. Bog: 183

dhegtii dheg baa u baxda, xubin kaste oo loo dhiig qaadayana waa sidaas isku jin jinka ah”[24].

Haddaba, mid su'aal ah ayaa si lama huraannimo ah ugu imaanaysa maskaxda akhristaha ama qof kaste oo hadaladaan maqla. Taasi waxa ay tahay: maxaa loo simay dhiig bixinta dhaawaca, isla markaasna loo kala saraysiiyey dhiig bixinta naf dhan oo la gooyey?.

Ma nafta qofka dumarka ah ayaa ka rakhiisisan farteeda oo la gooyo? Tee baa u dhib badan qofka iyo ehelkeedii ama qaraabadeedii in xubin yar oo ay ka socon karto laga gooyo iyo in nafta oo dhan laga jaro?. Waxay runtii ila tahay in ay tani ku biyo shubanayso caado jaahili iyo go’aan ka fiirsi la’aan. Si kasteba arintu ha ahaatee jawaabta su'aashani waa mid u taalla ciddii kala saraysiisay qiimaha dhiig bixineed ee naf la gooyey!!.

[24] - Naylu al-awdhaar. Al-jurux Beuna rijaal wa nisaa. Bog: 36. Weliba sii eeg: Cabdiladhiif Maxamad Caamir., Axkaamul mar’at fil qisaas wa diyat munaaqasha wa taxliil. (Maktabat Wahbiyah, Qaahira, 1992) bog; 53-61

CUTUBKA LABAAD

DALIISHA KUWA AAMINSAN IN AY DUMARKU DIYA AHAAN U DHIGMAAN RAGGA BADHKII IYO JAWAABTA KU HABOON

Kol haddaan isla garano in fikradda ah in dumarka diyadoodu ay tahay kala bar midda ragga ay tahay sheeko bidco ah, oo aan sal negi ku lahayn diinta Islaamka, bal aan iminka dib u baafino halka uu eelku ka soo askummay. Waxaan odhan karnaa in kolkii ugu horeysey ay qaar Shiicadii ugu horeysey ka mid ihi la boodeen xukun aysan dhab ahaan uga hubsan Shareecada, balse ay isaga daba xidheen dhaqan jaahiligii. Waxa ay ku dhawaaqeen in haddii ay naagi nin disho, aysan ciddii ninku dooran karin wax aan ahayn in haweeneydaas gacan ku dhiiglaha ah la dilo mooyee. Hase ahaatee haddii uu nin dilo naag loo dilo, laakiin ay dhibanayaashii naagtu dhiibaan diyadiisii badhkeed[25].

2. 1 Aayadda Qura'anka ah ee uu Illahay ku leeyahay: " Markay dhashay gabar waxay tiri Eebow waxaan dhalay dhedig, Eebana waa ka ogyahay waxay dhashaye, labna lama mid ahan dhedig"[26]

Waa wax run ahaantii laga xumaado in ay dad ku doodaya oogitaan caddaaladeed oo ku askunsan xukun Rabbaani ihi ay fikradda caynkaan ah aaminaan. Waxa ay dadkan iyo kuwa raacsaniba

[25] - Al-kalini, Al-furuc minal kashfi. Jus: 7, bog: 298. Sidoo kale sii eeg: Al-istibsaar. Jus: 4. Bog: 265

asal ahaan iska aaminsan yihiin in dumarku ay ka qiimo yaryihiin kana hooseeyaan ragga. Waxaana laga yaabaa in ay ku andacoodaan in ay hadal xumadaas daliil uga haystaan Quraanka, oo waxa ay dhahayaan; Ilaahaybaa yiri; “Labkuna lama mid ahan /dhedigga”.

Laakiin nasiib darro aayaddu, iska daa in ay fikradooda caawise waaba mid iyaga aad uga soo horjeedda oo loo adeegsan karo ka soohorjeedkooda. Waxaa haboon inta aysan macnaha kelmadahakan ku dhankixin in ay marka hore isweydiiyaan; ayey ahayd midda sidaa tiri? Maxayse Eebbe ugu ballan qaaday?. Maryama bint Cimraan hooyadeed oo Alle isaga oo nooga waramaya sidaas nooga sheegay waxa ay mudadii ay uurka lahayd ballan Ilaahay ku gashay in ay ilmaha caloosheeda ku jira u hibeyn doonto ka shaqaynta Masjidka Eebbe.

Laakiin markii ay dhashay gabadh ayaa waxaa u muuqday in aysan dumarku ku haboonayn ka shaqaynta masjidka ee dhan walba leh. Waxa ay hadaba isku tiri; malaha maad oofin doontid ballantaadii. Markaa ayey Eebbe kaga cudurdaaratay in ay gabadh dhashay gabdhna aysan ka soo wada bixi karin hawlihii uu ninku ka qaban lahaa masjidka. Sababtuna wax kale ma ahan ee waxaa weeye; in ay saacado ama maalmo badan ku mashquulayso dhiig haweeneedka, uurka, umusha, nuujinta, iwm.

Ibnu Jariir ayaa Sannedkiisa kaga soo weriyey Qataada in uu yiri, markii uu fasirayey Aayaddan, “Barigaa dumarka looma hadiyeyn jirin ama looma magacaabi jirin in ay ka shaqeeyaan kaniisadda. Waxaan loogu ogolaan jirin cuduradeeda yar yar ee ay ka mid yihiin xaydka, nifaaska, iwm oo aan loo ogolayn kaniisadda awgeed”.

Waxaa kale oo Saddi laga soo weriyey in uu yiri: “ Runtii Xaaskii Cimraan, hooyadii Maryama, waxa ay u malaysay in waxa ku jira caloosheeda uu ahaa will, markaasay u hibaysay Eebbe. Laakiin markii

[26] - Quraanka; al-Cimraan; 36.

ay dhashay ayey aragtay in uu ilmuhu gabadh yahay. Kolkaa ayey Eebbe kaga cudurdaaratay iyada oo leh, “Ilaahayow wiil uunbaa kaniisadda loo hibeeyaa, dee anna waa anigaa gabadha dhalay”[27]. Hadalkaa mid ku dhaw, kuna sii daraya in dumarka loo diidanaa shaqada kaniisadda, waayo kol hadday dumarka caadadu ku dhacdo looma ogolayn in ay ragga u soo dhawaadaan. Kaniisaduna waa halkii ay raggu isugu imaan jireen[28].

Ibnu kathiir ayaa isna arintaa sii ayiday kuna sii daray in shaqooyinka kaniisadaha iyo masaajidda, sida masjidka Al-aqsaa, laga qabtaa ay ku adagyihiin dumarka, maadaama ay u baahan yihiin xoog iyo xamaal[29]. Showkaani ayaa isna si adag u sii ayiday arinta oo yiri; maba suurtoobaynin in dumar loo ogolaado in ay ka shaqayso kaniisadda. Sidaa darteed ma jirin hab ay Maryama hooyadeed ugu oo fiso ballantii ay Eebbe la gashay. Laakiin saas oo ay tahay taasi kama reebin in ay Maryama ka mid noqoto kuwa ku horeeya cibaadada ee aan marnaba laga waayin kaniisadda. Taasina waa sababta loogu baxshay Maryama oo macneheedu afkoodii ku yahay; “tii Rabbiga u adeegaysay”[30]

Midda kale ee mudan in la is weydiiyaa waxa ay tahay; Aayaddani ma iminka ayey ina faraysaa in aan dumarka ka mudnaan gelino ragga? Ama ka soo horjeedka? Mise waxa ay inoo cadaynaysaa in aan nafta dumarka ka rakhiisino tan ragga? Midda kale aayaddu miyeysan si qiso kale ku socod ah (sheekaba sheekay keentaa) ugu imaan hadalka ka dhacay qofkaas wanaagsanayd waqti ka horaysay soo degitaankii diinta Islaamka iyo xataa soo degitaankii diinta Kiristaanka. Midda ka sii mudanina waxa ay sii tahay miyey tafsiir ahaan iyo ta'wiil ahaan toona inagu tusinaysaa amar ama xataa door gelin lanagu door gelinayo in aan naftan dumarka ka rakhiisino tan ragga?.

[27] - Mustafa Ciid. Diyatul mar’at. (Beyruut, 1995) bog: 24
[28] - Tafsiirka Quraanka ee Dhabari: jus: 3, bog: 159
[29] - eeg Tafsiirka Quraanka ee Ibnu Kathiir. Jus: 1, bog: 309

Taas waxaaba ka sii is weydiin dhaw; miyeyba aayaddu caddaysay labada -lab iyo dhedig midka sareeya ama wanaagsan? Keliya waxa ay aayaddu sheegtay in ay hooyadii Maryama tiri; "raggu lama mid ahan dumarka". Haddaba su'aashu waxa ay tahay; haddii aad tiraahdeen waxaa macnahaas laga fahmayaa kala sarayn, haddaba keebaa labada sareeya?. Waxa ay dhab ahaanta aayaddu tahay mid ka digeysa kala saraysiinta ragga iyo dumarka.

Waxaa wadaadada nusnimada haweeneyda aaminsan faraqa uga buuxa dhawr xadiis beenaad iyo hadalo kale oo wada ku tiri ku teen ah aanana haysan wax xujjo iyo caddayn ah oo ay gabbaad ka dhigtaan. Waxaase nasiib wanaag ah in kulli la wada ogsoon yahay oo ay guud ahaanba ku fashilmeen kuwii isku dayey in ay xadiisyo been ah soo dhex geliyaan hab socodkii axaadiista Nebiga. Sidaa si la mid ah aysan marnaba wax qol ah ku lahayn diinta islamaaka xujjo ahaan sheekooyinka ku tiri ku teenta ihi. Waxa uu ku dhisan yahay sharciga islamaaku “ i tus oo itaabsii’. Marna uma qaato xujjo ama daliil ahaan war aan ku sugnaanin kitaabka quraanka ah ama sunnaha (sunnaha qudhiisu iska qaado uun maahan ee waa in uu dhab ahaan u sugan yahay oo ay Culimada ku takhasustay soo ansixiyeen dhabnimadiisa). Waxa keliya oo intaa soo dheeraan kara hab tafsiirkooda oo ah mid la isku raacsan yahay. Waxaaba ka mid ah noocyadaas sharci tifatirid ama sharci dhiraan dhrin kuwa soo socda; ijmaaca, qiyaaska, masaalix al-mursalaha iyo curfiga.

[30] - Tafsiirka Quraanka ee Fatxul qadiir ee Showkaani. Jus: 1, bog: 334-335

IMAAM CALI BIN ABII DHAALIB OO LAGU MASABITAY IN UU JIDEEYEY IN DIYADA DUMARKA NUS LAGA DHIGO

Haddaan wax ka xusno xadiisyada ama wararka loo ekaysiiyey ee aan dhumucda la cuskan karo lahayn ee ay adeegsadaan, waxaa ka mid ah; in laga maqlay Cali bin Abi dhaalib iyo Xasan al-basri in "dumarku aysan guud ahaanba la sinayn ragga ee ay aad uga hooseeyaan. Haddii uu, hadaba, nin dilo naag, cideedii – awliyadeedii iyagaa laba u door leh; hadday doonaan waxa ay dilin kii ka dilay, waxayse markaa iska bixinayaan diyadiisii badhkeed. Hadday doonaana way isku xishoonayaan oo waxa ay ka qaadanayaan diyadii qofka dumara ahayd (oo dabcan bardh ka ah tii ninka). Haddii ay haweeney nin dishana haday doonaan way dilayaan iyada waxayna hadana qaadanayaan diyadii ninka badhkeed, hadday doonaana way isku xishoon oo waxa ay qaadanayaan diyadii ninkii laga dilay"[31].

Jawaabta hadalkaani waxa ay ku soo gaaban tahay; ugu horayba sheekadaani waa waxba kama jiraan oo waa been abuur. Lama odhan karo xadiis war aan loo celinaynin Nebiga (NNKHA). Haddiise taas laga nabad galo, sheekadani waxa kale oo ay ku beenowday; in la yiri "ninka lagu magacaabo Shacbi ayaa ka soo weriyey Cali bin Abi dhalib". Hase ahaatee waxaa sugan oo aan lagu doodi karin in uusan Shacbi weligiiba arag Cali bin Abi dhaalib, waayo iskuma aysan soo gaarin nolol[32]. Iska daa in uu Cali (Allaha karaameeye) ku hadlo warkaas ee waxaa laga hayaa oo sugan sida uu Xakam ka soo weriyey Cali iyo Cabullaahiba in ay dheheen; " Haddii uu nin ula kac ahaan u dilo naag waa in loo dilaa"[33].

Mar Haddii ay sida muuqataba kaaf iyo kala dheeri yihiin labadaan riwaayadood, waxaa mudan in isha lagu eego teebaa xaqiiqada u dhaw. Sidaa oo kale waa in

[31] - Bushra Ibrahim Abusacid., Cuquubatul qatli al-camdi fi al fiqhil Islamiyi. Daraasa muqaaranat. Lagu dabacay: Riyaad. Bog: 39
[32] - eeg; Ibnu Rshdi. Bidaayatul mujtahid. Jus: 2. Bog: 400
[33] - Ibnu Rushdi (horay)

la eegaa teebaa waafaqsan ujeedada sharciga Ilaahay iyo nidaamka uu ku socdo. Waxaa intaa u sii dheer beenaynta warkaas sida uu uga waramay Mufasirka caanka ah ee Qurdubi oo yiri; " Runtii Abaa Cumar baa ra'yigaan ka hadlay oo yiri; " haddii uu ninku ka sarayn lahaa naagta oo aysan isu dhigmin, aysana soo gelayn dumarku hadalka Rasuulka ee ah: "Muslimiinta dhiigoodu waa isu dhigmaa"[34]. looma dileen ninka haddii uu naag dilo illeen way ka qiima yartahaye (sida ay sheegayaan). Su'aasha kale oose meesha taallaa waxa ay tahay sideebay u dhici kartaa in laga qaato kii wax dilay diyadii badhkeed, iyada oo ay macruuf tahay in ay culimadu isku raacsan yihiin in aan isku dacwad lagu kulmin karin diyada iyo qisaasta ee ay tahay in mid uun la fuliyo. Kaba sii dhawe, sidee bay u dhici kartaa in marna la yiraahdo "*al-nafsu bi nafsi*"-naftiiba naf baa u go'aysa, marna la yiraahdo nafta naagtu waa nus?.

Waxyaalaha uusan qalbiga aadanuhu aqbali karin ee ku tusinaya beennimada warkagan waxaa kale oo ka mid ah in la werinayo in markuu Cali hadalkaan ordhanayey uu is raaciyey dumarka iyo caruurta, isla markaasna uu halkaa ku saraysiiyey ama door biday caruurta. Sida ku qoran kitaabka "*Dacaa'imul al-Islam"*, waxa uu Cali yiri: " kuma banaana maragfurka dumarku xuduud iyo dhiig dhaw toona, wuxuuna oran jiray " Caruurtu dhexdooda waa isugu maragkici karaan dambiyada la xiriira dhiig dhawga, inta aysan weli kala tagin oo aysan cidohoodii u galban ama aysan la kulmin qof weyn oo hadalka u dhaha"[35]. Waxaaba taas ka sii qallafsan in la qoro; " Haddii dambiga loo galay si ula kac ah, kama gudayaan maragfurka wax ka yar laba markhaati oo caddaalad ah. Laakiin haddii loo galay si kama' ah waxaa gudi kara hal marag oo rag ah iyo hal marag oo dumar ah, ama marag nin keliya iyo dhaar"[36].

Haatan akhristow, Ilaah baan kugu dhaarshee wararkaas aan kor ku sheegnay ma waxa ay kuula muuqdaan warar ka soo fulay culimo waa weyn oo ku taagnaa Shareecada?

[34] . horay baan ku soo sheegnay

[35] - Abi xaniifa al-nu'man bin maxamad bin mansuur bin Axmad bin xayun al-tamimi al-magribiyi., Dacaa'im al-Islam wa dikru xalaal wal xaaraam wal qadaya wal axkaam. Jus: 2. Kitaab al-diyat (Daarul macaarif, 1963) PP: 412-414

[36] - horay. Haamishka. Sidoo kale sii eeg: "Mukhtasir al-musanif"

Mise waxa ay kuula muuqdaan hadallo la dhoodhoobay si loogu gaaro dano gaar ah? Waxa aan jawaabta u daynayaa qof kaste oo il fiiro ku leh diinta Islaamka.

Waxaase taas ka sii daran in ay tahay qaacido aan dood u baahnayn in aqbalitaanka diyadu uu xarrimayo dhiigga gacan ku dhiiglaha iyo weliba in la qisaaso[37]. Waayo sida aan horayba ku soo xusnay qoraalkeenaan dhexdiisa, cidda wax laga dilay laba unbay midood dooran karaan ee islama wada dooran karaan. Sidaa darteed isku meel ma soo galaan in diya la qaato iyo in dil lagu aarsado. Waxaa ku sugnaatay kitaabka Camra bin Xazam in ay tahay mid aan laga doodi karinin in lab loo dilayo dhedig haddii uu dilo[38]

[37] - eeg Tafsiirka Qurdubi. Jus: 1. Bog: 620
[38] - eeg; Ibnu Xajar al-casqalaani., Subulusalaam. Jus: 3. Bog: 236

CUTUBKA SADDEXAAD

XADIISYADA AAN SAXDA AHAYN (BUGTA AH) EE LOO XUJAYSTO IN DIYADA DUMARKA LAGA BIXINAYAA AY NUS KA TAHAY TAN RAGGA LAGA BIXINAYO

Waxaa lama huraan ah in uu ruux walbaa maanka ku hayo in guud ahaanba Xadiisyada arintaan quseeya ee la soo weriyey lana ogaaday ilaa hadda, ay yihiin kuwa isla markiiba la xaqiijiyey in ay been abuur yihiin, ama ugu yaraan laga shakiyey saxnimadooda. Kuwaasi waxa ay gaarayaan tiro ahaan saddex. Waxaana qof kaste oo xukunka Islaamka u dhabba galay gran karaa in ay marka horeba shaki abuuri karto in saddex xadiis oo keli ah si aan toos ahayn u dejiyaan xukun sidaas u weyn ee ku taxalluqa naf aadane. Waayo waxaa la ogyahay in diintu ay leedahay ahmiyado sida jaran jarada u taxan, ayna mar walba muhimadda koowaad siiso nafta qofka. Sidaa darteed xukunkii ku saabsan naf go'day, waxa uu mar walba noqdaa mid banaan cad yaalla oo aan laba ku doodi karinin ama aysan daliishiisu baadi goob u baahnayn. Aan hadalka soo gaabinee, waxa ay saddexdaas xadiis kala yihiin sida soo socota;

1- xadiiska laga soo weriyey Mucaad bin Jabal ee ah; "*Diyatul mar'ati cala nisfi diya rajul"*
2- Xadiiska laga soo weriyey Camra bin Xazam ee ay ku jirto; *" diyatul mar'at nisfu diyat rajul"*
3- Xadiiska laga soo weriyey Camra bin Shuceyb, ee ah *"caql al mar'ati..*"

3. 1: **XADIISKA MUCAAD BIN JABAL.**

Beyhaqi ayaa kitaabkiisa (*Sunan al Kubra", Kitaab al-diyaat, Baabu Maa jaa'a fi diyat al-mar'at)* ku soo weriyey: "Waxa uu inoo sheegay Xafsa bin Cabdillahi, oo ka sheegay Ibraahim bin Dhahmaan, oo ka sheegay Bakar bin Khunays, oo ka sheegay Cubaadata bin Nusaya, oo ka sheegay Ibnu Gunma, oo ka sheegay Mucaad bin Jabal in uu yiri; Nebiga (NNKHA) ayaa yiri: "Magdhawga dumarku waxa uu badh ka yahay magdhawga ragga". Xadiiskani waa daciif, taag daran, sababaha soo socda awgood:

Guud ahaanba ragga Xadiiska soo wariyey, marka Mucaad bin Jabal laga reebo, waa rag aan sidaa loogu kalsoonayn warkooda. Waxaa ka mid ah rag ku caan ah allifidda xadiisyada beenta ah, oo inta ay hadallo isku toos toosiyaan ku naba rag asxaabihii ka mid ah oo beri hore dhintay si ay ugu fulsadaan dano iyaga u gaar ah. Haddaan iminka hal hal ugu qabano tooshka, bal aan ku horayno ninka la yiraahdo; Bakra bin Khunays.

A- Bakra bin Khunays, waxa uu ahaa nin reer Kuufi ah kana sii ahaa reer Baqdaad. Waxa uuna ahaa nin ay culimadii waa weyneyd ee xilligiisii noolaa isku raaceen in uu beenta kalax kalax ugu miisi jiray, oo aan warkiisa la qaadan karin. Waxaana ka mid ah hadaladii ay culimadu ka dheheen xaalkiisa:

Mar wax laga weydiiyey Sheekha la odhan jidhay "Ibnu Mucayn" xaalka bin Khunays waxa uu ku jawaabay "Bakra bin Khunays waxba ma ahan ee warkiisa nagala hera - naga daaya"[39]. Maalin kale ayaa hadana is la su'aashaas la weydiiyey. Markaa ayuu ku jawaabay hadana " ninkaasi waa waxbayahay. Xadiiskiisuna waa daciif ama been abuur"[40]. Waxaa kale oo arinta bin Khunays la weydiiyey Beyhaqi. Markaa ayuu ku jawaabay; "

[39] - Taariikh li ibnu Mucayn; jus: 2. Bog: 62. Lam: 1341

ninkaa hadallo badan baa laga sheegayey, warkiisana waa laga shakisnaa”[41]

Ibnu xabbaan isna waxa uu ka yiri; “ Nimankaa reer Kuufi iyo reer Basri xadiisyo badan oo been abuur ah, oo aad qaarkood dareemi karto in loogu tala galay been abuurkooda ayaa laga soo weriyey”[42]. Daara qudhni oo isna arinta Khunays ka hadlaya ayaa yiri; “War waa beenlow warkiisana lama qaato”. Markaas ayuu Ibnu Cadiya ugu sii daray; “laakiin Xadiisyada uu sheego waa la iska qoraa iyada oo lagu darayo liiska kuwa la been abuuray – bugta ah”[43]

Ibnu Abii Xaatim oo ka mid ahaa jiilkii ka dambeeyey ayaa isna yiri; “ Waxa aan maqlay Aabahay oo inta la weydiiyey – runlownimada ama beenlownimada Bakra bin Khunays ku jawaabay: Ninkaasi wax la sheego ma ahan xadiiskiisuna tabar lagu rumaysto malahan”[44]. Al-Xaafid isagu waxa uu yiri; “ War ninku sidaa beenlow uma ahan ee wuu qaladaad badanyahay oo hadalada ayaa isaga dhex darsama”[45].

Intaa haddaan uga harno arinka Bin Khunays, bal aan hadana eegno arinka saaxiibkiisa kale ee ka soo weriyey laftigiisa. Kaasi waa Ibraahim bin Dhahmaan.

Ibraahim bin Dhahmaan waa nin reer Kharasaani ah. Xagga run sheegnimadiisa xadiis werinta waa la isku khilaafay in uu ka run sheegayey iyo in kale. Rag badan oo culimadii markaa ugu aqoonta fiicnayd cilmiga xadiisyo sixitaanka iyo runlow iyo beenlow kala saarka - *al jarxu wa tacdiil*, waxa ay ku adkaysteen in uu ninkani beenlow ku ahaa xadiis werinta. Intooda badani way ka dhaarteen in ay war ka dhegaystaan. Waxaa ka mid ah ragga ku fogaaday daciifintiisa; Maxamad bin Yaxye, Maxamad bin Camaaara, Sulayman iyo Ibnu

[40] - eeg; Al jarxu wa tacdiil. Jus: 2, bog: 384. Sidoo kale sii eeg; Miizaan al ictidaal: jus: 1, bog: 344, lam: 1278

[41] - eeg Sunan al-kubra. Jus: 7, bog: 261

[42] - Kitaab al- majruuxiin ee Ibnu Xabaan. Jus: 1, bog: 190

[43] - Tad-hib al tad-hiib. Jus: 1, bog: 134. Sidoo kale eeg; Miizaan al ictidaal. Jus: 1, bog: 344.

[44] - Al-jarxu wa Tacdiil. Jus: 2, bog: 384. Sidoo kale eeg; Tah-diib al-Tahdiib. Jus: 1, bog: 482

Xazam. Daara qudhni ayaa Naysaabuuri ka soo weriyey hadalkiisa ah; " Waxaan weydiiyey Maxamad bin Yaxye in uu iigaga waramo xaalka Ibraahim bin dhahmaan bal in la xujaysan karo xadiiska uu soo weriyey iyo in kale. Markaas ayuu iigu jawaabay"Maya"[46].

Maalin kale waxaa la weydiiyey Maxamad bin Cabdillaahi bin Camaara. Wuxuuna ku jawaabay; "Ibrahim bin Dhahmaan waa nin warkiisu taagdaran yahay - daciif, xadiisyadiisuna ay is ka hor imaanayaan - burinayaan"[47]. Waxaa kale oo jirtay in ninkaan Dhahmaan la yiraahdo lagu caddeeyey in uu berigii dambe ku biiray koox fallaago ahayd oo la oran jiray "Murji'at". Jawzaani, Daaraqudhni, Dahabi, Sulaymaan iyo culimo kaleba waxa ay ku eedeeyeen in uu gacan saar la lahaa kooxdaas Murji'ada[48].

[45] - eeg kitaabka Xaafid ee Taqriib. Jus: 1, bog: 105
[46] - Tacliiq al-muqni. Jus: 3, bog: 81 - 82
[47] Siyarul iclaam. Jus: 7, bog: 382
[48] - eeg: Mizaanu al ictidaal, jus: 1, bog: 37. Iyo Al-muqni fi ducafaa. Jus: 1, bog: 17.

Al-Xaafid ibnu Xajar ayaa Ibnu Xazam ka soo weriyey in uu warkiisa ku soo gaabiyey "Dhahmaan waa nin daciif ah - xadiiska laga weriyaa ma sugna. Wuxuuna weliba hadalkiisaas sii raaciyey in warkii uu sheegaa yahay mid isaga uun lagu celinayo oo aan laga hoos qaadaynin[49]. Mar arintiisa wax alaga weydiiyey Abuu Xaatim,waxa uu ku jawaabay: "waa lagu kalsoonaan karaa, laakiin waa Murji'at". Axmad isna waxaa laga soo weriyey in uu Dhahmaan ahaa nin Murji'ada u go'doomay aadna u necbaa Jahmiyada[50]. Sidaa darteed waxaa laga yaabaa in uu been abuuro xadiisyo uu ku nacaynayo Jahmiyada. Waayo kol hadduu meesha soo galo tacasub iyo qolo necbaysasho waxaa dhaqso u guuraya caddaalad samayn iyo xaqnimo wax ku doon.

Intaa keliya maahan ee waxaa iyana sugnaatay in ay culimadii waa weyneyd ee ku takhasustay kala

[49] - Muqadamatu Fatxul baari. Bog: 407
[50] - Tadkiratul xufaad. Jus: 1, bog: 213.

saarka iyo sixitaanka axaadiista si loo kala ogaado kooda runta ah iyo kooda la been abuuray, waxa ay ka digeen in la xujaysto xadiiskaan iyo kuwa kale oo la mid ah intaba. Tusaale ahaan, Imaam Beyhaqi waxa uu ku tirtirsiiyey taagdaraysiinta xadiiska iyo in la iska jiro in la xujaysto. Waxa uu caddeeyey in laba riwaayadood oo uu hadal noocan ihi ku yimid ay labaduba yihiin daciif. Wuxuuna hadalkiisa ku sii daray in uu leeyaha; " waxaa Mucaad bin jabal laga soo weriyey Senedkaas aan weligii mid la mid ihi sugnaanin"[51]. Sidaa si la mid ah waxaa isna xadiiskaan ka hadlay Imaam Showkaani oo yiri: " Bal eeg waxa ay damayaan in ay daliilsadaan Xadiiskaas Mucaad (kan aan ku taaganahay ka hadalkiisa) iyaga oo weliba iska og in uusan waxa asala ah lahayn aysana banaanayn in laxujaysto[52]. Isku soo duuduuboo akhristow iska ogow in uusan kani ahayn xadiis lagu doodi karo ama lala shir tagi karo.

[51] - Sunana al Kubraa. Jus: 8, bog: 96
[52] - Showkaani. Nailul Awdhaar. Jus: 7, bog: 68. Bab diyatul mar'at fi nafsi wama duunahaa.

3.2: **XADIISKA CAMRA BIN SHUCAYB**

Nisaa'I ayaa kitaabkiisa *Al-Qasaama,* jus: 8, bog: 44, Baab Al-caql al-mar'at ku soo weriyey xadiiskaan. Sidaa si la mid ahna waxaa u soo weriyey Daaraqudhni, *Baabka Al-xuduud wa diyaat,* lam: 38. Hab dhaca xadiiskuna waa sidatan soo socota:

Waxa uu inoo sheegay Ciise bin Yuunus, inuu Damra - damra waa Ibnu rubiica oo Falastiini ahaa, ka soo weriyey Ismaaciil bin Cayaash, oo isna ka soo weriyey Ibnu Jureej, oo isna ka soo weriyey Camra bin Shuceyb, oo isna ka soo weriyey Aabihii, oo isna ka soo weriyey Awoowgii in uu yiri: Nebiga Eebbe (NNKHA) ayaa yiri: " dhiigsiinta dumarku waxa ay la mid tahay isla midda ragga ilaa ay ka gaarto saddex u dhig dhigga diyada nafteeda"

Xadiiskaan qudhiisu waa daciif taag daran (siiba inta dambe ee ah ilaa ay ka gaarto saddex u dhig dhigga diyadeeda) laba arimood awgood:

1- Raawiga - weriyaha xadiiska ee la yiraahdo Ibnu jureex waa nin lagu qoray in uu yahay *Mudallis*. Magiciisa oo buuxa waxaa la yiraahdaa Cabdillaahi bin Cabdil casiis bin Jureex, waana nin reer Amawi oo reer Makka ah. Haddaan u soo noqonno waxa ay ka yiraahdeen culimadu wargalnimadiisa, waxaa ka mid ah; Yaziid bin Zureec oo yiri in uu ninkaasi ahaa nin iska dac ah oo waxa uu rabo isga hadla, war kastana iska qaata[53].

Yaxye bin Maciin oo isna arintiisa ka hadlayaa waxa uu yiri; "Mar hadduu kitaab ka akhrinahayo waa lagu kalsoonaan karaa, laakiin hadduu afka idiinkaga sheego ka taga"[54]. Imaam Axmad bin Xambalna waxa uu yiri: " Xadiisyada uu Ibnu Jureex soo dirayo qaarkood badani waa daciif,

[53] - Siyara iclaam al-nubalaa. Jus: 6, bog: 329. Sidoo kale Tahdiib al tahdiib. Jus: 6, bog: 404

mushkiladda jirtaana waa in uusan Jureex marnaba u aabba yeelaynin halka uu warka ka qaadanayo"[55]. Xataa Ibnu Jureex qudhiisu waxa uu sheegay in uu qaatay xadiisyo daciif ah sida kuwa uu ka qaatay Safiya bint Sheybat[56]. Haweeneydaas Safiya bintu Sheyba ahna waa mid lagu muransanaa macaamilkeeda run sheeg oo aan kalsooni buuxda lagu qabin.

Waxaa kale oo intaas u sii dheer Ibnu jureex in uu isaga raaxaysan jiray waxa loo yaqaan "*Nikaax al-mutca*" oo ah in maalmo, sanado ama saacado lagu heshiiyo in la is qabo ka dibna la is furo - guur ku meel gaar ah. Imaam Shaafici ayaa soo weriyey in uu Jureex ku guursaday nikaax mutca ah in ka badan sagaashan naagood, ilaa uu ka gaaray heer uu habeenba mid ku dalbo awqiyad - shilin etc."[57]

[54] - Tahdiib al-tahdiib. Jus: 2, bog: 178, jus: 6, 404.
[55] - Miizaan al-ictidaal. Jus: 2, bog: 659
[56] - Taariikh al-kabiir. Jus: 5, bog: 423. Sidoo kale Taariikh al Saqiir. Jus: 2, Bog: 98
[57] - Tadkiratul-xufaad. Jus: 1, bog: 170. Sidoo kale Siyarul iclaam. Jus: 6, bog: 333. Iyo Tahdiib al tahdiib. Jus: 6, bog: 406

Arimahaas iyo arimo kale oo la xiriira awgood ayey culimada intooda badani ku xukmiyeen Ibnu Jureex in uu ahaa; "*Mudallis ama mursal*". Al-xaafid ayaa kitaabkiisa *"Dabaqaat al mudallisiina*" ku sheegay in ay Nisaa'I iyo culimo kale ku tilmaameen Ibnu jureex in uu ahaa nin xadiiska ku ah Mudallis (hadal sarbeeba ama maldaha). Daaraqudhnina waxa uu yiri; " inta wax tadliisisa waxaa ugu shar badan Ibnu Jureex, waayo si fool xun buu wax u tadliisistaa. Keliya waxa uu tadliisistaa wararka uu ka maqlay kuwa loo aqoonsaday in ay beenlowyaalka yihiin ama la ceebeeyey - *majruux*"[58]. Suyuudhi ayaa isna magaca Jureex ku dhigay safka ugu horeeya ee liiska nimankii Mudallisiinta ahaa[59]

Haddaan si gaar ah u taabano xadiiskaan na horyaalla iyo weriyihiisa isna ina horyaalla ee Ibnu jureex, waxa uu Termadi ka yiri; "Maxamad bin Ismaaciil oo Bukhaari ah ayaa yiri; "Ibnu

[58] - Dabaqaat al mudalisiin, bog: 65
[59] - Suyuudhi, Asmaa al mudallisiin. Bog: 101 . nikthu mankuuth.

Jureex waxba kama uusan maqlin Camra bin Shuceyb"[60]. Axmad bin Xambal qudhiisu waxa uu qiray in uusan Ibnu Jureex weligiiba la kulmin Camra bin Shuceyb[61].

Sidaa darteed caqli gal ma ahan in ninkaas isaga ah ee aan ka soo dheekaynay warkiisa loo qaato xukun ahaan, weliba loo qaato xukun ku taxalluqa xuquuq aadane oo weliba dhiig dhacay ah. Kaba sii darane in laga qaato xadiiskaan sida hufan loogu qabtay in uusan sax ahayn.

2- Aragnay xaalka weriyaha xadiiska ee la yiraahdo Ibnu jureex ee bal aan hadana aragno ninka uu sheeganayo in uu ka soo maqlay warka ee ah weriyaha saddexaad ee xadiiska, Ismaaciil bin Cayaash.

Ismaaciil bin Cayaash waa nin reer Ximsi ahaa, caalimka reer Shaamna ahaa. Hase ahaatee ay dood culusi ka taagnayd sugnaanta xadiisyada uu soo werinayo. Imaam Bukhaari waxa uu yiri; "Farbaa ku godan xadiiska uu Ismaaciil bin Cayaash ka soo weriyey cid aan reer Shaam ahayn"[62]. Imaam Axmad bin Xambalna waxa uu intaas ku sii daray in marka uu xadiiska ka soo werinayo reer Shaam uu sax u sheego, laakiin hadduu ka soo werinayo reer Xijaas uusan sax ahaan u sheeginin[63]. Ibnu Xabaan isagu waxa uu ka istaagay mawqif ah in aan marnaba la xujaysan karin xadiis uu ninkaasi soo weriyey[64]

Yaxye bin Muciin oo ka hadlaya muranka ka taagan rumaynta xadiisyada Ismaacil ayaa caddeeyey in marka uu Ismaaciil xadiis ka qaadanayo reer Shaam uu ku keeno sida ugu saxsan, laakiin mar hadduu ka qaadanayo reer Ciraaq iyo reer Madiina waxa uu isaga darsan jiray wixii uu doono[65]. Haddaba halkaa waxaa ka

[60] - Tahdiib al-tahdiib. Jus: 6, bog: 406
[61] - Siyar al iclaam al nubalaa. Jus: 6, bog: 332
[62] - Tadkiratul Xufaad. Jus: 1, bog: 254. Iyo Mizaan al ictidaal. Jus: 1, bog: 241
[63] - Sunan al-kubra. Jus: 1, bog: 142. Sidoo kale Al-jarxu wa tacdiil. Jus: 2, bog: 192. Iyo Al-muqni fi ducafaa. Jus: 1, bog: 85
[64] - Al- muqni fi ducafaa. Jus: 1, bog: 185
[65] - Al-majruuxiin. Jus: 1, bog: 124. Sidoo kale siyarul iclaam. Jus: 8, bog: 318

caddaan kara in xadiiska intiisa hore ay run tahay, laakiin inta danbe ee sheegaysa "ilaa intay ka gaarayso saddex u dhig dhigga diyadeeda" ay tahay war lagu darsaday. Weliba waxa uu Yaxye, isaga oo u cudurdaaraya,, mar kale leeyahy; " Aad baa loogu kalsoonaan karaa wixii uu ka soo weriyey reer shaam, laakiin intii uu ka soo weriyey reer Xijaas waxaa ka lumay kitaabkii uu ku qortay (*note book)*, markaa ayuu isku dhexyaacshay oo isku dhex qalday wixii uu ka xifdisnaa[66]

Hadalkaa hadal la mid ah ama u macno dhaw waxaa laga hayaa Sheekha la yiraahdo Ibnu Xabaan oo yiri: " Ismaaciil bin Cayaash waxa uu ka mid ahaa ragga wax xifdin og, laakiin markii uu gaboobay ayaa xifdiskiisii aad isu badelay oo waxaa dhacday in uu intuu horay u xifdiyey ama u soo weriyey u saaray jiha kale oo hor leh. Sidoo kale uu intuu ku helay da' weyni uu isugu dhex qalday si ba'an, isaga oo *senedba* (taxa ama abtirsiga magacyada xadiiska laga soo maqlay) *Senad* kale ku dhex yaacinaya, *Matnigana* (xarfaha xadiiska) matni kale ku dhexyaacinaya isaga oo aan kala garanaynin, ilaa ay markii dambe qaladaadku aad ugu bateen xadiisyadiisii"[67]

Nisaa'I isagu iskuma luri jirin xadiisyada uu ka maqlo Ismaaciil ee waxa uu isaga tirin jiray liiska xadiisyada Daciif ka ah[68]. Bukhaarina waxa uu Ibnu Mubaarak ka soo weriyey in uu yiri: "Haddii inta kale (weriyeyaasha xadiisyada) lala soo bar bar dhigo Ismaaciil, waxa aan ka door bidi lahaa mid kaste oo kale intaan isaga war ka qaadan lahaa"[69]. Abuu Isxaaq oo reer Faraazi ahna waxaa laga hayaa in uu yiri; "waxba ha ka qorina Ismaaciil bin Cayaash, ha ka maqlo cid la yaqaan

[66] - Tahdiib al-tahdiib. Jus: 1, bog: 323. Iyo Siyarul iclaam. Jus: 8, bog: 318

[67] - Tahdiib al-tahdiib. Jus: 1, bog: 326. Al-majruuxiin. Jus: 1, bog: 125. Al-miizaan. Jus: 1, bog: 240. Iyo Siyarul iclaam. Jus: 8, bog: 322

[68] - Nisaa'i. Al-ducafa wal matruukiin, bog: 16. Iyo Siyarul iclaam. Jus: 8, bog: 322

[69] - Taariikh al Saqiir. Jus: 2, bog: 226. Iyo weliba Taariikh al-kabiir. Jus: 1, bog: 370

ama ha ka maqlo cid aan la aqoone"[70]. Mar kale ayaa la weydiiyey Abuu Isxaaq bal in la diiwaan gelin karo xadiis laga maqlay Ismaaciil, markaa ayuu yiri; "Ha ka qorinina ninkaas waxaba, waa nin aan kala garanaynin wax maskaxdiisa ka soo baxayee"[71]. Ibnu Khuzayma isaguna waxa uu yiri; "ma banaana in la xujaysto xadiiskiisa"[72].

Ilaa iyo haatan waxa aan si tifa tiran kaga hadalnay Weriyaha afraad iyo saddexaad ee xadiiskaan, haddaba bal aan hadana u galno weriyaha sita lambarka shanaad ee ah; Camra bin Shuceyb.

[70] - Saxiix Al-Muslim, Sharaxu Al-Nawai, Al-muqadama. Jus: 1, bog: 110
[71] - Al-miizaan. Jus: 1., bog: 241, Tahdiib al-tahdiib. Jus: 1, bog: 325, iyo Siyarul iclaam. Jus; 8, bog: 320
[72] - Al-miizaan. Jus: 1, bog: 244

3.3: **CAMRA BIN SHUCEYB**

Waxaa magaciisa oo buuxa la yiraahdaa Camra bin shuceyb bin Maxamad bin Cabdillahi bin Camra bin Al-caas. Waxa uu ahaa ninka reer Daa'if ugu haystay Xadiisyada iyo Fiqiga. Hase ahaatee culimadu way isku khilaafeen kalsoonida lagu qabi karo xadiisyada uu soo weriyey, gaar ahaan kuwa uu sheegay in uu ka maqlay aabihii iyo awoowgii. Yaxye bin Saciid oo reer Qadhaan ah ayaa la weydiiyey bal waxa uu ka og yahay Camra. Waxa uu ku jawaabay; " Hadduu sheego in uu ka soo weriyey qof wanaagsan oo lagu kalsoon yahay ka rumaysta, laakiin hadduu sheegto cid kale dheg ha u jalaq siinina"[73]. Ibnul madiinina waxaa laga hayaa in uu yiri; "Xadiis uu ninkaasi soo weriyey agtanada waa ka kutiri ku teen"[74]. Dahabi isagu waa ka soo caagay xadiis laga qaato Camra bin Shuceyb oo waxa uu dhihi jiray; "Waxaan helayaa cid kale oo ka wargalsan"[75]

Axmad bin Xambal oo u qaboojinaya ayaa isna yiri; " Waxa uu leeyahay axaadiis aan la qaadan karin, laakiin waan iska qoraynaa wixii uu inoo sheego si ay tusaale ama cibro noogu noqdaan"[76]. Waxaa la weydiiyey Abuu Da'uud; " ma la xujaysan karaa xadiis uu Camra bin Shuceyb ka weriyey aabihii iyo awoowgii"?. Markaa ayuu ku jawaabay; "Xujjo iyo xujjo badhkeed toona ma ahan"[77]. Yaxye bin muciin ayaa yiri; "mar hadaad maqashaan Camra oo leh; waxaan ka weriyey aabahay ama awoowgay, ka taga waa daciif

[73] - Siyarul iclaam. Jus: 5, bog: 166. Iyo Tahdiib al-tahdiib. Jus: 8, bog: 48

[74] - Al-jarxu wa tacdiil. Jus; 6, bog: 239. Iyo Al-miizaan. Jus: 3, bog: 265

[75] - Siyarul iclaam. Jus: 5, bog: 166

[76] - Al-miizaan. Jus: 3, bog: 260. Tahdiib al-tahdiib. Jus: 8, bog: 49

[77] - Al-miizaan. Jus: 3, bog: 264. Tahdiib al-tahdiib. Jus: 8, bog: 50. Iyo Siyarul iclaam. Jus: 3, bog: 264

warkiisuye"[78]. Waxaa ugu daran inta xadiisyadiisa beenaysiisa Ayuub kii reer Shakhtayaani ahaa, oo isagu haddii uu damco in uu u fariisto Camra bin shuceyb si uu cilmi uga dhegaysto dabooli jiray wejigiisa si aysan dadku u arag oo u ceebaynin[79].

Isku duuduub ahaan akhristow xadiiskani waa mid ay culimada ku takhasustay hawlaha xadiisyadu daciifiyeen - qireen in uusan sugnayn[80].

[78] - Ibnu Muciin, Taariikh. Jus: 2, bog: 446. Iyo Tahdiib al-tahdiib. Jus: 8, bog:49
[79] - Al-jarxu wa tacdiil. Jus: 6, bog: 238. Siyarul iclaam. Jus: 5, bog: 169
[80] - eeg; sunan al-kubraa. Jus: 8, bog: 96

2. 4: **XADIISKA CAMRA BIN XAZAM EE KU JIRA ' AL CUQUUL'**

Xadiiska saddexaad ee ay cuskadeen inta ku dooday in ay diyada dumarku tahay midda ragga badhkeed waxa uu yahay sida soo socota:

Xakam bin Muusa ayaa laga soo weriyey in uu yiri; "Yaxye bin Xamza ayaa inooga waramay Suleymaan bin Da'uud oo yiri; "Zuhri ayaa iiga sheegay Abii Bakar bin Maxamad bin Camra bin Xazam oo ka maqlay aabihii, oo isna ka maqlay awowgii in uu Nebigu "NNKHA" u qoray reer Yeman kitaab - warqad uu ku sharaxay xukumo la xiriira arimaha; faraa'idka, sunanka, iyo diyada. Waxa uu fartiintaas u dhiibay Camra bin Xazam oo ku dul akhriyey dadkii reer Yeman dhammaanba wixii ku qornaa koobiga warqaddaas uu asalkeediina haystay Nebigu (NNKHA). Waxaa laga akhriyey sida soo socota:

KA: Maxamad kii Nebiga ahaa (Nabad gelyo iyo Naxariis Korkiisa Ha ahaatee).

KU: Shurxabiil bin Cabdi Kulaal, Naciim bin Cabdi Kulaal, Al-xaaris bin Cabdi Kulaal, Qayl di Rucayn, Mucaafir iyo Hamdaan.

“Intaas ka dib/ Ujeeddo:

“. . . Waxa ay tani caddaynaysaa in qofkii ay ku cadaato in uu ku dilay qof Mu'min ah si sharci darro ah loo dilayo; in ay ciddii qofka laga dilay iska cafiso mooyee. Waxa kale oo ay tani caddaynaysaa in magta qofku ay tahay boqol geel ah. Haddii qofka sanka laga gooyana waa loogu mag qaadayaa. Sidoo kale waxaa looga mag qaadayaa; carabka, bashimaha, xaniinyaha, guska, lafdhabarta,

indhaha. Halkii lug oo la gooyaana waxa loo bixinayaa diyadii qofka badhkeed. Dhaawaca la gaarsiiyo madaxa gudihiisana ama la caddeeyo ilaa maskaxda waa saddex u dhig dhigga diyada qofka. Dhaawaca la gaarsiiyo caloosha gudehedana waa saddex u dhig dhigga magta ruuxa. Lafta la jabshaana shan halaad/geel. Far kaste oo ka mid ah faraha gacanta ama lugta waa toban geel ah. Iligii la ridaana waa shan geel ah. Laftii la caddeeyo/ hilibka laga diirana waa shan geel ah. Ninkana waa loo dilayaa haddii uu naag dilo. Dadka dahabka isticmaalana waxa dhiig ahaan u bixinayaan kun diinaar"[81]

[81] - Waxaa soo weriyey Nisaa'I . jus: 8, bog: 57-58. Fil Al-qasaama

CUTUBKA AFRAAD

MA LOOGA QIYAAS QAADAN KARAA AAYADDA DHAXALKA IN AY MAGTA DUMARKU NUS TAHAY?

4. 1: DAWGA IYO DAWRKA QIYAASKA EE SHARIICADA

Kuwa ugu tabarta yar daliilaha ay culimadaasi isku hallaynayaan waxaa ka mid ah; in ay leeyihiin diya ku kala qiima saraynta ragga iyo dumarka waxa aannu uga qiyaas qaadanaynaa Aayadda dhaxalka iyo Aayadda markhaatiga deynta. Jawaabtuse waxa ay tahay, ugu horayba horta; Waa maxay Qiyaas? Heerkeebuu ka taagan yahay sharciyeyta Islaamka? Muxuu shuruudo iyo arkaan leeyahay? Sidee loo sameeyaa Qiyaaska? Waa maxay xukunkiisu? Halkeebuu galaa? Maxaa laga faa'iidaa? Maxaa la isaga qiyaas qaataa? Iyo Su'aalo kale oo aan iyaguna goobta ka maqnaanaynin marba haddii faalada Qiyaaska la soo dhex galo.

Anaga oo isku dayayna bal in aan si aad u kooban uga jawaabno su'aalahaas aan horay ku soo xusnay waxa aan ku bilaabaynaa bal macnaha lagu fasiro Qiyaas xag luuqad ahaan iyo xad sharci ahaan labadaba.

Marka aan ka eegno xagga luuqa ahaanta waxaa lagu fasiraa isku qadarid, oo waatan la yiraahdo; shaygaan waxaan uga qiyaas qaadanayaa sheygaas, taas oo macneheedu yahay qadarka uu yahay ama leeyahay oo kale ayuu kana leeyahay ama yahay[82].

Marka laga eego xagga sharci ahaanta ama guud ahaanba cilmi ahaanta, waxa aan soo qaadanaynaa habka ay u fasireen culimada ku takhasustay cilmiga Usul al-Fiqhiga.

[82] . Lisaan al-Carab. Boga: 3773, sidoo kale eeg; Mukhtaaru saxaax, boga: 555.

Qeexitaanka koowaad ee Qiyaaska, waxa ay ku qeexeen in uu yahay: Isla ekaynta ama isku si u arkida shay asal ah iyo fariciisa, sababta oo ah in ay isku cilladi ama xikmadi (cillad iyo xikmad labadaba hoos dhaw ayaan ku qeexi doonaa) ka wada dhexayso[83]. Macnaha labaad ee uu Qiyaasku leeyahayna waxa uu yahay: "ku sugidda xukun la yaqaan mid kale oo la yaqaan sababta oo ah in ay wadaagaan cillad xukun ee ku sugnaatay kan hore ee wax lagu sugayo, ama asalka ah"[84].

Si guud haddii aan u furfurno macnihiisa iyo hab dhaqan gelintiisa, Qiyaasku waa wax ay isticmaalaan guud ahaanba dadka xukun qaadayaasha ihi. Waa wax laga heli karo kulli sharci gaallo iyo mid Muslimba. Tusaale, marka sharciyada gaalada la doonayo in arin xal loo helo waxa ugu weyn ee la cuskado, dastuur qoran dabadiis waa in la baro xukun horay u dhacay – *precedence* ama waxa loo yaqaan "*case*" .

Marka aan ka eegno xagga xeer Soomaaliga ama sharciga dhaqan ee dalkeena – *customary law,* waxa ugu horeeya ee ay odayaashu is weydiiyaan marka garta loo soo bandhigo waxa ay tahay: " Xaajadu ma ugub baa mise waa curad"?. Taas oo macneheedu yahay in la ogaado bal in tan oo kale ay horay u dhacday iyo in kale. Haddii ay helaan in mid tan la mid ihi ay hadda ka hor dhacday, waxa ay ku xukmiyaan isla tabtii lagu xukmiyey tii hore, haddii ay toos ula mid noqon weydo tii horena way isaga qiyaas qaataan. Isku duuduub ahaana qiyaaska kor waa laga wadaagaa laakiin waxa ay ku kala duwan yihiin midka ay sameeyaan gaaladu ama xeer Soomaligu waxa uu ku salaysan yahay tijaabooyin iyo is dhaafsiin loo raacayo kii hore oo laga yaabay in qudhiisaba si qalad ama gef ah loo xukmiyey. Sidaas ka soo horjeedkeeda kan Islaamku waxa uu ku dhisan yahay xukun guud oo uu Eebbe ku caddeeyey diintiisa oo la doonayo in laga dhigto asal laga duulo si wax kaste oo soo cusboonaada loogu helo xal waafaqsan sharciga Islaamka.

Jawaabta su'aasha ah sideebaa loo smeeyaa Qiyaaska, waxa ay noqon kartaa sidatan: Haddii ay timaado dhacdo

[83] . eeg; Sharxu al-cadt-di claa mukhtasir Ibnu al-Xaajib, Juska 2 aad: boga: 204, iyo sidoo kale; Bayaan al-mukhtasir juska 3 aad: boga: 5 aad.

[84] . eeg: Al-Minhaaj bi Sharxi nihaayat al-suul. Jus: 3, bog: 3 aad.

ama arin aan laga helayn xukunkii la saari lahaa kitaabka Quraanka ah iyo Axaadiista toona, ee markaasna ay lama huraan tahay in loo helo xal waafi ah, waxa uu markaa sheekha mujtahidka ihi ka doonayaa xukunkeeda dhacdo laga helayo xukunkeeda Quranka ama axaadiista. Tilmaanta uu ku baadi goobayo xukunkaasna waxa keliya oo ay tahay in ay labada dhacdo isku cillad leeyihiin oo ay isku shabahayaan xagga caaqibada ka askumaysa marka ay dhacaan. Haddii uu hadaba sheekhaasi helo in ay labada walxaato isku mid ama isku si yihiin, taas oo noqonaysa in dhacdada cusub sababayso caaqibo la mid ah midda ay sabayso tii horay loo yiqiin, waxa lagu xukminayaa isla xukunkii tan horaysay lagu xukmiyey ee lagu sheegay Quranka ama Xadiiska[85]. Tusaale ahaan Eebbe wax walba oge, ayaa xaaraantimeeyey Khamriga sababta oo ah in ay cilladiisu tahay sarkhaanka uu maskaxda ku keenayo awgeed. Hadaba haddii la arko in Qaadka iyo xashiishku ama tubaakatu ay sababyaan cillada ah "sarkhaanka, ha yaraato ama ha badnaatee" waa xaaraam sida khamriga oo kale.

Haddaan usoo dhaadhacno su'aasha ugu dambaysay ee ah "Maxaa la isaga qiyaas qaataa? ma laba walxood oo kala duwan mise laba walxood oo isku nooc ah?. Run ahaantii qiyaas la isaga qiyaas qaatay laba walxood oo kala duwani wax kale ma ahan ee qiyaas qalad laga fahmay ama la marin habaabiyey. Waxa ay culimada Fiqhigu qiyaaska noocaan oo kale ah ku tilmaamaan in uu yahay "*Qiyaas macal faariq*", qiyaas marin habaabay. Sidoo kale waxa uu noqonayaa *Qiyaas faasid*, qiyaas fasahaadeed. Waxa ay ka soo qaadaan culimadu kaas oo kale tashwiishin loo geysanayo sharciga Islaamka, wax aqoonsi ah oo ay siiyaana warkeed ma jiro. Waxaana xaq iyo xaqiiqo aan la dhaafi karin ah in ay Cilladu tahay tiirka ugu weyn ee aan la dhaafi karin marka qiyaaska la samaynayo. Haddii aan sidaas la yeelina qiyaaska la sameeyey waa baadil oo ma ansaxmayo, wax macno ah

[85] . Dr. Maxamad Ibrahim al-Xafanaawi, Tathkiiri al-naas bimaa yaxtaajuuna ileyhi minal-qiyaas. (Dar al-Xadiith; Qaahira, 1995) bog: 83.

oo uu samaynayaana ma jirto. Sidaas ayaa ah sida ay kulliba culimada Islaamku isku raacsan yihiin[86].

Haddii ay dadka qaarkii leeyihiin wax kala duwan baa la isaga kala qiyaas qaadan karaa, hadde waa in ay bal mar kale dib u eegaan shuruudaha qiyaaska ee aan qaarkoodba halkaan ku xusayno (cinwaanka aanu kaga hadlayno kala barashada waxa ay kala yihiin Cilla iyo Xikma). Haddii ay dad kale leeyihiin waxaa la isaga qiyaas qaataa laba walxood oo isku nooc ahna, hadde waxa aad qirteen in ay rag iyo dumar isku nooc is qaadan kara oo la isaga tusaale qaadan karo yihiin ee isku xukun iyo isku xaq siiya. Waxaase iga sii weydiin ah sidee ayuu nin faqiih ihi isaga qiyaas qaadan karaa laba wax oo hadana ukala siin karaa laba xukun oo kala mudan ama kala duwan?. Doodaas waxa aan isaga soo af jari karaa; Haddii aad leedihiin waxa aan dhaafayna shuruudihii Qiyaaska oo xukun rag iyo dumar ku kala saabsan baan isaga kala qiyaas qaadanaynaa, waa in aad ogolaataan in ay dhan walba ku siman yihiin labadu.

Waxaas oo dhan waxaa ka sii horeeya aan aniga iyo culimadu su'aashan is weydiinee, Qiyaasku booskeebuu ku leeyhay baabka diyada gaar ahaan? Waxaan leeyahay marnaba qiyaasku kuma imaan masaa'ilka ku saabsan diyada, waayo diyadu waa wax iska go'an, qiyaasna mas'alo ay mar hore shareecadu iska goysay boos uu ka soo ciriirsado kama heli karo[87].

Intaas oo dhan midda ka sii horaysaa waxa ay tahay; waxa ay culimadu ogsoon yihiin in aysan qaybta dhaxalku markaste ahayn in ay dumarku qaataan qaybta ragga badhkeed ee ay asal ahaan tahay in ay ragga iyo dumarku si isla eg u qaybsanayaan dhaxalka. Marka ay dhawr siyood isu la'ekaystaan ayey mar qudh ah kala badsnayaan, taas qudheeduna ma ahan in ay kala badsanayaan ee waxa ay tahay in mid walba qaybtiisii *account* - xisaab gooni ah laga siinayo. Sida soo soctaa waa faallada jumlooyinkaas sare:

Haddaba haddii aan dhaxalka iyo diyada isaga kala qiyaas qaadano, waxaa warka joogaa miyey asalka iyo faraca aan

[86] . eeg; Sharxul-kawaakib al-muniir. Jus: 4 aad, bog: 15-16

[87] - eeg; Sacad filib. Nata'ij al-afkaar fi kashfi rumuuz wal asraar. Jus: 10. Kitaab Al-diyaat. Bog: 177

isaga kala qiyaas qaadanay is waafaqsan yihiin. Waxaa jirta in mid kaste oo ka mid ah faraca ama asalka uu leeyahay shuruudo go'an oo hadduu soo buuxiyo uu la qabsanayo kan kale, haddii uu soo buuxin waayana waxa uu raaacayaa waddo kale oo waxaa go'aya wixii cilaaqaad xukun ah oo la isla siin lahaa.

Aan ku horaynee, shuruudaha mas'alada faraca noqonaysa ee xukunkeeda lagu sidkayo xukunka mas'alada horay u jirtay looga baahan yahay in ay soo buuxiso waxaa ka mid ah:

B. Waa in aysan jirin waxa nas ah (xukun lagu sheegay Qura'nka ama Axaadiista) oo quseeya mas'alada ugub ee wax lagu sidkayo. Haddaaba mar haddii aan dhawr xadiis iyo aayado ka waramaya magta qofka Muslimka ah iyada oo aan rag iyo dumar loo kala saarin, miyaanaan waxa daliil ama nas uga haynin kitaabka xukunka lagu qaadayo magdhawga dumarka?. Haddii weli la leeyahay looma hayo xukun, hadde ha la soo caddeeyo in aysan haweenku bani aadam ahayn, hana laga joojiyo wax alla wixii xukun iyaga ku saabsan ah ee laga helayo diinta. Kol haddii xukun lagu caddeeyo Kitaabka looma baahna in uu xukunkaasi dadka mid mid ugu dhawaaqo ama uu magacyadooda iyo noocyadooda tiriyo ee waxaa muhim ah in uu amar guud baxsho. Marka uu sidaas xukun u dhacana qiyaas meel beel, waxa ay mas'aladu noqonaysaa mid xukunkeeda laga helo kitaabka ee aan laga qaadan qiyaas. Sheekh al-Asfahaani waxa uu yiri: " waxa ugu horeeya shuruudaha faraca in uusan xukun ka haysan kitaabka, haddii kale waxa uu noqonayaa mid uu xukunkiisu ku sugan yahay kitaabka ee uusan ku imaanin hab qiyaaseed"[88].

T. Shardiga labaad ee mas'alada farciga ah ee lagu sidkayo mas'alada asalka ah waxa weeye; in ay ahaato mid kula siman mas'alada asalka ah cillada xukunka dhalinaysa. Waayo hadba inta ay cilladooda xukun isla egtahay ama isku mid tahay ayaa labada mas'alo la isga kala xukun qaadan karaa, oo isku go'aan la siin karaa.

J. Shardiga saddexaadna waxa uu yahay; In uu xukunka faraca ihi kala mid noqdo xukunka asalka ama noociyadiisa ama jinsi ahaantiisaba. Sheekh Sabaki oo

qodobkaan ubogay ayaa waxa uu leeyahay; “Kani waa shardi la ictibaariyo, shaki la’aan la qadariyo, waxaana ku tusinaya hadalkeena (qaacido Usuli ah) ah: “Qiyaasku waa ku sugid xukun la yaqaan isla noociyada xukun kale oo la yaqaan”[89].

Dhan kale marka aan ka eegno waxaa jira shurrudo dhawr ah oo loo dejiyey Cillada lagu saleeyo Qiyaaska. Kuwaas oo aan aad ugu faahfaahinay kitaabka “ Maragfurka Dumarka oo Loo eegayo Shariicada”, waxa aan halkaan ku xusaynaa dulmar inta naga qusaysa. Cillada waxaa u shardi ah:

1. In ay ahaato sifo go’an. Taas oo macneheedu yahay in ay lahaato xaqiiqo mucayan ah oo aan is khilaafaynin marka ay shakhsiyaadku ama umuuruhu is khilaafaan. Sidoo kale marka ay waqtiyada iyo dhaqamadu is badelaan. Wax kaste oo is badela waa in ay cilladu barteedii taagnaataa oo joogto rasmi ah noqotaa.
2. In ay ahaataa mid cad oo banaan taalla, aana u baahnayn baaritaan si loo xaqiijiyo. Sababta oo ah waa calaamaddii ugu weyneyd ee lagu garanayey xukunka la goynayo.
3. In ay ahaataa mid markaste ku xiran mas’alada loo saarinayo. Haddii iyada la waayo waxaa isla markiiba la wayayaa wixii loo cillaynayey, haddii iyada la helana wixii wax lo cillaynayey waa la helayaa.
4. In aysan cillada xukun ahaan ugu sugan faracu aysan ahayn mid xukun ahaanta la siinayo ku khilaafaysa kitaabka Quranka ah ama Sunnaha. Haddii kale qiyaaskaasi waxa uu noqonayaa mid faasid ah.
5. In aysan ahayn mid ka hor imaanaysa cillad kale oo burinaysa xukunkeeda, taas oo iyaduna meesha si cad uga muuqata.
6. In uusan jirin wax daliil ah oo siinaya xukun. Ha ahaado mid guud ahaaneed ama mid gaar ahaaneede. Haddii akle way ka nmaarmaysaa qiyaaskaba oo waxa ay mas’aladaasi noqonaysaa mid daliil cad isk a haysata.
7. In aysan cilladdaasi ahayn mid dabiici ahaan ku eg mas’alada asalka ah oo aan gudbininba. Sababta oo ah waxa la rabaa in cilladaasi ay ahaato mid meelo kale

[88] . Bayaan al-Mukhtasir, jus: 3 aad, boga: 85.
[89] . . al-Xafanaawi, (horay) bog: 135.

marar kale laga helo, haddii kale faracu maba helayo wax uu ku shabaho asalka, wax xiriir ihina markaas kama dhaxayn karaan labadooda.

8. In ay ahaato sifo ku haboon xukunka. Taas macneheedu waxa weeye, waa in uu xukunka la baxshay ahaadaa mid ay wax faa''ido ihi ka askumayaa, oo ay aadanaha dani ugu jirtaa. Sidaas ka soo horjeedkeedana waa in uu ahaadaa mid ka hortagaya oo mancinaya dhibaato ama fasahaad dhici lahaa. Tusaale ahaan, haddii qof kas cad oo cadwtinimo ah loo dilo, waxa uu xukunkiisu noqonayaa in dhibanihii ama dadkiisii looga qisaas qaado gacan ku dhiiglihii, waayo tani waa danta umadda oo waxa ay sababaysaa in dib dambe loo xifdiyo nafta aadanaha, iyo in dhibka iyo fasahaadka laga joojiyo dunida, iyo in laga hortago waadiyaal dhiig ah oo daadan lahaa mar haddii aan la qancin ciddii qofka laga dilay, iyo dhawritaan dadka laga dhawro in ay ku noolaadaan nolol ku dhisan colaad iyo cadaawad. (sida tan maanta ka taagan Soomaaliya). Eebbe weyne oo taas xikmad ahaan inoogu cadaynaya ayaa waxa uu yiri:

" Waxaa Qisaasta idiinkugu jirta nolol kuwa caqliga lohow"[90].

[90] . Quraanka: al-Baqra: 179.

QUR'ANKA OO QAYBINAYA DHAXALKA

Ilaaha awoodda sare leh ayaa waxa uu si aynaan dib isaga qabsanin oo uusan isku dhac qoyseed nooga dhex dillaacin, waxa uu si far waa weyn ah inoogu bayaaniyey sidii aan ugu qaybin lahayn dhaxalka cidii uu qofkoodu dhinto oo xoolo uga tago. Waxaa mid Eebbe in gaar ahaan looga sii mahdiya ah in dhaxalka qaybintiisu ay Qura'nka ugu jirto si aad u casriyeysan oo waqti walba oo jira si hal haleel ah ula saan qaadaysa. Waxaa xusid mudan in dhawaan caalamku bartay noocyada hab xisaabeedka ku jira Qura'nka ee lagu kala dhig dhigayo qaybinta dhaxalka.

Intaas haddaan horudhac ahaan u dhahno, aan ku bilowno qoraalkaan sida uu Eebbe uga afeeftay in ay dhacdo wax dhaxal isku khilaafid ah, iyada oo weliba sidaas loo bayaaniyey go'aanka. Ilaah waxa uu Qura'nka ku leeyahay: "Raggu waxa ay ku leeyihiin nasiib – sed wixii ay uga tageen labadoodii waalid. Dumarkuna waxa ay ku leeyihiin nasiib wixii ay uga tageen labdoodii waalid. Ha yaraado hase badnaadee wixii aad ka heshaani waa sed lagu qadaray si la faral yeelay"[91].

Si loogu sii faah faahiyo aadanaha awaamirtaas Rabbaaniga ah ee la xiriira kala xaq siintooda, waxa uu aayad kale oo si caam ah uga hadlaysa in dadku aysan isku ximinin waxa Ilaahay siiyey ee u kala dheeraysiiyey hanti ahaan iyo sharaf ahaan tii ay ahaataba. Aayaddaan soo socota waxa uu Ilaahay sida aayada aan kor ku soo xusnayba gooni ahaan carabka ugu qabtay ka digitaanka uu ka digayo in ay dadku isu kala ximiyaan ama isku xaq duudsiiyaan iyaga oo cuskanaya jinsi takoor, ay isugu kala saarayaan hab ku dhisan abuurkii uu Eebe dadka ka kala dhigay rag iyo dumar. mid taas garab socota oo uu Ilaahay ku caddaynayo aayadda iyana waxa ay tahay in qof walbaa adduun iyo aakhiraba uu helayo oo keliya uun wixii uu shaqaystay. Sidaas darteed haddii uu qof arko in qof kale uu ka hanti badan yahay uusan u arag in ay halkaas eexi ku jirto ama ay tahay sababta uu ku helay nooca jinsi ee uu yahay ee uu u arko in taasi ay tahy wax

uu ruuxaasi shaqaystay. Waxa uu ilaahay leeyahay sidatan soo socota;

“Ha damaacinina wixii uu Ilaahay idin kala dheeraysiiyey. Raggu waxa ay leeyihiin wixii ay sed kasbadaan (shaqaystaan), dumarkuna waxa ay leeyihiin wixii ay sed kasbadaan, ee Ilaahay fadligiisa (deeqdiisa) wax ka weydiista, runtii Ilaahay isagaa wax walba oge”[92]

Ilaah, wax walba oge, waxa uu ina faray in aan qayb ragga ka mid ah iyo qayba dumarka ka mid ah si isla eg ugu qaybino dhaxalka. Kuwaasi waxa weeye labada waalid. Waatuu Ilaah leeyahy: "Mid kasta oo kamid ah labadiisa waalidna waxa uu mudanayaa lix meelood meel - *sudus*, hadduu caruur ka tegay"[93].

Aan is weydiinee sow Hooyo dumar ma ahan? Maxay iyada iyo saygeedu dhaxalka caruurtooda in isla eg uga helayaan?. Hadaba hadaad diyada dhaxal uga qiyaas qaadateen, dee hooyo kastaa waxa ay la mid tahay ragga ee u ogolaada in ay diyadeedu boqol tahay. Mar kale Eebbe sareeye, waxa uu ina faray in aan si isla eg ugu qaybino dhaxalka wiilka iyo gabdha walaalaha ah xoolihii uu ka tagay walaalkood. Waatuu Eebbe yiri;

"Haddii ninka ama haweeneyda la dhaxlayaa aanu lahayn waalid iyo awlaad toona, uuse leeyahay walaal ama walaalad - rag ama dumar kay ahaadaanba, mid walba oo iyaga ka mdi ihi waxa uu helayaa lix meelodd meel - *sudus*"[94]

Mar kale haddaan is weydiino miyeysan aayadani cadaynaynin in ay rag iyo dumar weliba ku siman xagga qadarinta oo wada dhashay ay isku in ka helayaan xoolihii ay wada dhaxlayeen?. Hadday tani caddaatay, dee inanka iyo inanta walaalaha ihi way siman yihiin, waana isku xuquuqe, hala simo diyadooda. Markaan doodda noocan ah soo gaabinno aan is weydiinee sow dumarku ama hooyo ama walaal ma ahan? Hadday sidaas tahay sow kuma aragno Quraanka Suuradda Al-nisa, in ay labaduba dhaxalka kula siman yihiin ragga dhiggooda ah?. Hadday taasi dhabowday maxay tahay Qiyaaska la soo hadal

[91] . Qura’nka: al-Nisaa: 8.
[92] . Qura’anka: al-Nisa: 32.
[93] - Quraanka; al-Nisa'; 11.
[94] - Quraanka;al-Nisa'; 12.

qaaday ee kala saraynta iyo xoola kala badsashada lagu kala mutay, ka dib markii naf aadane la gooyey?.

Aan halkay doodu ka dhimanayd ka awdnee, waxa aannu u imaanaynaa aayadda caddaynaysa in ay wiilka iyo gabadha isla dhashay kala badsanayaan qaybta dhaxalka ay ka helayaan xoolihii uu aabahood ka tegay. Ilaah, cilmi iyo xikmad badne, waxa uu yiri; "Wuxuu idiin dardaarmayaa Alluhu caruurtiina, wiilku waxa uu leeyahy nasiibka laba gabdhood"[95]

Haddaba aannu isla eego macnaha iyo xikmadda ay Aayadani xambaarsan tahay. Guud ahaanba waxa aan halkaan ku caddayn karnaa in haddii dhab ahaan loo xisaabtamo laga yaabo in xisaab dheeri ihi raacdo gabadha. Si aan hadalka u faahfaahino waxa aan tusaale usoo qaadanaynaa mas'alo dhaxaleedkaan soo socota;

Aabbe ayaa qadar lacag ah waxa uu ka dhintay qoyskiisii oo ka koobnaa; wiil curad ah, saddex gabdhood oo yar yar ah- mulqo ama milcis ah, iyo hooyadood. Hooyo waxa ay qaadatay ugu horayntiiba sideed meelood oo meel xoolihii la dhaxlayey. Intii soo hartay ayaa hadana wiilkii waxa uu qaatay in la eg inta ay labada gabdhoodba qaateen. Ka soo qaad in ay afar kun oo shilin soo dhexmartay in loo qaybiyo caruurtii oo wiilkii la siiyey laba kun, labadii gabdhoodna min hal kun.

Markay xoolihii sidaa u qaybsadeen waxaa soo baxaysa su'aal ah ayey saaran tahay mas'uuliyaddii reerku?. Shaki la'aan marka dhaqan loo eego iyo marka diin loo eegaba waxa ay si hal haleel ah mas'uuliyaddii reerku u fuulaysaa wiilka qoyska siiba haddii curad yahay. Haddaba, wiilkaas waxa dusha ka fuulaya waajibka ah in uu masruufo guud ahaanba qoyska, hooyadii ugu arad tiro sidii aabihii ama ka fiican, gabdhaha walaaladiis ah u gado waxyaalaha ay ubaahan yihiin oo dhan, ha ahaadeen baahi dumareedka dheeriga ah ama tan daruuriga ahe, in uu xiriiriyo oo dhaqaaleeyo asxaabtii iyo deriskii uu aabihii dhaqaalayn jiray, iyo guud ahaanba in uu daboolo baahiyadii jiray.

Intaa baahida qoyska ah marka la dhaafo wiilkaas waxaa laga rabaa in uu guursado. Si uu uguursadana waa in uu kharash fara badan galaa; meher baxshaa, yarad baxshaa,

[95] - Quraanka; al-Nisa'; 11.

hadiyado baxshaa, gabaati baxshaa, sooryo baxshaa, guri dhisaa, guri dhigaa, dhar sare u gadaa gabadha, waalidkeed, naftiisa, waalidkiis, walaaladiis, walaaladeed, iwm. (waa marka laga hadlayo guur sharafeede). Kaba dhig in uu rag noqday oo intaas iyo wixii kale ee lagu xujeeyeyba ka soo baxay, waxaa u haray hadana tii dhabta ahayd ee ahayd in uu ugu yaraan ka soo dhalaalaa masruufka iyo marashada xaaskiisa, caruurtiisa iwm. Sidaa si la mid ah waajibkiisu waa guud ahaanba dhaqashada gurigiisa ee dhan walba leh iyo weliba xil iska toosinta.

Sidaa si ka soo horjeeda waxa aan shilinna Allaha ka dhigee la weydiinayn halka ay mariyeen gabdhihii. Iskaba daa in wax la weydiiyee iyagii ayaa had iyo jeeraale lala daba taagan yahay in la maal geliyo. Inta ay yarayd oo dhan waxaa gabadhaas xilkeeda soo hayey inankii walaalkeed ahaa. Markii ay soo kacday ee ay xoog nooqtayna waxaa kharash culus la soo dul istaagay nin guur doon ah, waxa uuna ku beelayaa intii aan soo sheegnay. Marka ay guri gasho waxa ay ka sugaysaa luqmaddii ay cuni lahayd ninka guursaday. Si kale haddaan hadalka u dhahno wiilka qaybtiisa isla markiiba xisaabteedii ayaa loo daba taagan yahay, laakiin gabahda cidi ma weydiin karto oo sidii ay doonto ayey u isticmaalaysaa ama ciddii ay doonto ayey iska siinaysaa.

Guntii iyo geban gebadii, waxaan soo saari karnaa in qaybta la siiyey wiilka aysan ahayn mid xorriyad daysan loo siiyey ee ay tahay in loogu dhiibay in uu ugu yaraan reerkii uu aabihii ka dhintay ku sii masruufo. Laakiin gabadha inta la siiyey waa in ay ugu yaraan ku illowdo aabeheedii ay jeclayd iyo in ay baahiyadeeda u khaaska ah ku daboolato sida barafuunadeeda iwm ee naash naashood ah. Haddaba ma waxaan arintaan u qaadan karnaa sed kala badsasho mise isticmaal xisaabo kala duwan. Midba Akoont, xisaab gooni ah ayaa wax loogu riday oo uu kala baxay. Markaa ayey noqotay in gabadhiina dhawr akoont oo kala duwan loo wada furay oo ay midba in ka qaadatay xisaabtii ay xaqa u lahayd, wiilkana isku hal akoont ayaa isku mar loogu shubay.

Waxaase yaab iyo dhekafaar ah in ay dad halkaan ka raadiyaan daliil tusaysa in ay raggu dumarka ka

sareeyaan, ka fiican yihiin, kana qiimo badan yihiin. Sidaa darteed ay ku andacoodaan qofkii dumar ah ee la dilo waxaa diyo ahaan loo siin karaa kala badhka inta ninka loo siinayo – 50 keliya.

Waxaa jirta in marka loo qaybinayo dhaxal Hooyo iyo Aabbe uu wiilkoodii aan caruur ka tegin uga dhintay iyaga iyo xaaskiisii: Marka ay xisaabta dhaxalku sidatan tahay waxaa loo kala helayaa: xaaskii waxaa la siinayaa kala badh xoolihii, hooyadiina waxaa la siinayaa saddex dalool dalool, aabihiina intii kale.

Tusaale; nin baa uga dhintay Shs.6000 dad ka kooban; Xaaskiisii, Hooyadiis, iyo Aabihiis. Haddaba marka qaybta dhaxalka sida uu Qura'nku u caddeeyey loo raacayo ayaa waxaa ugu horaynba xaq u leh in la siiyo kala badh oo badh xoolihii xaaskii uu ka dhintay. Sidaas darteed waxa ay xaq u helaysaa Shs. 3000.

> Iyada oo la raacayo hab xisaabeedka dhaxal Islaamka ayaa xoolihii waxaa lagu dhisayaa xisaab ahaan (6), oo ah "suduska" tiradaan. Marka lix meelood loo qaybiyo xisaabta oo badh la siiyo ninka xaaskiisii, waxaa saddexdii kun ee soo hartay loo qaybinayaa sidatan soo socota:

Marxuumka hooyadii waxa ay xaq u leedahay in la siiyo saddex ulood (goob) oo xoolihii ka mid ah, taas oo tiro ahaan dhamaanaysa: Shs. 2000, aabihiina waxaa ku soo aadaya xisaab dhan Shs. 1000. Halkaasna aabbe iyo hooyo waxaa xoolihii ku badsanaya hooyo oo qof dumara ah.

Mas'aladatan oo la dhaho "*mas'alat al-Qaraweyn*", waxaa dhacday in qaar culimada ka mid ah ay u cuntami weyday. Sidaas darteed ay ku taliyeen hab kale loo xiiladeeyo, waayo waxa ay ka soo horjeedaan in ay haweeney hesho xisaab ka badan tii uu ninku ka helay dhaxalka ay qaybsanayeen. Waxa ay u muuqataa in ay culimadaasi ka baqeen in ay khilaafaan aayadda kale ee uu Ilaahy ku leeyahy; "labku waxa uu mutaysanayaa laba jibaar inta uu dhedigu mutaysto". Sidaas darteed waxa ay go'aamiyeen in saddex daloolka hooyada la siinayo laga dhigo *"thuluth al-baaqi fi al-sudus*", halka ay ka ahayd

"*thuluth al-tarikat fi al-sudus"*. Hase ahaatee, waxaa la gudboonaan lahayd culimadaas in aysan maanka ka saarin habsami u socodka Shariicada Islaamka oo ku salaysan caddaalad iyo sinaan.

Faham daqiiq ah oo lagu bixiyo aayadaan waxa uu ina tusinayaa in saddex meeloodka la siinayo hooyadaan uu yahay mid ka go'aya madaxa ama raasumaalka xoolihii la dhaxlayey ee uusan ahayn mid soo haraya. Waxa uu markii ugu horaysay aayadda Ilaahay ku sheegay in mar haddii ay aabbe iyo hooyo ilmahoodii dhaxlayaan hooyada la siiyo saddex meelood, laakiin lamaba sheegin inta uu aabuhu helayo, taasina waxa ay tusinaysaa in qaybta hooyadu ay tahay mid ku imaanaysa "ahlu faral" ahaan, halka ay tan aabauhu ku imaanayso hab "casabo " ahaan. Waxayna taasi si cad inoo tusinaysaa in ay hooyadu ugu horayntiiba xoolaha ka qaadanayso saddex meeloodkeeda, ka dibna aabuhu sugayo wixii usoo hara[96]. Waxaa kale oo isnaa taas sii taageeraya hadalka rasuulka NNKHA tee ee ah: *"ilxiqu al-fara'id bi ahliha"*
"haleelsiiya faraa'idka ciddii iska lahayd"[97]

Waxaa la arkaa in ay cilladdu ka timid ka dib markii ay qaacido guud ka dhigteen fikradda ah in uu ninku halka aayaddaas uga xoola badsaday naagta jinsi ahaan awgeed ee aysan wax kale jirin. Laakiin marka arinta lagu fiirsho il ballaaran oo caddaalaad dhexdhexaad ah ku shaqaynaysa, waxaa la arkayaa in aayadanina ya qusayso qolo gaar ah iyo munaasabad gar ah, middaan aan iminka sharexeeda ku jirnaana munaasabad gooni ah. Midina waa haddii ay wiil iyo gabadh wada dhashay xoolihii aabahood isla dhaxlayaan, midina waa haddii ay nin iyo xaaskiis isla dhaxlayaa xoolo uu ka dhintay wiilkii ay iska dhaleen.

[96] . Cabdiraxmaan bin Naasir al-Sacadi, Taysiiru al-kariim al-raxmaan fi tafsiiri al-kalaam al-manaan. Jus: 1 aad, boga: 13 ee aayadda 11 aad ee al-Nisaa:. Daar ibn al-Jawzi.
[97] . isla horay. Boga: 16.

Haddaba bal aan eegno habka xoolahan la dhaxlayo loo qaybinayo ee ma rag baa iminka xoolihii badsaday mise dumar. Hooyo iyo aabbe waa sinaayeen markii hore ee markaan waxaa laba jibaar badsaday hooyadii. Mas'alada habkaan dhaxal qaybin oo loo yaqaan *"Mas'alat Qarawiyiin*" ama *mas'alat al-Curmiyiin*", waxaa jirta in qaar culimada ka mid ihi ay ku doodeen in saddex dalool daloolka la siinayo laga siinayo hooyada inta ay xoolaha oo dhami isku jiraan oo aan weli laka qaybin. Markaas ayeyna hooyada helaysaa xisaabta aan soo sheegnay ee ka badan tan aabuhu uu helayo. Waana sidaas sida ay aayaddu bayaanisay. Laakiin culimadii ay u cuntami weyday in ay naagi nin dhaxal ka badsato waxay ku doodeen in qaybta hooyada la bixinayo ka dib marka xoolaha la qaybiyo lagana bixinayo inta soo harta. Markaas ayey xisaabta hooyadu ka yaraanaysaa tan aabahae. Waayo, waxay leeyihiin, haddii aan sida horay lagu xusay u qaybino waxaa dhacaysa in ay badelanto qaacidadii ahayd in raggu ay dumarka ka badsanayaan qaybta laga helayo xoolo la dhaxlayo.

Si aan doodda ugu sii fogaano bal aan ukala dhig dhigno masaa'il dhawr qaybood oo isugu wada jaan go'an sida soo socota:

1. Mar haddii aabe iyo hooyo loo qaybinayo dhaxal ay cid kale kula jirto waxa uu midkoodba helayaa lix u dhig dhig. Ilaahay baa yiri:

"Labada waalidna mid kastoo ka mid ihi waxa uu mudanayaa lix dalool dalool hadduu ka dhintay caruur"[98].

Haddaba waxaa iga su'aal ah: war miyeysan hooyo haweeney ahayn? Ma kolkii ay hooyo wax dhashay oo la ixtiraamo noqotay bay ka dalacday heerkii haweenimo ee hooseeyey sida la ictiqaaday?

2. Mar haddii loo qaybinayo dhaxal caruur ama kuwa qaan gaaray ee

walaalo ah oo isugu jira wiil iyo gabadh, cidda la dhaxlayaana tahay walaalkood ama walaashoo waxa uu kiiba qayb ahaan u helayaa lix u dhig dhig. Haday bataana waxay wada wadaagayaan saddex u dhig dhig. Ilaahay baa waxa uu leeyahy:

"Hadduu yahay ninku ama naagtu mid la dhaxlayo isaga/iyada oo ah waalid iyo ilmo la'aan ayna dhaxlayaan walaashiis/sheed ama walaalkiis/keed, midkiiba waxa uu mudanaya sudus – lix u dhig dhig. Haday yihiin wax ka badan intaas waxay wadaagayaan thuluth - seddex meelood meel"[99].

Haddaba su'aashu waxay tahay haddii lagu doodayey waxa isku qaybta helayaa waa dadka waaweyn iwm. Miyeynan tani ahayn in ay laba walaalo ihi da'dii ay donaanba ha jireene ay qayb isla eg helayaan, tiiyoo aan loo eegaynin nooca dad ee ay yihiin.

3. Marka uu dhaxalku dhex yaallo dad rixim - qaraabo ah oo aan casabo ahaan wax ku qaadanaynin, tusaale ahaan: adeer, habaryar, ilamah ay kuwaasi sii dhaleen iwm. Waxaa dhaxalkaas loogu qaybinayaa si sinaan farasiman ah.
4. Marka dhaxal loo qaybinayo gabdh keli ah oo la dhalay iyo koox qaraabo ah waxa ay gabadhaasi helaysaa kala badh oo badh xoolihii uu waalidkeed ka dhintay, guud ahaan qaraabadeedii ay ku jireen adeeradeed, habaryareheed iwm waxaa dhex yaalla nuskii soo haray.
5. Hadduu qof ka dhintay gabdho walaalihiis/heed ah, waxay soo istaagayaan booskii gabdhihii uu/ay dhalay/shay. Haday mid tahayna waxay

[98] . Quraanka: an-Nisaa: 11.
[99] . Quraanka: an-Nisaa: 12.

helaysaa nus haday ka badan yihiinna saddex dalool oo dalool.[100]

Waxa ay doodu ku gaaban tahay, waa mid aan shaki ku jirin in uusan qayb ku kala duwgaani ahayn mid ay cilladiisu tahay jinsi ahaanta lab iyo dhedig, waayo haddii ay sidaas tahay isku qayb laguma siiyeen aayadaha kale ee aan soo xusnay. Midda kale waxa aan shaki ku jirin in uu xukunka aayadani khaas mar dhacdo ah yahay ee uusan ahayn xukun caam ah-guud ee ragow rag ma tahay iyo dumarow dumar ma tahay ay ugu kala qayb badsanayaan. Bal waa iga su'aale, saddexdaan aayadood oo isku xiga maxaa midda keligeed sheegaysa kala qayb badsashada caan ka dhigay, labada isku raacaysa qayb isla ekaysigana wax aan la ogeyn ka dhigay?.

Marka aan u soo noqdo xagga qiyaas qaadashada waxa aan ka leeyahay; kelmadda uu ka yiri; Sheekha weyn ee la yiraahdo; Maxamuud Shaltuth oo yiri; " Runtii waa gef aad u weyn ee la arkayo in qadarka ama qiimaha diyada ee ragga iyo dumarka looga qiyaas qaato dhaxalka"[101]

Sida la werinayo Afar keliya oo ka mid ah Asxaabtii ayaa laga maqlay wax ku saabsan kala badhkaan. Laakiin guud ahaanba Asxaabtii kale weligood lagama maqal lagumana sheegin, waayo maba aysan ahayn arin u baahan in laga hadlo. Sababta oo ah kalabadhkani waxa uu ka soo horjeeda guud ahaanba caddaaladdii diinta Islaamku ay darteed u soo degtay. Haddii ay dad is leeyihiin lagama hadlaynin arinta oo waxa ay ahayd mid aan hadal u baahnayn ee ku cad in ay kala qayb badan yihiin, kalana diya badan yihiin waxa aan leeyahay intaas ka soo horjeedkeeda. Taas oo ah in looga aamusay waayo la isma lahayn dad xaq fahmay bay ka suurtowda in ay ilaa xadkaas wax kala fadilaan oo kala qoqobaan iyaga oo ruux aadane ah xaqiisa duudsiinaya.

Waxaana laga yaabaa in uu mid miciin bido daliilsiga "Ijmaac". Waxaase markaa lama huraan ah in uu kaasi dhab u fahmo shuruudaha iyo qawaacidka u dhigan

[100] . Dr. Maxamad Dhucmah Suleymaan, al-wilaaya al-caama lil mar'at fil fiqh al-Islaami . bog: 70-75. Daru nafa'is, 1998. Urdun.

[101] - Sheekh Maxamud Shaltuth. Al-islaam caqiidatun wa shariicatun. Lagu daaabacay; Daaru shuruuq. Bog: 237

Ijmaaca laftiisa. Sidoo kale waa in la eegaa halka uu ku egyahay Ijmaacu iyo cidda uu ka guntamo iyo waqtiga uu guntamo intaba.

Sida uu ku dhisan yahay ama qaacidada u ah mabda'a "Ijmaacana" ee ay culimada oo dhami isku raacsan yihiinna waxa ay tahay in uu yahay: " wixii aan weligood khilaaf lagu maqlin, ijmaac ma noqdo, sida uu Ijmaacuba u noqonayo xujjo go'an haddii ay culimadu isku waafaqaan in uu Ijmaac yahay ee aysan isku khilaafin"[102].

Waxaa kale oo ka mid ah qaacidooyinka Usuuliga ah ; " in uusan malo maluhu – *muxtamalk*u xujjo noqonaynin gaar ahaan, wixii uusan cilmigu si go'an u waajibinaynin"[103]

Waxaa hadaba qiyaas aan laga fiirsan ah, qiyaaska dhaxalka looga qaatay diyada. Waxa ay kala yihiin laba shey oo aan isku miis loogaga wada hadli karin. Sheekh Maxamad Abu Zuhra oo ka hadlayey qaldanaanta qiyaaska noocan ah ayaa waxaa ka mid ah hadaladiisii in uu yiri; " Qiyaaska sidatan ihi waa fiiro gaar ah oo ku wejihan maal iyo dhuuni raacnimo ee ma ahan mid marnaba eegaya Bani aadaminimo, iyo in laga gudo eedaysanaha dambigii uu galay toona. Sababtu waxa ay tahay in waxa loo dan leeyahay ay tahay ciqaabka ku dhacaya nafta eedaysanaha ee aysan ahanay in la eegayo waxa ay ahayd nafta laga gardarsaday.

Taasna macnaheedu waxaa weeye in laga hortago in lagu xadgudbo naf aadane mar dambe, iyada oo aan loo eegayn noociyada ay tahay iyo qolada ay tahay toona. Diyaduna iskeeda ayeyba u tahay ciqaab loogu tala galay in uu ku dhaco gardarraalaha, iyo in lagu sabirsiiyo dadkii ay ka tagtay naftii la gooyey. Sidaas darteed waxaa lagama maarmaan ah in ay diyada dumarku si kasteba ula mid tahay diyada ragga. Mana suurtoobi karo ama sax noqon karo qiyaaska la isaga kala qiyaas qaadanayo diyada iyo maragfurka dumarka ee weliba la xiriira arimaha maaliyadda. Waayo maragfurka ay aayaddu sheegtay waa arin u gaar ah deyn is weydaarsiga oo keliya, ee aan marnaba ku lug lahayn arimaha iyo dacwooyinka kale.

[102] - Sharxul Jawaamic wa Xaashiyatu al-banaani. Jus: 3. Bog; 223. Lagu daabacay; Musdhafa al-xisi, sanadkii, 1356 ee H.

[103] - eeg; Usuulu Shaashi; Maktabat Imdaadiyah. Multaan, Pakistan. Bog; 49

Waxaana taas caddaynaya in uusan xukunka maragfurka noocan ihi mar kaste ku imaanin dacwooyinka iyo xukunada ay maalin walba qaalliyaalku qaadaan ama dhegaystaan. Haddaba waxa keliya ee uu ujeedka Aayaddu yahay tusaalayn sida haboon (*maqaamul irshaad ilaa dhariiqi al istaythaaq*) ee ay ku xasili karto nafta iyo xuquuqda labada waqtigaa isaga ah macaamilaysa[104].

Waxaa axaadiista ku signaatay in Nebiga (NNKHA) oo dhawr jeer wax iibsaday waxna daynsaday isaga oo aan markhaati u yeelin. Waxaa ka mid ah markii uu ka gatay Faraska ninka Yuhuudka ah isaga oo aan wax markhaati inaba haba yaraatee u samaynin. Taas ayaa hadaba wwaxa ay ku tusinaysaa in amarka aayadani uusan ahayn waajib sharciyeed (Iijaab) ee uu yahay guubaabin iyo dhiirri gelin (al-Nadbi).

Sababta taas caddaynaysaana waxa ay tahay in ay macruuf tahay in xukunka sharciga ihi uu yahay "hadalka Ilaahayga sareeya ee ku taxalluqa falalka mukallafiinta – Muslimka qaangaarka ah ee caqliga leh, si qadaa ahaan ah. Qadaaga waajibka ihina waxa uu yahay waxa la isaga dalbo si daysan, ha ahaado dalabkaasi mid la iska rabo in la sameeyo ama mid la iska rabo in laga fogaado samayntiisa. Hadaba dalabka la iska doonayo in la sameeyo ayaa waxa uu usii kala baxaa laba nooc oo ku kala derajo sareeya xagga xukunka. Waa mide, nooca loo yaqaan Iijaabka ee aan sinaba lagu dhaafi karin iyo nooca loo yaqaan Nadbiga ee aan ciqaab lagala kulmaynin haddii aan la oofin duruufo jira awgood. sidaas ka soo horjeedkeeda la dhigga ah waxaa ku imaanaya marka Ilaah faro ka fogaanshada fal aadane. Kaas oo ukala baxaya isna laba nooc oo kala gelaya labada derajo ee kala ah Xaaraam iyo Karaahiyo. Waxaa kale oo isna meesha ku jira nooca khiyaar gelinta oo isna la dooransiinayo mukallafka in uu sameeyo hadduu doonayo ama iska daayo hadduu doono.

Waxaa kale oo ka mid ah waxyaalaha ku tusinaya in uusan xukunkani mid sharci oo lama dhaafaan ah ahayn, iyo in aysan cilladda maragfurka (sidaan horayba u soo xusnay) laba dumar ah iyo hal rag ah isku dhigga looga dhigay marka la joogo wax kala daynsiga, ahayn

[104] - Cabdiladhiif maxamad Caamir. Axkaamul mar'at fil qisaas wa diyat. (horay) bog: 103

dumarnimada awgeed, in uusan xukunka qudhiisuba ahayn mid joogto ah oo mar walba lagu isticmaalo maragfurka". Waxa uu Dr. Cabdiladhif yiri; " Waxa ay ka mid tahay gefefka cad cad in qadarka diyada dumarka looga qiyaas qaato sida ay u dhacayaan maragfurka ragga iyo kan dumarku"[105]. Waxaabase aniga taa iga la sii daran in ay muuqato in wax badan daaqada laga tuuro maragfurka dumarka asal ahaanba. (eeg: buugga "maragfurka dumarka" ee isla silsiladda buugaagtaan ka hadlaya xuquuqda dumarka, Lambarka: 2.).

Taas oo dhanba ka soo har oo kaalay adba caqligaaga adeegso ee bal is barbar dhig gabadh aad u wanaagsan oo cidda oo dhan masruufta, caruurta kala hagta, waalidka u baarri ah, dad badani ay cidda ka soo hunguriyeeyaan, iyo wiil da'dii ka weyneyd ama ka yareyd ah ee isagu aan ku mashquulsanayn wax ka badan dil, dagaal, dhac, kufsi, koolla nuug, iyo in alle iyo intii dhibaato ama dheg xumo iyo ceeb ah.

Kaas oo iska daa in uu ciddii wax ku tare maalin walba cidda loo haysto wixii uu ka soo ba'shay deriska ama dad kale. Iskaba daaye maalin walba isla cidda ka dhaca inta yare ay gabadhu soo shaqaysay ee ku gata jaad, khamri iwm?. Aan ku weydiiyee akhristow keebaa diyadiisu boqol tahay keebayse konton tahay?. Waxaan is leeyahay hadduu Eebbe dadka ku kala duwayo ama ku kala saraysiinayo diya siinta iyo wixii la mid ah ee qadarin ah, waxa uu ku kala mudnaysiin lahaa wanaagga uu qofku la yimaado, waxa uuna qofku ku heli lahaa diya badh ah marba inta uu waxtarkiisa ku hooseeyo fulinta hawlaha adeega bulshada iyo sidoo kale inta uu cibaado Eebbe dayiciisu dhan yahay, ee marna ma eegeen jinsiga iyo nooca uu qofku yahay.

[105] - horay.

4. 4: SHEEKADA KONTONLEY OO LA XAQIIJINAYO BIDCANIMADEEDA

Waxaa iga su'aal ah xaggee bay wadaadadu ka keeneen in ay diyada dumarku tahay kala badhka diyada ragga?. Hadaad akhristow adiguba su'aashaas is weydiinaysay bal noo warso ciddii laga maqlay. Waxaa ila amakaag ah sida ay culimo fara badani arintaan ugu dhiiranaadeen iyaga oo arkaya Aayado iyo Axaadiis simaya dhiigga Bani aadamka iyaga oo aan u kala saarayn rag iyo dumar, caruur iyo waayeel, iyo xataa caqiido toona (In ay kuwaasi daliil keensadaan iyada warkeedba daa). Marba haddii naf Aadane lagu gooyo gardarro waa isku qiime, waana boqol geel ah ama wax u dhigma. Sida uu Nebigu sheegay. Waxa uu yiri;

"Nafta waxa ay diyadeedu tahay boqol geel ah"[106].

Waa yaabe goormaa xadiiskaan loo kala saaray rag iyo dumar? Maxaase keenayba in sidaa loo fikiro?.

Waxaa kale oo cad in qaar badan oo ka mid ah culimadii Madaahibaha ay weligood simi jireen diyada ragga iyo dumarka. Waxaaba ka mid ah ragga sinaantaas ku tagey Asam iyo Ibn Calayhi oo ka mid ahaa culimadii ugu waa weynaa Xanaabilada. Dr. yusuf Qardawi oo ka mid ah kuwa ugu firfircoon culimada diinta ee casrigaan jira ayaa yiri; "ma jirto mana dhicin wax xadiis la isku raacsan yahay ah ama daliil kale oo la cuskan karo ah ee kala saaraya diyada ragga iyo tan dumarka. Xataa ma jiro Ijmaac ay u dhan yihiin culimadu oo arintaas sugaya"[107].

Iska daa in ay culimnadu sidaas isku raacaane, waxaa sugan in ay qaar badan oo fuqahadii hore ka mid ihi ay caadi ahaan ugu dhaqmi jireen in ay

[106] - Waxaa weriyey Maalik,iyo Nisaai oo ka soo weriyey Camra Bn Xazam. Waana xadiis saxiix ah.

ragga iyo dumarku si walba iyo markastaba ku siman yihiin diyada. Waxa aan tusaale kale uga soo qaadanaynaa culimadaas; Ibnu Caliyah iyo Casam oo ka mid ahaa fuqahadii hore - Salafkii. Waxaana go'aanka culimadaas adkaynaya ama sugayaba Quraanka iyo sunnaha marka faham ama sharax guud laga qaato.

Haddayse wadaadadu fuqahada ihi ina leeyihiin waxaan uga dhignay diyada dumarka marka aan eegnay dhaqamadii iyo caadooyinkii kululaa ee ay haysteen bulshooyinku, waxa aan inaguna maanta si geesinimo leh u dhahaynaa; "kaalaya aan daaqadda ka tuurno go'aankaas oo aan sinno rag iyo dumar xag dhaqan iyo dhaqaalaba". Waayo waxaanu wax ku salaynaynaa hab dhaqameedkeena iyo duruufeheena nololeed sida ay culimadii horeba yeeleen.

Waxa aan ku baaqaynaa in ay ragga iyo dumarku ku siman yihiin dhan walba. Ha ahaato abuurkoodii hore, korintoodii, bani aadaminimadooda, dhammaanba danaha Bani-Aadamka, awoodda waxqabad ee aadanaha, waajibaadaka aadanaha, abaal marinta iyo amaanta waxqabad, iyo ciqaabta ku wejihan haddii ay wax halleeyaan ama ba'shaan.

Sidaa darteed, qiimaha dhiigga lab iyo dhedig waa is la egyahay, si siman ayey hawlaha adduunyada u qaybsanayaan, si siman ayey wax kaste oo xuquuq ah, ha ahaato wax ay kasbadeen ama wax uu Rabbi si dabiici ah ugu diyaariyeye, isu le ekaysanayaan; haddii nin jago loo magacaabo, wax ay naagtuna xaq u leedahay in sidaa si la eg loogu magacaabo haddii ay mutaysato; mid kaste oo ka mid ah labadooda waxa looga baahan yahay in uu si hufan uga soo dhalaalo mas'uuliyadda ka saaran arimaha adeega bulshada, cibaadada Alle, iwm. Allaha wax walba oge, maamulaha ah ayaa inaku leh: "

"Wuxuu ku ajiibay Eebahood anagu ma dayacayno camal mid camal falay oo

[107] - Dr. yusuf Al-qardawi; Malaamixu almujtamac, bog: 327

idinka mid ah, lab ama dhedig kuu ahaadaba, qaarkiin qaar buu ka ahaaday"[108]

Mar kalena waxa uu alluhu inaku leeyahay sidatan soo socota: ""Ruuxii fala wanaag lab ah ama dhedig (kuu ahaadaba) isagoo rumaysan (xaqqa), kuwaasi waxay galayaan Jannada lagamana dulmiyo duleel (laf timireed wax la eg oo shuquladoodii wanaagsanaa ah)[109] . Eebbe weyne, wax walba oge ayaa yiri;

"Waxaan ku faral yeellay korkooda in Nafta (loo dilo) nafta, ishana isha, sankana sanka, dhegtana dhegta, iligana iligga, nabaradana waa laysu qisaasayaa"[110]

Haddii ay diyada ku kala duwan yihiin ragga iyo dumarku Ilaah mar hore ayuu inoo caddayn lahaa si aanaan maanta ugu murmin. Tusaale waxa uu dhihi lahaa Nafta naagtu waxa ay udhigantaa intaa, xubintooduna naagtuna intaas, tan ragguna intaas, iwm, halka uu hadda ka wada simay naf oo dhan, xubin kastena uu ka sheegay qiimaheeda.

Markii uu Nebigu sheegayey in naftu ay naf la qiimo tahay oo loo dilayo, ishuna ay isha la mid tahay oo loo bixinayo, sankuna sanka, afkuna afka, dhegtuna dhegta, dhaawacuna dhiggiisa oo dhaawac ah, haddii sida ay culimadani sheeganayaan ay diyadu ku kala duwan tahay rag iyo dumar, waxa uu Eebbe dhihi lahaa hadday rag tahayna waa intaas, hadday dumar tahayna waa intaas.

Waxaas oo dhanba waxaa ka sii cad in ay sugan tahay in Nebigu uu shaaca ka qaaday in hadduu nin naag dilo loo dilayo, sida hadduu nin dilaba loogu dilayo. Waxa uu yiri Nebigu;

" . . . Iyo in Ninka Haweeneyda loo dilayo".

Arintu waxa ay ku socotay maamul iyo xukun caddaalad ah oo loo wada siman yahay rag iyo dumar tan iyo waagii khulafada iyo weliba ka sii dambaba. Waxayse u muuqataa in uu qiiq dulmi ihi soo galay beryo dhexe ama dhaw oo ay guud

[108] - Quraanka; al-Cimraan; 195.
[109] - Quraanka; al-Nisa'; 124.
[110] - Quraanka; al-Ma'idah; 45.

ahaanba diintii dayac isaga soo ban baxday. Bal eeg waxa uu ahaa Cumar Bin al-Khadaab kii toogtay koox badan oo rag ah ka dib markii ay wada dileen hal naag[111].

[111] - horey.

4. 5: **FAHAMKA XADIISKA UU SOO WERIYEY CAMRA BIN XAZAM**

Xadiiskaan oo ku soo kala arooray ilaa shan dariiqadood oo isku soo wada dhacaya, waxa uu si go'an usoo afjarayaa xukunka dhawrka qodob ee uu sida tooska ah uga hadlayo. Xadiiskaan oo sidii aan horayba usoo xusnay ahaa warqad wareegto ah oo uu Nebigu NNKHA soo saaray isaga oo cuskanaya xukunka Islaamka, kuna faahfaahiyey qodobada xukun ee la xiriira kala qisaas qaadashada. Xagga kalsoonida marka laga eego, dhab ahaantii xadiisku waxa uu ku jiraa xadiisyada ugu sugan inta la soo weriyey. Taasina waxa ay sababtay in ay guud ahaanba culimada kuwooda ugu sareeya fiqhi ahaan iyo xadiis ahaanba ay ka dhigtaan xadiiskaan bar tilmaameed ay ka duulaan. Waxaana ka muuqata in uu xadiiskani yahay mid ay culimadu sugitaankiisa ku eegeen il gaar ah oo feejigan, ayna sugeen hufnaantiisa iyo tifa tirnaantiisa.

Imaam Shaafici, waxa uu kaga dhigtay asal laga shidaal qaato xukumada uu ku sharaxay kitaabkiisii ugu horeeyey, isla markaasna ahaa kii ugu horeeyey kitaaba fiqhi Islaami lagaga hadalayo ee lagu qoro dunida guudkeeda. Kaas oo la yiraahdo Al-Risaala[112].

Imaam Sancaani oo isaguna aad ugu tiirsanaaday Xadiiskaan ayaa waxa uu kitaabka "Subulu Salaam" ku soo kulmiyey hadalada ay qaar culimada waa weyn ihi ka yiraahdeen xadiiskaan. Waxaana ka mid ah hadaladaas:

1- Shaafici, waxa uu yiri: "runtii lama soo werin xadiiskaan ilaa laga hubsaday in uu yahay kii dhabta ahaa ee ku qornaa warqaddii uu Nebigu (NNKHA) soo diray".
2- Ibnu Cabdil barri, waxa uu yiri: " kani waa kitaab aad caan uga ah xagga dadka siirada ku xeel dheeraaday. Sidoo kale, waxa ku qorani waxa ay caan ka yihiin xagga dadka ahlu cilmiga ah. Caanimadaasina waxa ay ka kaaftoominaysaa in looga raadsho caannimo xagga sennadka werinta, waayo waxa uu sii galayaa xad Mutawaatir - ay boqolaal qof oon is ogeyni soo

wada warisay, marka loo eego xagga aqbalka iyo aqoonta ay dadku u leeyihiin ama u hayaan".

3- Yacquub bin Sufyaan, waxa uu yiri: " Anigu garan mahayo warqad ka saxsan guud ahaanba warqadaha la soo guuriyey, (gaar ahaan riwaayada uu soo weriyey Camra bin Xazam), waayo waxaan hubaa in ay Asxaabtii iyo Taabiciyiintiiba isaga uun ka shidaal qaadan jireen, oo ay dartii ugaga tagi jireen go'aanadooda ka soo horjeeda. Waxaana tasxiixiyey - sugay; Xaakim, Ibnu Xabbaan, iyo Beyhaqi. Axmad bin Xambalna waxa uu yiri; "waxaan rajaynayaa in uu xadiiskani saxiix yahay".

4- Ibnu kathiir, waxa uu yiri: " Tani wa warqad aad u muhiim ah. Waxa ay weligeedba ku dhex wareeganaysay Imaamyada Muslimiinta, kuwoodii hore iyo kuwooda dambe intaba. Waxayna ahayd mid ay aad ugu tiirsan yihiin uguna kalsoon yihiin. Arin kaste oo qodobadaas khusaysana waxa lagu eegi jiray xukunka xadiiskaan.[113].

[112] - eeg; Shaafici, Al-Risaala. Bog: 432
[113] - Sancaani. Subulu salaam. Jus: 3, bog: 344

Haddaba waxaa ka mid ah qaladaad culus oo lagu adkaystay, in indhawaalaba iska soo daba dhac dhacaysay in si bidcanimo iyo been abuurasho ah loogu soo dhex dirqinayey xadiiskaan jumlad ama oraah aan ka mid ahayn. Taas oo ah daliisha ugu weyn ee cuskadaan kuwa ku dooda nusnimada dumarka iyo qiimahooda. Odhaahdaasi waxa ay tahay in ay dheheen, waxaa ka mid ahaa xadiiska; " Magdhawga dumarkuna waa kan ragga badhkiis".

Run ahaantiise, taasi waa been abuur iska cad, waayo laguma hayo hadal noocaas ah xataa mid keliya oo ka mid ah shanta riwaayadood ee ku soo aroortay xadiiskaan. Garan mayno sababta ay ku soo hindiseen sheekada noocaas ah ee rakhiiska ah. Culimadii ku soo gaartay waqtiyadii ay bilaabatay in kelmad beeneedkaas la soo dhex xaluuliyo xadiiskaan ee ka hadlay waxaa ka mid ah; Ibnu Xajar al-Athqalaani iyo Maxamad Naasirudiin- Albaani oo isagu maantaba weli nool. Waxayna kala yiraahdeen hadaladaan soo socda:

1- Ibnu Xajar al-Athqalaani, waxa uu yiri: " Waa ku been abuur Xadiiska Camra bin Xazam, odhaahda ah; " magdhawga dumarku waa kan ragga badhkii". Jumladani kama mid ahayn xadiiska dheer ee uu soo weriyey Camra bin Xazam. Waxaase jirtay in uu mar Beyhaqi hadal noocaas ah ka soo dhex saaray xadiiskii Mucaad bin Jabal oo uu markaa yiri; "hadalkani waa mid aan weligii isaga oo kale la maqal, *sanadkiisu* - taxiisuna ma sugna"[114]

2- Sheekh Maxamad Naasirudiin - Albaani, waxa uu yiri: " warka ah: " magdhawga dumarku waa kan ragga badhkii" ee lagu sheegay in uu ku qornaa warqaddii Nebigu u diray reer Yeman sida uu u soo weriyey Camra bin Xazam waa daciif -taag daran[115]. Mar kalena waxa uu Albaani ka yiri xadiiskaan; "weligey odhaahda ah; "magdhawga dumarku waa kan ragga badhkii" iyo wax u eg toona kuma arag guud ahaanba dariiqyada kala duwan ee ku kala yimid xadiiska dheer ee Camra bin Xazam"[116].

Hadalkii oo isku soo wada duuban, waxa ay ila tahay in aysan kolnaba meesha oollin wax inta ku dhankaxsan nusnimada dumarku ay xujaystaan. Kelmaddaan ay kuwii kala saramarinta noocan ihi aaminsanaa soo bilaabeen oo hadana ku soo dhex mirqiyeen taxniinka erayada xadiiska saxiixa ah ee horay u jiray waxa ay runti tahay mid tusinaysa sida ay isugu dayeen in ay ku jeha wareeriyaan Muslimiinta oo ay hirgashadaan caqli jaahiliyeedkooda. Hase ahaatee waxaa iska muuqata in aysan sheeko baraleydaani marnaba ku soconaynin hab caqiideed laga dhaadhiciyo Muslimiinta. Waa taas iminkaba la arkayo in ay socon weyday oo lagu qabtay been abuurnimadeeda.

Eebbe weyne ayaa ina siiyey culimo kala findhicisha saxnimada iyo qaladnimada xadiis kaste oo la sheego iyaga oo ku samaynaya daba

[114] - Ibnu Xajar al-casqalaani. Talkhiisul Xabiir. Jus: 4, bog: 24
[115] - Naasirudiin Albaani. Irwaa'ul qaliil. Lam: 2250

gal xeel dheer ilaa ay ga sugaan dhammaanba intii uu soo maray iyo halkii uu ka soo fulay. Iyada oo dabagalka iyo baaritaanka noocaas ah la adeegsanayo ayaa waxa la soo xaqiijiyey in aysan ku jirin, kuna dhex dhuuman karin kelmadda ah; " magdhawga dumarku waa kan ragga badhkii" xadiiska aan soo sheegnay.

Haddayse haatan ku jiri lahayd, ma waxa ay u malaynayaan in ay wax u tari lahayd oo ay xujjo ahaan ugu anfici lahayd iyada oo ay meesha taagan tahay aayadda quraanka ah ee uu Ilaahay ku leeyahay:

"Naftii naf baa loo goynayaa, ishiina il, afkiina af, - ilaa ugu dambaysta" xubnaha oo dhan.

Waa wax aan hadal iyo dood marnaba u baahnayn in tiiyoo ay meesha taagan tahay Aayad Qura'an ihi uusan xadiis sidiisa waxbaba ka goyn karin halkaa, xujjo ahaan. Sidoo kale meesha uu Xadiis soo galay, Qiyaas iyo Ijmaac toona waxba kama gooyaan, oo ma joogi karaan. Waxa ay dhab ahaan ula mid tahay sida aan meel Libaax soo galay Lo' u joogaynin. Haddaba waxaa nasiib darro ah in ay kuwa nusnimada dumarka ku doodayaa miciin bideen xujaysiga Ijmaac. Nasiib wanaagse, xataa sida ay Ijmaaca u adeegsadeen waa si aan sax ahayn oo qudheeda ayaaba lagu haystaa. Waxayna taasi u dhacaysaa sida soo socota:

[116] - Irwa'ul qaliil. Lam: 2252

CUTUBKA SHANAAD

SIDA AY IJMAACA U XUJAYSTEEN KUWA KU DOODAYA NUSNIMADA HAWEENKU

5. 1: IJMAACA CULIMADA OO LA MICIIN BIDAY

Qaar ka mid ah culimada ayaa ku adkaystay in dumarka diyadoodu ay kala badh ka tahay tan ragga, iyaga oo daliil ka raadinaya ama ka dhiganaya Ijmaaca. Waxaa ugu waa weyn ragga taas ku dooday; Shaafici, Ibnul Mundir iyo Cabdul barri[117]. Dhab ahaantiise, haddaanba ka nabad galno ama aan iska indha tirno doodda ku saabsan; " Horta Ijmaaca qudhiisu ma galaa xujjo oo mala daliilsan karaa mise lama daliilsan karo, waxaa iyana na soo hor istaagaysa dood ah; horta maxaa Ijmaac ah sideedaba"?. Si aan su'aasha noocaan ah jawaab qancisa ugu helno, waa lagama maarmaan ah in aan horta ugu horaysa ka hadalno waxa uu yahay, iyo nooca ugu saxsan Ijmaaca, waxaana haboon ama ugu dhaw gaaritaan in aan u caddayno sidatan:

Ijmaaca dhabta ah, ee sugitaan ahaan iyo ku dhaqan ahaanba aan wax muran ihi ka imaan karin waa midka ku dhisan "Nas cad oo saxiix ah". Naskaas oo ka ahaaday kitaabka Quraanka ah ama Sunnaha Nebiga (NNKHA). Imaam Axmad bin Xambal ayaa yiri; "Ijmaacu waa in la raaco wax markii horeba laga soo gaaray Nebiga iyo Asxaabtiisa, ama ugu yaraan ay taabiciintu ku

doorteen si tifatiran"[118]. Sheekh Sayaasina isaga oo sharaxaya warkaas uu yiri; Axmad, waxa uu yiri; " Axmad, marka uu leeyahay "wixii laga soo gaaray ama ka yimid Nebigu (NNKHA) waxa uu ula jeedaa wixii ku yimid kitaabka Quraanka ah iyo Sunnaha. Maraka uu leeyahay wixii laga soo gaaray Asxaabtiina waxa uu ka wadaa wixii mas'alo (Fiqhi) ah ay kulligood isku wada raaceen oo aan midna diidin"[119]

Ibnu Xazam ayaa isana waxa uu yiri: " mid kaste oo raaca Quraanka, iyo xadiiskii Nebiga looga soo weriyey dariiqada lagu kalsoon yahay, waxa uu dhab ahaan u raacay waxa la yiraahdo Ijmaac. Mid kaste oo ka leexda wax ka mid ah kuwaasna waxa uu ka leexday Ijmaaca"[120].

Runtii waxyaalaha ay isku wada raaceen Asxaabtii (Eebbe ha ka wada raalli ahaadee), waa in uu qof kaste oo diintaan ku tiirsani iyagii ku sii raaco. Umana banaana in uu wadda kale ka sii dhinac jeexdo. Eebbe weyne oo ceebtaa iyada ah ka sii digaya ayaa yiri:

" Ruuxii khilaafa Rasuulka ka dib markuu u cadaaday hanuunku oo raaca jidka Mu'miniinta mid aan ahayn, waxaan uga weli dhigaynaa wixii uu ka weli dhigtay, waxaanan gelinaynaa Jahannamo, iyadaana u xun meel loo irkado"[121].

Waxaa jirta arin lama huraan ka dhigaysa in la kala ogaado farqiga u dhexeeya arimaha ay isku raaceen Asxaabtii waqtigoodii iyo kuwa la isku raacay iyagii dabadood. Berigii hore asxaabtu waxa ay kuwada noolaayeen isku wadan oo waxa ay ku kala tala qaadan kareen si sahlan. Hase ahaatee beryihii dambe waxaa si dhaqso ah isu baddelay xaaladdii lagu noolaa. Waxaa dhacday in la kala durko oo kooxiba ay dhul hor leh ka degto dunida. Waxaa la kala galay afarta beyna jiho, inta ka dhex leh Hindiya ilaa Yurub. Hadaba mar

[117] - Shawkaani. Naylul awdhaar. Jus: 7, bog: 68. Sidoo kale Muqni al-muxtaaj. Jus: 7, bog: 797. Iyo Subulu salaam ka uu qoray Sanaaci. Jus: 3, 250.
[118] - Shawkaani. Irshaadul fuxuul. Bog: 82
[119] - Musdafa ciid. Diyatul mar'at. (horey) bog: 114
[120] - Ibnu Xazam. Al-axkaam fi usuul al-axkaam. Jus: 1, bog: 640

hadday xaaladdu halkaa gaartay, waxaa adkaanaysa si loo caddeeyo in wixii la sheegay in la isku raacay ay ahaayeen wax ay kooxi isku raacday iyo wax ay guud ahaanba Muslimiintii isku wada raaceen. Ma jirin wax is gaarsiin ah oo ka sarreeya Faras, mana jirin kulamo caalami ah oo la isugu wada imaan karo, oo ka dheeri ah Xajka sanadlaha ah. Sidaa darteed, Ijmaacii Asxaabtu, ku kalsoonidooda Imaan ahaan ka sokow waxa uu helayaa fursado ka xaqiiqsan kuwa uu mid kaste oo kale heli karo. Sidaa darteed, in badan oo culimada ka mid ihi waxba kama soo qaadin mas'alooyinka lagu xalliyey Ijmaaca. Tusaale; Axmad bin xambal, waxa uu yiri; " mid kaste oo sheegta Ijmaac waa beenlow, muxuu ka ogyahay in ay dadku isku khilaafeen ama isku wada raaceen"[122].

Mar hadduu Ijmaacii intaas iyo in kasii dheer oo dood iyo muran ah dhaliyey, waxaa ila haboon in lagu soo gaabsado keliya laba nooc oo ah Ijmaac, kuwaas oo ka ceeb la' dood iyo shaki. Waxayna kala yihiin labadaasi:

1- Ijmaac ku dhisan Nas cad oo sugan kuna qoran kitaabka Quraanka ah ama Sunnaha.
2- Ijmaac lagu soo guuriyey si sugan oo ah silsilad taxeedu is bada haysto, shaacna ah - *mutawaatir*, ilaa laga gaarsiiyo dhammaanba Asxaabtii nebiga (NNKHA). Ijmaacaasina waa in uu si gooni ah u khuseeyaa mas'alo gaar ah qudheeda oo aan ku qasnayn mid kale"[123].

Ijmaacii ka soo dheeri noqda labadaas nooc, waxa uu dabiici ahaan isaga noqonayaa qodobo heshiis oo lagu saleeyey xallin dhibaato markaa uun taagnayd, oo weliba laga yaabo in ay carro gooni ah uun ka jirtay. Sidaas darteed ay wax ku khilaafsan tahay haddii ay ka dhacdo carro kale

[121] - Quraanka. An-nisaa: 115
[122] - Al-axkaam fi usul al-axkaam. Jus: 1, bog: 669

ama waqti jkale ay dhacdo. Waxaa mudan in ana xusno qaacida Usuul al-Fiqhiga ee ah:

"Waaqicatul cayn laa cumuuma lahaa"

"Caynta dhacdadu – dhacdada ama wax meel ama si gooni ah ku go'an loma adeegsan karo si guud ahaan ah"

Sidaa darteed, noocyada Ijmaac ee aan ka mid ahayn labadaa, waxa ay iska yihiin ku meel gaar, aan la xujaysan karin waqti walba iyo meel walba oo la joogo. Haddaba haddayba dhacday in waa uun waayada ka mid ah ay qaar culimada Islaamka ka mid ihi ku heshiiyeen in uu magdhawga dumarku badh ka ahaado kan ragga, waxaa laga yaabaa in ay taasi ku habboonayd waqtigoodii iyo duruuftoodii u gaarka ahayd. Maantase aysan marnaba taasi socon karinin. Waayo waxaannu joognaa waayo iyo duruufo kun jeer ka duwan kuwii hore aanana suurto gelin karinin kala saraynta ilaa xadkaas bani aadaminimada kaga soo horjeedda.

[123] - Musdhafa Ciid. (horey) bog: 116

Middase aan maanta dood u baahnayni waxa ay tahay inaan kitaabka Quraanka ah lagu haynin in ay magta dumarku ka yar tahay ama ay ka duwan tahay tan ragga. Sidaa si la mid ah laguma hayo sunnaha Nebiga (NNKHA) xadiis sugan oo sidaa ama si u dhaw toona sheegaya. Ka sii darane, laguma hayo xataa hadal, iska daa Ijmaace, noocaas shabahaya oo ka sugnaaday Asxaabtii Adeegaha Eebbe.

Intaas marka aan caddayno ka dib waxaa iyana in la sii caddeeyo u sii baahanaysa in aysan jirin, dhicinna wax Ijmaac ah oo caddaynaya in ay culimadii Islaamka ee jirtay waayadii Asxaabta iyo Taabiciyiinta ka dib ay isku raaceen ama ku heshiiyeen in ay diyada dumarku ahaato tan ragga nuskeed. Waxayna taasi ku caddaanaysaa dhawr arimood oo ay ka mid yihiin kuwa soo socda:

1- Lama hayo wax qoraal ah oo caddaynaya in uu marnaba dhacay Ijmaac ama heshiis guud oo la isku raacay in diyada dumarka nus laga dhigo, si kastaba ha ku ahaatee.

2- Xataa haddii uu jiri lahaa qoraal caynkaa ihi, waxa uu ahaan lahaa mid aan la qaadanin, oo markiiba daaqadda laga tuuro, sababihii aan horay u soo sheegnay awgood.

3- Waxaa ka mid ah shuruudaha Ijmaaca in dhammaanba culimada Islaamku ay isku wada raacaan arintaas. Haddii uu mid keliya oo ka mid ah culimada Islaamka uu khilaafo Ijmaac la gaaray, waxaa halkaa ku lumaya shardi ka mid ah kuwa ugu horeeya ee Ijmaaca, mar dambana laguma sii magacaabayo ama looma aqoonsanayo "Ijmaac". Iyada oo taas laga duulayo, waxaa la hayaa in ay culimo fara badan oo ka mid ah kuwii ugu cilmiga badnaa waqtiyadoodii kala mudnaa ay weligoodba arinta (nusnimada magta dumaraka) ka soo horjeedeen, oo lagu kari waayey. Waxaana ka mid ah culimadaas: Ismaaciil bin Culliyah oo ka mid ahaa kuwii ugu aqoonta roonaa culimadii Shaaficiyada iyo Xambaliyada, Abaa bakar al-asam, Ibnu Xazam, iyo kuwa kale oo fara badan, una badnaa kulliba kuwa raacay Mad-habka Daahiriga[124]

Guud ahaanba culimadaasi waxa ay kuwada adkaysteen in magdhawga ama dhiigdhawga dumarka laga bixinayaa uu si walba ula mid yahay kan ragga, aysanna jirin innaba haba yaraatee wax ay magtu isku dheeraato rag ahaan iyo dumar ahaan[125].

Mid kale oo iyana laga yaabo in ay dood furto, waxay tahay in la yiraahdo Afarta Mad-hab ayaa isku mawqif ka taagan. Haddaba, taas jawaabteedu waxa ay noqonaysaa; looma aqoonsana Ijmaac qodobka ay isku raacaan afarta mad-habadood ee caanka ah. Haddaan hadalka si kale udhahnana afarta sheekh ee kala ah; Xanafi, Maaliki, Shaafici iyo, Xambali. Waxaa sugan in ay afartaas Sheekh oo ukala horeeyey sida aan iminka qoraalka ugu taxnay ay kala shidaal qaateen oo uu mid

[124] - Mudhafa Ciid. (horey) bog: 123
[125] - horay, bog: 123

walbaaba sii daba galay, siina dhiraandhiriyey qodobadii uu kii ka sii horeeyey ka hadlay.

Waxaa jiray, oo aan iyana la inkiri karin, in ay jireen boqolaal culimo kale ah oo ay dhici karto in intooda badani ay ka cilmi badnaayeen, ka faqiihsanaayeen, ka xadiis baarid ogaayeen, kana mas'alo xallin ogaayeen kuwaas afarta ah. Midda kale lagama hayo mid ka mid ah afartaas Sheekh in uu yiri in wixii ay isku raacaan isaga iyo saddexda kale ay yihiin Ijmaac.

SHEEKOOYINKA KU TIRI KU TEENTA AH EE LA SHEEGO IN LAGA KEENAY ASXAABTII AMA TAABICIYIINTII.

Waxaa jira dhawr sheeko oo iska tiri ku teen ah, oo la sheego in laga soo gaaray Asxaabtii Nebiga (NNKHA) ama taabiciyiintii ama Salafu saalixiintii. Sheekooyinkaas oo loogu tala galay in lagu xoojisto go'aankaas ah in la gooyo dumarka dhiigdhaw nus ah. Hase ahaatee kulligood waa wax laga sal gaaray oo la wada ogsoon yahay beennimadooda. Waxaana kuwaas ka mid ah kuwaan soo socda:

SHEEKADA KOOWAAD

Shaafici ayaa ku soo weriyey kitaabkiisa Musnadka ah, bogga 348 aad, kitaabkiisa Al-umma. Juska 6 aad, bogga 92 aad. Sidoo kale Beyhaqi ayaa ku soo weriyey kitaabkiisa "Sunan al kubra" juska 8 aad, bogga 95 aad, baabka diyada dumarka sida soo socota:

Abu al- Cabaas Maxamad bin Yacquub ayaa inoo sheegay; Rabiic bin Suleemaan baa noo waramay in uu Shaafici uga waramay, in uu Muslim bin Khaalid uga waramay, in uu Cabdillahi bin cumar ka weriyey Ayuub bin Muuse oo ka soo weriyey Shihaab oo isna ka soo weriyey Makxuul iyo Cadhaa in ay dheheen: "Waxaa naga soo gaartay dadka in ay magta ruuxa Muslimka ihi ahayd boqol geel ah waagii Nebiga. Markaa uu waagii dambe Cumar bin al-khadaab arintaas wax ka baddelay isaga oo qiimaynaya oo ka dhigay sida soo socota:

Reer magaalka waxaa dushooda ah oo ay bixinayaan kun Diinaar ama laba iyo toban kun oo Dirham. Naagtii reer magaal ahaydna waxaa laga bixinayaa shan boqol oo Diinaar ama lix kun oo Dirham, laakiin haddii ruuxii dilay naagta uu ahaa reer baadiye diyadeedu waxay noqonaysaa konton geel ah. Lagumana dhibayo ruuxa reer baadiyaha ah in uu baxsho dahab iyo warqad lacag ah toona".

Laakiin xadiiskan waxa ka dhashay doodo cusub. Waxaase doodahaas garab socda saxnimada xadiiska oo iyaduna ah mid aan lawada ogolaanin oo hadal ku jiro. Dadkii ahlu-alcilmiga ahaa ee jiray waxay isku khilaafeen qiimaynta waajibka ah ee diyada marka laga xisaabinayo Dirham iyo Diinaar. Qaar baa hadaba ku adkaystay in aan diyada wax kale lagu bixinaynin ee asalkeedu yahay geel (si aan muranba u imaanin)[126]. Waxaa

[126] . Waxaa mudan in halkaan lagu xuso dhibaatooyinka ay is dhankaxinta noocan ah ee dhab ahaantii cabsii Eebbe badsiga ku

nidaamka ugu dhexdhexaadsan ee dhan walba la qabsan kara ku tagey Imaam Shaafici oo leh; in asalka diyadu yahay boqol geel ah, laakiin haddii geel la waayo noqonayo qiimihii uu marakaa geelu joogo. Haddii ay tahay diyadaasi mid lagu bixinayo hab adag –*muqallada,* ama kululayn waxa lagu bixinayaa qiimahaas oo hab kululayn ah. Haddii ay tahay mid fududayn – *mukhafafa* ahna sidaas fududaynta ah. Waxa uu Sheekh Shaafici ku salaysiiyey go'aankiisaas, xadiiska ah in Cumar bin Shucayb uu ka soo weriyey aabihii oo isna ka soo weriyey awawgiis, in uu Nebigu (NNKHA) ugu qiimayn jiray dadka reer magaalka ah ee aan geela haysan lacag dhan afar boqol oo diinaar, ama qiimo u dhiganta oo lacagaha kale ah. Waxuuna gaaray inta u dhaxaysa afar boqol oo diinaar ilaa sideed boqol oo diinaar oo u dhigantay sideed kun oo dirham[127].

Ugu badnaantiina waxa ay culimadu isku raaceen in diyada waajibkeedu uu ahaado boqol geel ah, ama kun diinaar, ama laba iyo toban kun oo dirham. Sidaasna waxa laga soo weriyey Xasan al-Basri, Curwa bin Zubayr, Maaslik, Axmad bin Xambal, Isxaaq iyo kuwa kale. Waxaase xusid mudan in qiimayntaasi ay hayad tusaalayn go'an

dhisani ay leedahay. Bal haddii aan raacno culimada ku adkaysatay in wax aan geel ahayn aan lagu bixin karin diyada, xagee ayey geel ka keenayaan dadyowga aan weligoodba geel arag?. Saw ma haboonayn in lagu xisaabtamo in diintu ay gaarayso meel walba uguna tageyso dad dhaqamo iyo cimilooyin kala duwan leh. Saw ma jiraan dhulal aysan cimiladoodu aqbali karin geela oo aan weligood ba dadka dhulkaasi arag wax geel la yiraahdo?. Tusaale ahaan qofkii isaga oo Bariga fog ee Aasiya jooga lagu xujeeyo geel keen xaguu ciirsan?. Waxaa taas la mid ah culimada ilaa maanta ku mintidsan in Zakada lagu bixin karo oo keliya raashin la cuno oo weliba noocyo gaar ah keliya ah. Saw kuwaasi ma garan karaan in ay jiraan dad u baahan Zakada laakiin kaba caagan ama aan say ugalaan aqoon raashinadaas. Bal saw ma dhici karto in qof la siiyo raashin uusan cunin isagu, ka dibna uu isku dayo in uu sii gato, laakiin uu ugu fariisto qiimo aan markaa isaga u goynin wax uu ku qadeeyo, marka uu doono cuntada noocii uu rabay. Waxaa mudan in il maskax furan wadata lagu eego ujeedada xadiiskaan aan ku guda jirno iyada oo laga eegayo sida uu Cumar u qiimeeyey qiimihii geela ka dib markii uu sicirkii suuquna is badelay geelii qiimihiisiina is badelay. Waxaa inoo cada in Cumar Allaha ka raalli ahaadee ahaa mas'uul si tallaabo tallaabo ah ula socda sarifka lacagaha iyo is badelka suuqyada adduunka dhan walbaba. Waana sidaas sida la doonayo in uu xaakimka Muslimiintu ahaado. Tan kale ee aan halkaas ka fa'iidaysanaynaa waxa ay tahay in tafsiirka Shariicadu uu mar walba ku salaysan yahay waaqica

waqtigaas la joogo lagu jiro. Sidaas darteed in uu furan yahay Ijtihaadkii iyo Ijmaacii labaduba.

oo cad oo nala siiyey ee aysan ahayn in hadana aan ka dhigno xujo geel, ama dinaar ama dirham, ee aan ku socono qaacidada qiimaynta oo la sugayo.

Aan u soo dhaadhacno biya shubka qoraalka ee waxa la arkaa in inta ay xisaabahaas iyo muranadaasi socdeen aysan dood culusi ka taagnayn qiimaynta diyada dumarka. Inkastoo ay weli muuqato in waayadaas qudhooda lagu qiimeeyey kala barka tan ragga hadana waxaa muuqata in guud ahaanba axaadiistu ay u dhacayaan si caam ah oo aan kala saaraynin rag iyo dumar.

Hadal iyo dantii sheekada (atharka) hore ee laga soo weriyey Cumar bin al-Khadhaab waa daciif ama been la qabtay sababaha soo socda awgood:

1- Waxaa ku jira dadka qisada soo weriyey ninka la yiraahdo Muslim bin Khaalid ee Afrikaanka ahaa. Ninkaasi inkastoo uu ahaa nin cilmiga Fiqhiga looga dambeeyey magaaladda Makka iyo nawaaxigeeda, haddana waxa uu ahaa nin xadiisyadiisa la daciifiyo oo aan wax kalsooni ah lagu qabinin. Imaam Bukhaari oo arintiisa ka hadlaya ayaa yiri; " Muslim bin Khaalid xadiiskiisa lama qaato ee waa la iska dhega tiraa"[128] . Waxaa kale oo arintiisa ka hadlayey Cali bin al madiini oo isna yiri; " wax uu ninkaasi yahay ma jirto"[129] . Abuu xaatim isna waxa uu ka yiri; "ma ahan nin xadiiskiisa la qaadan karo ama la xujaysan karo. Waa la iska qoraa wixii uu soo weriyo, laakiin la iska inkiraa tiiyoo la ogyahay"[130]. Ibnu Saciid isna waxa uu ka yiri; " xadiisyo badan buu soo weriyey, laakiin qaladyadiisa iyo gefafkiisa ayaa ku fara badan xadiisyada"[131] . Saaji ayaa isna yiri; " Runlow buu ahaa, laakiin qaladaadkiisaa carro ka badnaa"[132]. Nisaa'I

[127] . Waxaa soo saaray Axmad bin Xambal, waana xadiis saxiix ah.

[128] - Taariikhul kabiir. Jus: 2, bog: 260. Iyo Ducafa'u saqiir, bog: 106
[129] - Al-jarxu wa tacdiil. Jus: 8, bog: 183. Tahdiib al tahdiib. Jus: 10, bog: 129
[130] - Tadkiratul xufaad. Jus: 1, bog; 255
[131] - Dhabaqaatul kubraa. Jus: 5, bog: 499
[132] - Tahdiib al tahdiib. Jus: 10, bog: 129

ayaa isna ugu dambaystii ku adkaystay in warkii ama xadiiskii ninkaa laga soo weriyee uu yahay daciif[133].

[133] - Nisaa'i. Al-ducafa'u wal matruukiina. Bog: 98. Lam: 569

SHEEKADA LABAAD

Beyhaqi ayaa ku soo weriyey kitaabkiisa "Sunan al-kubra" juska 8 aad, bogga 96 aad ee Diyooyinka, baabka wixii ku yimid dhaawaca la gaarsiiyo qof dumar ah sidaan soo socota:
Abuubakar, reer Urdistaan ahaa ee haystay derajada “xaafidka” (taas oo malaha u dhiganta maanta derajada Ph.D. ama “General”) ayaa inoo sheegay in Abuu nasri oo Ciraaqi ahaa u sheegay iyaga oo jooga magaalada Bukhaara,(oo ka mid ah dalka maanta loo yaqaan Raashiya), in uu u sheegay Sufyaan bin Maxamad oo reer Jawhari ahaa, inuu u sheegay Calli bin Xasan oo reer Dariijardi ahaa, in uu u sheegay Cabdillaahi bin waliid, in uu u sheegay Sufyaan oo ka soo weriyey Jaabir, oo ka soo weriyey Shacabi oo ka soo weriyey Shureex in uu yiri; "Cumar bin al-Khadaab (Allaha ka raalli ahaadee) ayaa ii soo qoray shan arimood oo kala ahaa: " In ay ilkuhu isku mid yihiin, faruhuna isku mid yihiin, ishii laga riday neef xoolo ahna loo bixinayo qiimihii neefku joogay afar u dhig dhiggii, in ninkana la weydiinayo inankiisii marka uu dhimanayo, marka uu ugu run badan yahayna waa marka uu dhimanayee, dhaawaca la gaarsiiyo ninka iyo naagtuna waa is la eg-yihiin (qiimo ahaan) ilaa ay ka gaarayaan saddex u dhig dhigga magta ninka".

Sheekadanina waa daciif. Waxaa taxa werinteeda ku jira ninka la yiraahdo; " Jaabir bin Yaziid ee reer Jucfe ahaa kana sii ahaa reer Kuufi oo dhintay sanadkii 127 ee taariikhda Hijriga. Yaxye bin Muciin waxa uu yiri; "Ninkaas xadiisna lagama qoro, wax karaamo

ahna looma yeelo warkiisa"[134] Mar kalena isaga oo isla arinta ninkaan ka hadlaya, waxa uu yiri; "weligii Jaabir ma arag wax la sheegay (oo war ah) oo kagama tagin sidiisa, in uu war ku sii darsado mooyee. Wuxuuna ahaa beenaale aan waxba gelinin"[135] .

Haddaba warbixintani waxa ay sigaar ah caddayn ugu tahay in inta ugu dambaysa ee sheekadani ay tahay inta lagu darsaday. Waxaa ka mid ah culimada waa weyn ee ninkaan warkiisa ka shakiday Imaam Abuu Xaniifa oo yiri; " weligay ma arag nin ka wanaagsan Cadhaa, mana arag nin ka been badan Jaabirka reer Jucfi. Weligay ma arag shey intaan niyadayda ka soo hindiso uusan xadiis ku saabsan iigu keenin. Wuxuuna ii sheegay in uu weli sii hayo ilaa soddon kun oo xadiis oo uusan weli soo ban dhigin"[136]. Salaam bin Abii Mudhiic baa yiri; " Jaabir, kii reer Jucfi waxa uu igu yiri; waxaan leeyahay konton kun oo albaabo cilmi ah, oo aanan ilaa hadda mid ka mid ahna ka sheekaynin. Markaasaan u sheegay Ayuub warkiisaas. Suuye; maantay beentiisii cadaatay"[137].

[134] - Taariikh Ibnu muciin. Jus: 2, bog: 76.
[135] - Al-miizaan. Jus: 2, bog; 381. Taariikh ibnu muciim. Jus: 2, bog: 76

[136] - Ibnu Xabaan. Al-majruuxiin. Jus: 1, bog: 209. Taariikh ibnu muciin. Jus: 2, bog: 76
[137] - Al-miizaan. Jus: 1, bog: 380

SHEEKADA SADDEXAAD

Beyhaqi ayaa kitaabkiisa Sunanka ah, juska 8aad, bogga 97 ee Diyada, baabka Diyada dumarka ku soo weriyey sidatan soo socota:

Abu al-xuseen bin al-fadli ee Qadhaani ahaa ayaa inoo shegay in uu Cabdillaahi bin Jacfar uga waramay in uu Yacquub bin Sufyaan u sheegay, in uu Saciid bin Mansuur u sheegay, in uu Husheym u sheegay, in uu Muqiira uga waramay Ibraahim oo leh; " Waxaa ka mid ahaa waxyaalihii uu Curwa, kii reer Baariqi Shureex uga soo gudbiyey Cumar (Allaha ka raalli ahaadee); in dhammaanba ay faruhu qiimayn ahaan ku siman yihiin (haddii qof laga gooyo far), suul iyo faryaro tay ahaataba, iyo in dhaawaca ragga iyo dumarku uu siman yahay ilig la rido iyo laf la caddeeyo tay ku ahaataba, laakiin wixii intaa dhaafsiisan waa kala badh". Hase ahaatee qisadanina waa daciif sababta oo ah:

Waxaa ku jira weriyeyaasheeda ninka la yiraahdo; " Husheym bin Bashiir bin Qaasim oo reer Sullami ahaa, kana sii ahaa reer Waasidhi. Ninkaasi waxa uu ahaa nin lagu tuhunsanaa in uu ku werin jiray xadiisyada si ah tadliis iyo irsaal qarsoon. Taas oo macneheedu yahay in uu si hoos hoosey ah ugu sarbeebi jiray ama isaga magacaabi jiray qof aan ahayn kii uu ka maqlay xadiiska.

Jawzaani oo ka hadlayey heerka kalsooni lagu qabi karo ninkaa isaga ah ee sheeko-xadiiseedka laga soo weriyey waxa uu ka yiri; " Husheym nin wanaagsan buu ahaa intii la doono, laakiin (balaayo waxa uu ku dhigay)

waxa uu ahaa nin ka werin jiray xadiisyo cid uusan weligiiba la kulmin"[138].

Yaxye bin Muciin waxa uu yiri; "Husheym ayaa ka sheegay Xasan bin Cabdillaahi oo uusan weligii arag, wax caddayn ahna nama tusin. Sidoo kale waxa uu ka waramay Zakariya bin Abi Cuteyk oo aysan nolol isku soo gaarin. Sidoo kale waxba kama uusan maqal Khaalid bin Salmah, iyo Zaadaan midkoodna wuuna ka war sheekooday. Sidaa si la sii mid ah waxa uu ka war sheekooday Qaasim bin abi Ayuub, kii laangaraha (jiiska) ahaa oo uusan nolol ku soo gaarin"[139].

Ninkaas keliya ma ahan ee waxaa isna weriyeyaasha xadiiskaan ka mid ah nin kale oo la yiraahdo: " Muqiira bin Miqsam oo reer Dabbi ahaa. Ninkaasi waxa uu caan ku ahaa in uu xadiisyada tadliisiyo isla markaasna irsaaliyo (sarbeebo isaga oo hadal maldahaya, iyo in uu iska sii daayo warka isaga oo laga yaabo in uu qof aan weligiis xadiiskaas laga maqlin u saariyo oo yiraahdo isaga ayaan ka maqlay). Yaxye bin Saciid iyo Yaxye ibnu Muciin ayaa labaduba waxa ay dhihi jireen;

" Intaan xadiis ka qaadan lahaa Muqiira, qoodhay iyo xeraday waxaa ii dhaanta anoo ka qaata ninka la yiraahdo; "Xamaad bin Abi Suleymaan (goorba mid kale oo ay isna kaga shakisnaayeen been abuurka ayuu Xamaad ahaa)[140].

Muqiira waxa uu ahaa nin cid kaste oo barataaba ay ku barato habka loo yaqaan tadliisinta iyo irsaalinta xadiisyada. Waxaa ka mid ahaa culimada waa weyn ee sidaa ku tilmaantay; Axmad bin Xambal, Nisaa'i, Abu Da'ud, Ibnu xabaan, Ibnu Fudeyl, Axmad bin Cabdillaahi oo reer Cijli ah, Abu Jacfar oo reer Raazi ah, iyo Ismaaciil oo reer Qaadi ah.

[138] - Miizaanu al-ictidaal. Jus: 4, bog: 307
[139] - Musdhafa Ciid. (horay) bog: 72.
[140] - Taariikh Ibnu Muciin. Jus: 2, bog: 132

Guud ahaanba culimada aan iminka soo xusnay waxa ay isku wada waafaqeen in xadiisyada uu Muqiira soo weriyo aysan ka ceeb la'ayn habka *Tadliisinta* iyo habka *Irsaalinta*. Waxa ay weliba kulligood isla arkeen in ay taasi ku dhacdo sida qaalibka ah marka u ka soo werinayo ninka la yiraahdo; “Ibraahim" oo uu haatan sheekadaan ka soo weriyey.

Sida laga soo weriyey Axmad bin Xambal waxa uu yiri; " Xadiiska uu Muqiira bin Miqsam soo weriyey waa mid aan ceeb la'ayn. Waxyaalaha uu sheeganayo in uu ka soo weriyey Ibraahiim waa wax uu ka maqlay Xamaad (Xamaad waa ninkii laga yara doorbiadyey ninkaan aan hadda warkiisa hayno, oo uu isaguna ka xishoonayo in uu sheego in uu wax ka maqlay), Yaziid bin Waliid, Xaarith oo reer Cukli ahaa, Cubeyda iyo kuwa kale oo la mid ah". Waxa uuna sidaa darteed Xambali mar kaste daciifin jiray xadiiskii uu Muqiira sheego in uu ka maqlay Ibraahim oo kali ah[141].

Abuu Jacfar isna waxa uu yiri; "Muqiira afar xadiis keliya ayuu ka maqlay Ibraahim"[142]. Xaafid Ibnu Xajar al-Athqalaani oo doonaya in uu arintiisa meel cad oo go'an ku sugo ayaa isna yiri; " Muqiira bin Miqsam, ninkii reer Kuufi ee indhoolka ahaa, waxa uu ahaa nin lagu kalsoonaan karo oo wax xaqiijiya ama suga, laakiin cilladdiisu waxa ay ahayd in uu xadiiska tadliisin jiray, weliba gaar ahaan marka uu ka maqlo Ibraahim"[143].

Intaa keliya ma ahan waxaa isna ka mid ah weriyeyaasha sheekadaan ninka la yiraahdo; Ibraahim bin Yaziid oo reer Nakhaci ahaa. Inkastoo uu ahaa ninka Fiqhiga ugu haystay ardiga Kuufa, haddana waxaa looga maara

[141] - Al-jarxu wa tacdiil. Jus: 8, bog: 229. Tahdiib al tahdiib. Jus: 10, bog: 270

[142] - Siyarul Iclaam. Jus: 6, bog: 12

[143] - Musdhafa Ciid (horay) bog: 74. Sidoo kale; Al-taqriib. Jus: 2. Bog: 270

waayey habka Irsaalinta xadiiska. Sidaa darteed xadiisyadiisu waxa ay u badnaayeen kuwa uu ku soo weriyey habkaas Irsaalinta. Yaxye bin Muciin waxa uu ka yiri; "xadiisyada uu Ibraahim ku soo weriyey habkiisa irsaalinta waxaa ii dhaama kuwa uu Shucbe soo irsaaliyey"[144] .

Waxaa ka mid ah culimada ugu horaysa ee kaga joogsatay xadiisyadiisa habkaas irsaalinta iyo weliba tadliisintaba awgeed: Yaxye bin Muciin, Xaafid Dahabi, Ibnul Madiini, Suyuudhi, Xaafid Abuu Saciid oo reer Calaa'i ahaa, Xaafid Ibnu Xajar, Beyhaqi, Abuu Xaatim, iyo kuwa kale[145].

[144] - Taariikh Ibnu Muciin. Jus: 2, bog: 18. Siyarul iclaam. Jus: 4, bog: 522

[145] - Musdhafa Ciid. (horay) bog: 75-80

SHEEKADA AFRAAD

Beyhaqi ayaa kitaabkiisa "Sunan al kubraa", juska 8aad, bogga 97 aad ee Diyooyinka, baabka dhaawacyada la gaarsiiyo haweeneyda ku soo weriyey sida soo socota:

Waxaa laga soo weriyey in uu Maxamad bin Xasan yiri; Maxamad bin Abaan baa ka sheegay Xamaad oo ka soo sheegay Ibraahim, oo isna ka soo sheegay Cumar bin al khadaab iyo Cali bin Abii daalib (Allaha ka raalli ahaadee) in ay dheheen; "Diyada haweeneydu waxa ay u dhigantaa tan ninka badhkeed, naf iyo wixii ka hooseeyaba". Sheekadanina waa daciif aad u taaga daran, sababta soo socota awgeed;

1- Waxaa ku jira kala go' aad u weyn marka la leeyahay Ibraahim, ninka reer Nakhaci ayaa Cumar bin Khadaab iyo Cali bin Abii Daalib war ka soo weriyey. Ibraahim waxa uu ahaa mid ka mid ah kuwii ugu dambeeyey ama ugu yaraa Taabiciyiintii. Weligii ma arkin qof ka mid ah Asxaabtii iyo xataa Taabiciyiinta kuwoodii ugu horeeyey.

Cali bin Al-madiini ayaa kitaabkiisa "*Al-cilal"* ku yiri; " Ibraahim weligii lama kulmin mid ka mid ah Asxaabtii Nebiga (NNKHA). Markaa ayaa lagu yiri; ma xataa Caa'isha?. Suuye; " warkaas lagama maqal cid aan ahayn Saciid bin Abii Curuubat oo ka soo weriyey Abii Macshar oo isna ka soo weriyey Ibraahim oo isagu daciif ah. Taa macneheedu waxa weeye in uu mar qudha uun ninkaas Saciid bin Abi curuubaat la yiraahdaa iska yiri in uu Ibraahim soo gaaray Ca’isha (hooyadii mu’miniinta) oo ah tii ugu dambaysay asxaabtii Nebiga NNKHA oo uu arkay intaysan dhiman, laakiin warkaasi uu yahay mid aan la rumaysan

karin, oo la cadaynayo in uu ninkaas ibrahim la yiraahdaa inaga nagala mid ahaa aragti uu arko qof ka mid ah asxaabtii.

Caddayntaas iyo kuwa kale oo la isku xoojiyey awgood, Beyhaqiga xadiiskaan soo weriyey waxa uu ku qoray in warkani uu kala go'an yahay, uuna ku joogsanayo Ibraahim, ka dibna aan la hubin halka uu Ibraahim warkaan ka soo helay. Waxaa in isha lagu sii daymoodo mudan in inta badan ee iska soo werisay sheekadani ay yihiin isla kuwii aan hadda wax yar ka hor isla qoraalkeenaan ku soo xusnay sida ay uga dhaawacan yihiin xagga sharafta xadiis werinta iyo ku kalsoonida warkooda. Sidaa darteed waxayba kooxdani u egyihiin kuwa u soo labistay sidii ay ku samayn lahaayeen sharci xaqira dumarka, siiba mas’aladatan. Taasna waxaa tusinaya sida ay hadallada soo dafta ah ugu tuur tuuranayaan Atharka ama sheekooyinka laga soo weriyey asxaabtii iyo taabiciyiintii. Waxaa muuqata in ay ka baqeen ama ay ka xishoodeen in ay wax ku darsadaan axaadiista, sababta oo ah waxay uyara muuqdeen rag muxtarimiin ah, isla markaasna ku wanaagsan diinta. Badankoodana cillada ugu xun ee ay lahaayeen waxay ahayd iyaga oo axaadiista ay weriyaan aan lagu kalsoonayn oo lagu tuhunsanaa been abuurnimo.

2- Weriyaha koowaad ee qisadan, Maxamad bin Al-xasan waa nin uu warkiisu daciif yahay, maxaa yeelay, horta: Waxa uu ahaa nin reer Sheybaani ahaa oo ka mid ahaa kuwa ugu aqoonta roonaa culimadii Xanafiyada ee waagaas jirtay. Laakiin balaayo waxay ka dhacday ninku waxa uu ahaa nin runtiisii iyo beentiisii lakala saari waayey, oo markii dambe in uu beenlow yahay loo batay. Waxaa laga soo weriyey Maxamad bin Sacad oo reer Cawfi ahaa in uu yiri; " Anaa weydiiyey Yaxye bin Muciin in uu iigaga waramo Maxamad bin Al-xasan. Markaa ayuu igu yiri; "Waa nin

beenlow ahaa"[146] . Waxaa kale oo laga soo weriyey Cubeyda bin Cabdillaahi oo reer Kharsaani ahaa in uu yiri; " Nin baa Ibnu Mubaarak weydiiyey; "kee baa runlowsan Abuu Yuusuf iyo Maxamad bin al-Xasan"?. Markaa ayuu intuusan u jawaabin ku yiri; ha dhihin kee baa rusn sheeg badan ee dheh kee baa been sheeg badan"[147]. Waxaa laga soo weriyey Cabdillaahi bin Axmad bin Xambal in uu yiri; " Anaa aabahay, Axmad bin Xambal, weydiiyey Maxamad bin Xasan. Markaa ayuu igu yiri; "Anigu kolley ninkaas war ka werin mahayo"[148].

3- Weriyaha labaad qudhiisu waa daciif. Waxaa la yiraahdaa Maxamad Bin Abaan bin Saalax. Waa nin reer Jucfe ah, oo ka sii ah reer Qarshe oo ka sii ah reer Kuufi. Mar uu Yaxye bin Muciin ka hadlayey arintiisa waxa uu yiri; " Maxamad bin Abaan waa nin daciif ah. Xadiiskiisuna wax la qaato ma galo"[149]. Imaam Bukhaari ayaa isna ka yiri; " Waxa uu ka soo weriyey Xamaad bin Abii Suleymaan oo aan nin wargal ah ahayn"[150]. Nisaa'i ayaa isna ka yiri; " waa nin reer Kuufi oo daciif ah"[151]. Abuu Xaatim isaguna waxa uu ka yiri; " waa nin aan xadiiskiisu tabar lahayn. Waa la iska qoraa xadiiskiisa, laakiin lama xujaysto"[152]

4- Weriyaha saddexaad ee qisada qudhiisu waa daciif. Waxaa la yiraahdaa; Xamaad bin Abi Suleymaan. Waxa uu ahaa Faqiih reer Kuufi ah. Waxa uu arday u ahaa oo wax ka soo bartay ninka aan horay u soo ceebaynay ee ahaa Ibraahim ee reer

[146] - Ibnu Xabaan. Al-majruuxiin. Jus: 2, bog: 276.
[147] - Shaafici. Mas'alatul ixtijaaj. Bog: 70. Iyo Taariikh -Baqdaad. Jus: 14, bog: 257
[148] - Al-jarxu wa tacdiil. Jus: 7, bog: 227
[149] - Taariikh Ibnu Muciin. Jus: 2, bog: 503
[150] - Al-Ducafa'u Saqiir, bog: 98
[151] - Nisa'i. Al Ducafa wal matruukiin, bog: 91
[152] - Al-majruuxiin. Jus; 2, bog: 260

Nakhaci ahaa. Shucba oo ka mid ahaa culimadii ninkaan ka hadashay waxa uu yiri; " Runlow buu ahaa, laakiin ma xifdin jirin xadiisyada"[153]. Abii Xaatim waxa uu ka yiri; " Waxa uu ahaa nin ku mashquulsan Fiqhiga, xoogna uma helin xadiisyo iyo sheeko werinta. Sidaa darteed ma ahayn nin lagu irsaaqay xifdinta wararka - *athar*"[154]. Abuu Xaatim oo reer Raazi ahaa ayaa isna ka yiri; " Run wuu sheegi jiray, laakiin xadiiskiisa lama xujaysan jirin. Waxa uu ku wanaagsanaa Fiqhiga, laakiin mar hadday arintu timaado wargalnimo - *athar* keenid wuu isku dhex darsami jiray"[155]. Laakiin Maalik bin Aanas oo ka sii fogeeyey arinta halkaa ayaa yiri; " Waxay dadku noo ahaayeen dad wanaagsan oo reer Ciraaq ah ilaa uu soo dhex galay mid ay ku magacaabayeen Xamaad oo isagu diinta iska dhega tirayey oo ka waramayey ra'yigiisa"[156].

Warkii oo gaaban, waxaa daraasadda dheer ee aan halkaan ku samaynay inooga soo bixi kara in uusan Cumar weligii ku dhawaaqin warkaas laga sheegayo ee ay sheekadu tahay; ii dheh ku tiri ku teen ah. Iska daa in uu Cumar warkaas dhehee waxaa laga hayaa in uu yiri mid ka wanaagsan, kana soo horjeeda, laakiin waafaqsan habsocodka diinta Islaamka. Waxa uu yiri;

"Waa looga magdhawayaa ninka haweeneyda gef kaste oo uu ka galo, ha ahaato naf la gooyo ama wax ka hooseeya oo dhaawac ehe"[157]. Musdhafa Ciid ayaa waxa uu leeyahay; " kol hadday sugnaatay in uu Cumar isku qiimo ku simay qisaasta - dhaawacyada dhiigga ee ragga iyo

[153] - Al-jarxu wa tacdiil. Jus: 3, bog: 147
[154] - Al-jarxu wa tacdiil. Jus: 3, bog: 147
[155] - Al-jarxu wa tacdii. Jus: 3, bog: 147
[156] - Tahdiib al Tahdiib. Jus; 3, bog: 18
[157] - Saxiix al - Bukhaari. Kitaab Al-diyaat. Bab al Qisaas beyna rijaal wa nisa' fil jaraaxaat

dumarka guud ahaantoodba, in uu ku wada simayey diyadana sidoo kale waa arin lama dhaafaan ah marka horeba"[158].

[158] - Musdhafa Ciid. (horay) bog: 86

SHEEKADA SHANAAD

Beyhaqi ayaa kitaabkiisa; "*sunan al kubraa*", fi diyaat, babu ma jaa' fi jiraxil mar'at ku soo weriyey sida soo socota:

Abul Fatxigii reer Camri ayaa inoo sheegay in uu Cabdi Raxmaan bin abi Shureyx usheegay Abul Qaasim oo reer Baqawi ahaa, in uu Cali bin al Jacdi u sheegay, in uu Shucba u sheegay in uu ka soo weriyey Xakam, oo ka soo weriyey Shacabi oo ka soo weriyey Zayd bin Thaabit in uu yiri; " Dhiig-dhawga dhaawacyada la gaarsiiyo ragga iyo dumarka waa isku qiimo ilaa ay ka gaarayaan saddex u dhig. Wixii intaa ka sareeya waa kala badh" Beyhaqi markii uu soo weriyey sheekadaan waxa uu caddeeyey in ay tahay daciif oo ku kala go'an tahay taxitaanka weriyeyaasha isu soo kala gudbiyey. Weliba waxa uu sheegay in uu dhawr riwaayadood oo isku dhex yaacsan, kulligoodna dhexda ku go'an ku arkay sheekadaan. Sidaa darteed waa hadal aan salka ku haynin wax ka sii dheer caado jaahili.

Midda kale weriyeyaasha qisada waxa ka mid ah; Hishaam bin Curwa Bin Zubeyr. Ninkani waxa uu ahaa nin xadiiska ku sameeya *tadliisin*,[159] gaar ahaan kuwa uu ka soo weriyey Ciraaq. Yacquub bin Sheyba ayaa yiri; " lama diidi jirin ama duri jirin xadiiska Hishaam, intuusan Ciraaq aadin. Markuu halkaas tagay ayuu bilaabay in uu iska aruursado warar fara badan oo aan dabcan sugnayn. Sidoo kale in uu *irsaal* ugu sameeyo xadiisyo in uu ka maqlay aabihii,. Xadiisyadaas oo uusan aabihii ka maqlin ee uu dadyow kale ka maqlay[160].

Cabdiraxmaan bin Kharaash ayaa yiri; " waxaa isoo gaartay in uu Maalik kaga xanaaqi jiray Hishaam bin Curwa xadiisyada uu ka soo weriyo Ciraaq awgood, oo maranaba kama uusan raalli

[159] . horay ayaan macnaha tadliisin iyo irsaalin ba usoo sharaxnay. Waxayna ku kooban yihiin: sarbeebid iyo iska dheh.
[160] - Siyarul iclaam. Jus: 6, bog: 46

noqon jirin arintaas”[161]. Warde adigu warkii oo dhan ninkaa ciraaq loogama horaynin. Balaayo waxay goroda u gashay subuxuu Ciraaq tagey oo uu dabcan la soo macaamiltamay dadyow kale oo ay u ekayd in ay ku dartamayeen sumcad raadis iyo is faan-faanin. Taasina waxay aakhiritaankii ku noqotay cawaaqib xumo weyn oo ku timaada sharaftiisii diin ahaaneed.

[161] - Tahdiib al Tahdiib. Jus: 11, bog: 51

SHEEKADA LIXAAD

Beyhaqi ayaa kitaabkiisa Sunanka juska 8 aad, bogga 1566 aad ee kitaabka magdhawga, baabkadhaawacyada naagaha la gaarsiiyo; sidoo kale Maalik ayaa kitaabkiisa "Al-muwadha'" kitaabka magdhawga, baabka wixii ku yimid dhiigdhwga faraha; iyo weliba sidoo kale Ibnu abii sheybah, kitaabkiisa Musnaf, bogga 27504 aad ee magdhawga, baabka dhaawacyada gaara ragga iyo dumarka ku soo wada weriyeen sidaan soo socota: Waxaa laga soo weriyey Rabiica bin Abii Cabdiraxmaan in uu yiri;

"Waxaan weydiiyey Saciid bin al-musayab dhawr su'aalood oo ay ka mid ahaayeen kuwa soo socda;

1- S: imisaa loogu magdhabayaa farta haweeney ee la gooyey? Suu iigu jawaabay toban halaad/geel.

2- S: laba faroodna waa imisa? Suu ku jawaabay; labaatan geel ah.

3- S: Saddexna?. Suu ku jawaabay; soddon geel ah.

4- S: Afarna?. Suu ku jawaabay; labaatan geel ah.

5- S: Oo ma markuu dhaawaceedii sii darnaaday oo ay musiiba culusi sii gaartay buu dhiiggeedii sii rakhiisay?. Suu ku jawaabay: " war horta ma reer Ciraaq baad tahay adigu?" (muran badanidaa?). Saane: mayee ama aqoonyahan wax hubsanayaan ahay, ama jaahil wax baranayaan ahay. Markaa ayuu hadalkii ku xiray; " Maandhow sidaa ayey sunadu ahayd", yacni sidaa unbaan anagu weligeen arki jirnay oo aan aabayaasheen ka soo gaarnay ee ama qaado ama diid ee iga dayso murankaaga.

Waxaan shaki ku jirin in ay guud ahaanba hadalada soo gaaray qaar ka mid ah Afarta mad-habood ee u noqday sunno lagu daydo ay

xaruntooda ugu weyni tahay xadiiskaan. Waxaase is weydiin leh; bal sida ay tahay iyo macnaha qiyaaseed ee ay ku fadhido xisaabta noocan ihi. Run ahaantii tani waa su'aal qof kaste hor imaanaysa inta uusan u guda gelin sugitaanka iyo baaritaanka runnimada sheekadaan. Inkastoo haddii xataa ay haatan tani run noqoto aysan marnaba noo faa'iidayseen wax xukun iyo caqli ah oo laga qaato, haddana waxaa lagama maarmaan iska ah in bal dhab ahaanteeda la iska sugo.

Imaam Shawkaani oo warkaan ka hadlaya ayaa yiri; "Run ahaantii ra'yigaan uu noo soo guuriyey Saciid bin al-musayab, xataa haddii la sheego in uu Zeyd bin Thaabit sidaa yiri, warku waa *mursal* - *irsaal*, waayo ninka la sheegayo in warka laga maqlay waa Taabici, mana gaarin sheekadu Asxaabtii. Waxaa ka sii daran sheekadu waa dhex go'an tahay oo xataa ma gaarsiisna derajada "Mawquuf"[162].

Midda ugu weyn ee aan marna lagu dhaafi karinin macnaha akhbaartaan waxa ay tahay in la isla garto macnaha loola jeedo: "Sunna". Marka loo eego luuqadda Carabiga erayga Sunna manihiisu waa: "wixii jiri jiray caado ahaan". Hase ahaatee marka loo eego xagga macnaha ay ku leedahay diinta Islaamka – *isdhilaax* ahaan waxa ay tahay: " Wax kaste oo ka sugnaaday Adeegihii – Nebigii Eebbe (NNKHA). Ha ahaadeen hadal - qawl, ficil, iyo ansixin –*taqriir"*.

Haddaba anaga oo raacayna macnaha ay leedahay sunnadu waa in aan garanaa waxa uu sheekhani ula dan lahaa sunnada uu sheegay. Haddii ay ka ahayd in uu hab luuqad ahaan u hadlo, dee waxa uu sheegayey in ay sidaas uun ku ahayd hab caado jaahili iska ah. Haddiise uu u hadlayey hab diini ah, dee haddana ma

sunnada magaalada Madiina ayuu ula jeeday mise sunno uu Rasuulku jideeyey –hadal iyo ficil kay ku ahaataba. Waxaa iska muuqata in aan lahaynin mar ay Rasuulka wax macnahaas la mid ihi kaga sugnaadeen ficil ahaan ama qawl ahaan toona. Haddii uu ka wado, haddaba, in ay ahayd sunnadii magalada Madiinana ma ahan wax xukun diin ahaan loo raaco ama la xujaysto, kol haddaysan ku salaysnay kitaabka quraanka ah iyo sunnaha toona.

[162] - Shawkaani. Neylul awdhaar. Jus: 7, bog: 68

QIYAASKA IYO NUSNIMADA DIYADA DUMARKA OO QOORTA LAYSU SOO GELINAYO

Qaar culimada ka mid ah ayaa, markii ay meel kale oo ay beegsadaan waayey, ku adkaystay oo miciin bideen in ay ku doodaan in ay nusnimada diyada dumarku ku timid hab Qiyaas ah. Markaa ayey ku rafteen in ay Qiyaas kaga qaataan dhawr arimood oo kala ah:

1- Maragfurka.
2- Dhaxalka.
3- Hantilahaanshaha.
4- Mas'uuliyadda guurka iyo furriinka – *al-wilaayah*.
5- Waxtarka dumarka.
6- iyo Madaxtinimada Dumarka. *Tawliyatul-mar'ah fi al-amri*

Inkaste oo aan mid walba oo ka mid ah lixdaan qodob gooni ahaantiis ugu diyaariyey kitaab dhan oo gaar ah. Haddana bal wax yar oo tusaale ah aan isku duuduub ahaan halkaan ugu soo qabto akhristaha aysan iminka hor oollinin wax ka mid ah nuqulka kutubtaas kale ee aan mawduucyadaan ka qoray. Hase ahaatee qofkii haysta ama meel ku og waxa aan ku guubaabin lahaa in uu iyagu usii raacdo tifatir.

Aan ku horayno mas'alada; Maragfurka". Dhab ahaantii marka arinta maragfurka si daqiiq ah loo sii daba galo waxaa la soo saarayaa in aysan arintu ahayn in ay ragga iyo dumarku ugu kala duwan yihiin markhaatigalnimada sababtooda jinsi awgeed, aysana asal ahaanba sidaas loo buun buuniyey usii jirinin kala duwanaanshuhu. Keliya waxaa meesha ku jiraa waa is afgaranwaa dhexyaalla tafsiirka Shariicada iyo qaar badan oo ka mid ah wadaadada. Sidaas darteed gunta

markhaatigalnimadu waa takhasus aan loo eegaynin nooca qofka ee loo eegayo khibrada uu qofku u leeyahay waxa uu ka markhaati kacayo. Waxaa lama huraan ah in Shariicadu ay markaste ku habboon tahay ku dhaqitaanka casriga cusub ee jira, dadka markaas ku dhex nool. Waa in uu xukunka Islaamiga ihi kol walba la saanqaadayaa moodada ugu dambaysa ee jirta ee hab dhaqandhaqaaleed ama hab dhaqan siyaasadeed, inta uusan ahaanayn mid ka soo horjeeda Islaamka. Taa macneheedu ma ahan in wax laga badelayo Shariicad mar kaste oo uu casrigu is badelaba. Waxa ay tahay in si ku dhisan cilmi, caqli, iyo cabsi Eebbe lagu fasiro kitaabka Quraanka ah iyo Xadiisyada sugan ee laga helay sharraxaaddii uu Nebigu sharaxayey Quraanka. Taasina waxa ay lagama maarmaan ka dhigaysaa in la iska dhawro mara-kudhegnimo iyo jidbo aan cilmi iyo caqli ku salaysnayn.

Aan u soo noqonno qodobka aan ku taagnayne, akhristow marka keliya ee Quraanka iyo Axaadiistaba lagu sheegay in uu maragfurka haweeneydu ka badh yahay kan ragga waa marka Aayadda 282 aad ee suuradda Al-Baqara lagu sheegay in haddii aysan laba nin taagnayn goobta daynta ganacsi ama maalgelineed lagu kala saxiixanayey si ay markhaati uga noqdaan, ay baddelkoodii marag u noqonayaan nin iyo laba naagood.

Haddaba, ugu horrayba horta Aayaddu ma farayso xukun lama dhaafaan ah ee waxa ay ina siinaysaa talo iyo khiyaar gelin, sida ay qabaan culimo badani. Sidaasna waxa ay si dhan ugu tifatiran tahay kitaabkeyga kale ee la yiraahdo; “ ***MARAGFURKA DUMARKA OO LOO EEGAYO SHARIICADA”.*** Waxa uu xukunka Aayaddani la mid yahay (haddiiba xukun ahaan loo qaadanayo, haddii kalese waa

iska waano iyo talo ee ma ahan hab xukumeed) midka laga qaadanayo xadiiska ah;

" Ma banaana in uu nin reer baadiye ihi ku maragfuro nin reer magaal ah"[163].

Ninka reer baadiyaha waxaa loogu diiday in uu ku markhaati kaco ninka reer magaalka ah si uusan faraha ula gelinin wax uusan ku takhasusin, siiba marka ay dacwadu khusayso ama ka dhacday magaalada. Sidaa si la mid ah ayaa loogu adkeeyey dumarka in ay aad u xaqiijiyaan marka ay ku maragfurayaan dacwooyinka la xiriira daymaha iyo lacagaha la is dhaafsanayo oo aysan berigaa wax war ah u haynin, meel laga marana aqoonin. Haddaba aan weydiiyo cidda Qiyaaska noocan ah doodooda ku xoojisanaysa bal in ay isla qiimo yihiin magdhawga laga baxsho dhiigga ninka reer baadiyaha ah iyo kan laga baxsho midka reer magaalka ah iyo in kale. Haddii aad leedahay waa isku qiime, dee regga iyo dumarkuna waa isku qiime.

Waxa kale oo ay culimadu isku raacsiisan yihiin in aan la aqbalayn maragfurka qofka caruurta ah, illowshaha badan, faasiqa ah, dhegool ama dhega jiga waxna aan qori karinin, qaraabada dhaw, beenlowga, iyo ku kaste oo lagaga shakiyo in uu sababi karo duudsiin ama is dhaafin xuquuq aadane[164]. Haddaba nin kaste oo ka mid ah kuwaas aan soo xusnay iyo midka la aqbalayo maragfurkiisa ma isku dhiig baa mise waa kala dhiig?. Hadaad leedahay waa isku dhiig, dee rag iyo dumarna waa isku dhiig.

Haddii ay qaar la soo jeestaan in qaybta dhaxal caruurta aabahood ka dhintay iyo diya bixinta qof la dilay ayaa la isaga kala qiyaas qaadan karaa, waxaa soo baxaysa su'aal ah; " qaybta

[163] - Waxaa soo weriyey Abu Da'ud. Kitaab al- Aqdiyah, Shahaadatul badawi cala ahli al amsaar. Lam: 3062 –3069. Sidoo kale eeg; Ibnu Maajah, fil axkaam, man laa tajuuzu shahaadatuhu; iyada oo xadiiskaan laga soo werinayo Abii hureyra. Lam: 1917/2367.

dhaxalku waa arin gaar ah oo dhextaal qoys isku mid ah. Hase ahaatee midda dhiig kala geliduna waa mid ku timaadda cadaawad iyo dagaal badanaaba dhexmara dad kala duwan ee sidee ayey u suurtoobaysaa in la isaga kala qiyaas qaato. Haddii aad middaa iyada ah uga jawaabto in waxa la dhawrayaa ay tahay xuquuq shakhsi ahaaneed bal haddaba eeg middda soo socota;

Tusaale aabbe ayaa ka dhintay laba wiil iyo laba gabdhood. Waxa ay qaybsadeen dhaxalkii, markaa ayuu wiil walbaaba helay laba jibaarka intii ay inantii walaashii ahaydi heshay. Wiilkii waxaa laga rabaa in uu soo istaago booskii uu aabbihii ka dhintay. Waa in uu ka soo baxaa masruufka iyo marashada hooyadii, gabdhihii la dhashay oo dhan, iyo xataa wixii qaraabo iyo ehel ahaa ee la xiriiray aabihii. Laakiin gabadhii qaadatay kala badhka inta uu qaatay, waxa ay iskala tagaysaa inteedii. Ma jirto wax Alle iyo wax la weydiin karo sharci ahaan, halka ay ku bixisay. Intaa waxaa u sii dheer, marka la soo doono si loo guursado waa in la siiyaa Meher iyo hadiyado kale intaba. Haddii lala guri galana waa in la baxshaa masruufkeeda maalinlaha ah, marashadeeda, is qurxinteeda iyo guud ahaanba baahiyadeeda kale ee ay ugu baahan tahay si ay ugu gudato nafteeda ama naf kale ee ku xil leh. Hase ahaatee, wiilkii la dhashay ee nuska dheeraystay waxaa laga rabaa in uu isagu intaas oo dhan ku baxshaa midda uu guursado ama u dabaando dhigto guursigeeda.

Waxaas oo dhana waxaa sababaya in ay ku fogaatay qabatintayna dabeecadda aadanuhu in aysan dumarku qaadin xilalkaas oo idil. Marka ay aayadani soo degtay ka horna dhaxalku waaba ka mamnuuc ahaa in la siiyo qof dumar ah, waayo ma ahayn gaashaanqaad. Haddaba ma dawbaa in ay ku sinaadaan qaybtii dhaxalka. Haatanse ragga iyo dumarku mar

[164] - Sayid Saabiq. Fiqhi siira. Jus: 3, bog: 432 -439

kasteba ma kala badsadaan dhaxalka, marka loo eegayo shariicada, ee waa hal nooc keli ah sifaha ay ku kala badsanayaan.(sharax dheeri ah waxa aad ka helaysaa kitaabkayga; “Maragfurka Dumarka oo loo eegayo shariicada”).

Waxaa aan laba, diinta Islaamka ama hadaan si kale u dhaho Shariicada wax ka taqaani, is weydiinaynin in marka horeba in qiyaas mas’aladaan loo cuskadaa aysan banaanayn. Waxaa, haddiiba qiyaas la miciinsanayo haboonayd in sinaanta qiimaha rag iyo dumar lagaga qiyaas qaato ujeedada guud ee ay Shariicadu u timid in ay xalliso. Waxa ay Sahriicadu u timid in ay soo afjarto gumaysigii, kala sarayntii, dabaqadihii, kala saarkii jinsi, midab, qolo, iyo qabiil ee muddada dheer ku dhex faafayey bulshooyinka adduunka. Laakiin marnaba ma haboonayn in qiyaaska loo qaato in la sii ayidayo ama la sii daba dheeraynayo xeerarkii iskala saraysiin iyo iskala qoqobidda ee horay u sii jiray.

Qiyaaska oo ah isha afraad ee laga qaato Shariicada Islaamka, waxaa loo baahdaa mar mar dhif ah iyo mas’alooyin dhif ah, waayo saddexda il ee ka horaysa ayaa mar hore badanaaba daboosha baahidii isaga loo qabi lahaa.

Sheekh Shaafici baa yiri; “marka aan mas’alo ka weyno xalkeeda kitaabka Qura’anka ah iyo Sunaha, waxa aan ku xukminaynaa Ijmaaca, dabadeedna Qiyaaska oo isagu ka sii taagdaran. Laakiin taas waxaa nagu kallifaya waa lama huraan – daruura, waayo Qiyaasku ma shaqaynayo tiiyoo uu meesha yaallo khabar”[165]. Haddaba kol hadduu Qiyaasku yahay meel loo erkado marka la waayo wax dhaama maxaan isugu beer goynaynaa?. Waxaana la wada ogsoon yahay oo maalin walba laga akhriyaa kitaabka quraanka ah

dhawr aayadood oo si toos ah iyo si dadban intaba u caddaynaya is la ekaanshaha qiimaha dhiigga rag iyo dumar. Haddaba maxaa nagu kallifaya Qiyaas oo maxaa nagu kallifaya Ijmaac, oo maxaa nagu kallifaya Khabar, oo maxaa nagu kallifaya *athar* – qisooyin la soo weriyey, oo maxaa nagu kallifaya xadiis daciif ah ama aan la isku raacinin sixadiisa dhan kasteba?.

Aan soo gaabiyee, akhristow arimahakani marnaba ma ahan kuwa la isaga qiyaas qaato. Qiyaasna lama daneeyo marba haddii Nas cad lahaysto. Sinaanta dhiigga ragga iyo dumarkana waxaa noo caddeeyey Nusuus Qura'an iyo xadiis ku sugan oo aan horay u soo xusnay. Qodobada kala ah in aysan haweeneydu hanti yeelan karin, mas'uuliyad qaadi karin, gacanta ku haynin go'aanka guurka iyo furrinka, qaadiyad noqon karin, wax faa'iido iyo horumarin toona ah aysan u lahayn mujtamaca iwm. Kuwaas oo dhami igama mutaan in aan qalin iyo warqad ku khasaariyo, ruuxa sidaa aaminsana, kolley isagaa intaba ehe, waxa aan u sheegayaa; "Loomaba baahnee ha inaga baxo".

[165] - Shaafici. Risaala. Bog: 559-600. Lam: 1817

MAGTA NINKA IYO NAAGTU WAA ISKU MID IYO ISKU QIIME

Eebbe weyne waxa uu ku caddeeyey Qura'ankiisa sinaanta, isku si u qiimaynta, isku si uga hadlidda, isku si u dhawridda, isku si u ciqaabidda, isku si u xisaabinta, isku si u mas'uuliyad saaridda iyo isku si ugu magdhawidda ragga iyo dumarka. Waxa uu ku sheegay sidaas Qura'ankiisa isaga oo, tusaale ahaan, leh;

" Uma banaana ruux Mu'min ah in uu dilo ruux Mu'min ah si kama' ah mooyee, kii ku dila si kama' ahna waxaa ku waajibay in uu naf Mu'minad ah xoreeyo, isla markaasna diyo siiyaa ciddiisii (ciddii marxuumka)[166]

Aayadani waa tan keliya ee sida tooska ah u sharaxaysa xukunka dhiig magidda haddii ruux Muslim ah la dilo, nin ahaayaa iyo naag ahaayaaba. Ma jiro innaba haba yaraadee wax kala saar jinsi ah ee ka muuqda xukun bixinta aayaddaan. Sidaa darteed fikradda ah in laka duwo ama la kala qiimeeyo rag iyo dumar waaba mid aan meesha soo geli karinin.

Intaas waxaa sii dheer in aan la haynin wax xadiis saxiix sugan ah oo faraya ama ku talinaya in la kala qiimeeyo magdhawga ragga iyo dumarka. Balse waxaa la hayaa xadiisyo iyo akhbaaro saxiix ah oo faraya in aan sinaba lagu kala badin ama lagu kala qiimaynin magdhawga ragga iyo dumarka. Waxaaba ka mid ah xadiisyadaas kuwa soo socda:

[166] - Quraanka: An-nisaa: 92.

Qays bin Cubaad ayaa laga soo weriyey in uu yiri; “ Aniga iyo Ashtar baa u tagnay Cali bin Abii Dhaalib. Markaasaan weydiinay: Waar Calaw (Caliyow) ma waxaa jira wax uusan Rasuulkii dadka kale kula ballamin oo uu adiga gooni ahaan kuugula ballamay?. Waxa uu Cali ku jawaabay: Maya. Keliya waxaa jira waxa ku qoran buugaygaan (oo iyana la wada ogaa). Markaa ayuu buuggii ka soo baxshay galka seeftiisii oo ka akhriyey:

" Mu'miniinta dhiigoodu waa isu wada dhigmaa qiimo ahaan, waxayna isku yihiin gacan qudha oo ka soo horjeedda kuwa kale. Hadduu magantooda soo galo kan dad ugu hooseeyana wuu ku badbaadaa si sharaf ah. Mu’mina looma dilayo gaal”.[167]”

Waxa ay ila tahay in aan ciduna ka dood qabin in kelmadda ; “mu’min” ay ku wada jiraan rag iyo dumar labaduba ee aysan cidna u gooni ahayn. Haddaba waxba qiimo ahaan iskuma dooriyaan dhiig magidda ragga iyo tan dumarku. Nafi waa uun naf xagga Eebbe weyne. Waxa uu mar hore inoogu sheegay Quraanka sidaan soo socota:

“ Waxaan ku faralyeelnay in nafta naf loo (gooynayo), ishana isha, ……"[168].

Aayadani waxa ay daliil aan daah saarnayn u tahay isku qiimo iyo isku jin jinnimada diyada ninka iyo naagta. Ma dhimana mabda’ kale oo loo dooni lahaa mas’aladatan. Waxa uu Eebbe heerka caddaynta iyo sharixidda mas’alada soo gaarsiiyey in uu kala dhig dhigo xubnaha jidhka aadanaha oo mid walba si gooni ah ugu caddeeyo qiimihiisa. Waxa la sheegay in Naftu ay la mid tahay nafta kale ciddii ay doonto ha ku jirtee, ishu ay la mid tahay isha kale, sanku uu la mid yahay sanka kale, dhegtu ay la mid tahay dhegta kale, dhaawacyada kale ee aan la

[167] - Abu Da’ud. Fi Diyaat; Iyqaadul Muslim bil kaafir; bog: 3797/4530.

sugi karinina ay leeyihiin nidaam qisaaseed lagu qiimeeyo, tiiyoo aan loo eegayn cidda geysatay iyo cidda loo geystay toona ee laga duulayo uun bani aadaminimo, hadday ka soo hartana Muslinimo.

Sayid Qudub oo kitaabkiisa "Dilaal al Qura'an" ku sharraxaya aayaddaan ayaa yiri; " Waxa ugu horeeya ee ay Shariicada Islaamku doonayso in ay meel cad ku sugto marka laga hadlayo magdhawga waa mabda'a sinaanshaha; in lagu sinaado qiimaynta dhiigga, in lagu sinaado qiimaynta ciqaabta iwm. Mana jirin Shariica kale oo aqoonsata ama sidaas oo kale ugu dadaasha mabda'a sinaanta nafaha aadanaha. Bal eeg markii ay isla sintay naftii iyo naftii kale ayey hadana isla simaysaa guud ahaanba xubnihii kale ee ka soo haray, iyada oo aan marnaba loo eegaynin kala duwanaanta ay dadku kula duwan yihiin heerarka dhaqaale, sharaf, nasab, nooc – rag ama dumar, waxtar, dhiig dhalasho iwm."[169].

Mar haddii qofkii qof dila loo dilayo, oo nin hadduu naag dilo loo dilayo, sida ay dhammaanba culimadu isku waafaqsan yihiin[170]. Oo aysan arintu weliba naf keliya ku ekayn ee ay taagan tahay xubin walba in loo baxsho xubinteeda kale ee waafaqsan ama u dhiganta, bal xaggee ayey joogtaa ama ka soo fushaa "kala baridda magdhawga laga baxsho nafta dumarka ee la gooyey, iyo si buuxda ku bixinta midda ragga"??!!.

Waa yaabe miyeysan wadaadadu ka akhriyinin kitaabka Bukhaari cutubka dhan oo uu ugu magac daray; "*Baabu Anna nafsu bi-nafsi'*= Cutubka ka hadlaya in Naftu ay u dhiganto nafta kale", yacni in naf kastaaba ay qiimo ahaan la mid tahay nafta kale, marba hadday Muslimiin is la yihiin. Miyeysan kale oo ku

[168] - Horay.

[169] - Sayid Qudub. Tafsiirul Quraan ee Dilaal al-Quraan: jus: 2. Bog: 898 -899

qancinin sida uu Nebi Maxamad (NNKHA) ku go'aamiyey maxkamaddii arintaan la xiriirtay ee soo martay markii ay inantii Saxaabiyadda ahayd ee la oran jiray; "Rubeeca" ka jabisay iliga foolka ah inantii Jaariyadda ahayd, ee uu markii ay dadkii xaafaddu ka codasdeen Nebiga in uusan ridin Iliga gabadha la sharfayey ee ahayd ina Nadiir – Rubeeca ee bal maslaxooyin kale la raaddsho, uu ugu jawaabay (Nebigu); " Aanasow kitaabka Ilaahay Qisaas – magdhaw baa ku taalla"[171].

Akhristow, waxa aan kuu sheegayaa in halka ay culimada ku doodaysa kala qiimaynta dhiigga ragga iyo dumarku ay tabar ka raadinayaa dhawrkii xadiis ama xadiis ku sheeg ee aan soo sheegnay, soona caddaynay in ay kulligood daciif iyo wax aan la daliilsan karin yihiin, aysanna inaba haba yaraatee wax diin ahaan loo cuskado aysan ahayn. Laakiin nasiib darro ma aysan soo hadal qaadin oo ku dhaqmin dhawr xadiis oo sax wada ah, kulliogoodna ay sugeen culimada ku xeel dheeraatay cilmiga axaadiistu. Xadiisyadaas oo aan marnaba kala saarin rag iyo dumar ee isku si wax ugu xisaabinayey waxaa ka mid ah kuwa soo socda:

Camra bin Shuceyb ayaa aabbihii hadana awoowgii ka soo weriyey in uu Nebigu (NNKHA) yiri; " Haddii qof si ula kac ah loo dilo waa in dhiigiisii/geedii la siiyaa dadkiisii. Kolkaa iyagu hadday doonaana ha disheen, hadday doonaana ha ka qaateen magtii. Magdhawguna waa; soddon qaalmood oo uuraysan karta - xiqqa, soddon ilka dhacsatay – jadaca, iyo afartan riman – khalifa. Kaasina waa magdhawga ku yimid dil ula kac ah, hadday wax labada qolo ku soo heshiiyaanna

[170] - eeg; Tafsiir Ibnu Kathiir. Jus: 2, bog: 56

[171] - Bukhaari. Fi sulxi, sulxu diyaat: (2703). Sidoo kale Muslim, Nisa'I, Beyhaqi, iyo Abi Da'ud intaba.

waa hawl iyaga u taalla, laakiin sidaani waa marka magdhawga la adkeeyo”[172]

Cabdillaahi bin Camra bin al Caas isna waxaa laga weriyey in uu yiri; “ Adeegihii Eebbe ayaa maalintii la furtay magaalada Makka, ka jeediyey fagaaraha magaalada khudbad dheer oo dhaxalgal ah. Markii uu khudbaynayey ayuu inta saddex jeer kor u takbiirsaday (yiri; Allaahu akbar 3 jeer) yiri: “ War hooy magdhawga qofka lagu dilay kama’ shabahaya ula kac, ee ah karbaash –jaydal iyo ul waa boqol halaad oo ay ku jiraan afartan calooshooda ilmahoodii ku wata – dhays ah”[173]

Camra bin Xazamna waa kii Nebiga ka soo weriyey in uu yiri; “ Nafta la gooyo waxaa laga bixinayaa boqol geel ah . . .”[174]. Waxaa kale oo iyana xadiis caan ah oo saxiix ihi ahaa; ‘in waagii uu Nebigu joogay la dilay haweeney nin u dhaxday. Markaa uu Nebigu u xukmiyey diyadeedii in la siiyo ninkeedii iyo caruurteedii, ayna baxshaan tolka qofkii dilay”[175]. Halkaasna kuma aanu hayno wax inoo cadaynaya in intii diya ahaan qoftaas haweenka ah looga baxshay ay ahayd mid kala badh ka ah tan laga baxsho ragga. Akhristowse waxaaba maanta mid laga naxo oo aan xataa sheegitaan loo quudhin ah in ay iska caadi tahay in haddiiba ay dhacdo in haweeney la dilay laga baxsho xoogaa nus ama rubac tay ahaataba oo diyo ku sheeg ah aan la siinin ciddii xaqa ulahayd ee ahayd caruurteedii iyo saygeedii ama waalidkeed ama ciddii kale ee markaas u taagnayd booska ee ay caado tahay in xoogaagaas ay qaybsadaan qabiilkii ay ka dhalatay. Tanina waa marka keliya ee ay caado

[172] - Ibnu Maajah; fi diyaat; man qatal camdan faradow bidiyatin. Sidoo kale; Termadi, iyo Beyhaqi. Albaanina waxa uu ku sheegay xadiiskaan kitaabkiisa; Al-irwaa bogga; 2219, wuxuuna caddeeyey in uu xadiisku yahay mid ah “Xasan” wanaagsan.

[173] - Nisa’i. Fil qisaamah; kam diyatu shibhil camdi; bog: 4458. Sidoo kale; Ibnu Maajah.

[174] - Nisa’I; fil qisaamabog: 4513

[175] - Muslim; fil qisaamh; bog: 1682.

ahaan qabiilku xoolo ka fishaan gabadhii ay dhaleen.

Beyhaqi ayaa ka soo weriyey Cabdiraxmaanbin Abii Zanaad, in uu aabihii ka soo weriyey in uu yiri; " Waxaa ka mid ahaa cilmiyadii dhaxalgalka ahaa ee aan ka soo gaarnay culimadeenii, kuwii aan hadalkooda laga daba imaan jirin, oo ay ka mid ahaayeen: Saciid bin al-musayab, Curwa bin Zubeyr, Qaasim bin Maxamad, Abuubakar bin Cabdiraxmaan, Khaarija bin Zayd bin thaabit, Cubeydullaahi bin Cabdullahi bin Cutbah, Suleymaan bin Yasaar . . . in ay dhihi jireen; "Haweeneyda waa looga magdhawayaa ninka, dhib kaste oo uu gaarsiiyo, ishii il baa loo saarin, dhegtii dheg baa loo saarin, wax kaste oo dhaawac ihina sidaa ayey ku soconayaan. Haddii uu nefteeda kaw kaga siiyana, dee isna kaw baa loogaga siinayaa"[176]. Bukhaarina waxa uu ku qoray "*baab al qisaas beyna rijaal wa nisa' fil jaraaxaat*" ee kitaabka diyooyinka ee Saxiixiisa; "Ninka waa loo dilayaa haweeneyda"[177].

Hadalka koobnaantiisa, waxaa guud ahaanba xadiisyadii aan sida xikmadda leh u soo caddaynay ka muuqanaysa in fikradda ah in lakala qiimeeyo oo lakala yareeyo magdhawga ragga iyo dumarka ay ahayd fikrad, tartiib tartiib usoo duxday ka dib markii muddo laga joogay waqtigii ay noolaayeen Nebiga (NNKHA) iyo asxaabtiisii. Berigii uu Quraanku soo degayey, waxa uu Eebbe ku mamnuucay dhammaanba waxyaalihii ku taxalluqay kala saraysiinta aadanaha dhan kaste oo laga eegaba.

Intii uu haddaba Nebigu noolaa iyo weliba waayadii asxaabta iyo taabiciyiinta toona qofna kuma dhiiranaan jirin in uu warka noocaan oo kale ah la suuq yimaado, waayo

[176] - Beyhaqi. Sunan al kubra; fil jinaayaat; al qawdu beyna rijaal wa nisa fiimaa duuna nafsi; jus: 8, bog: 40

waa mid khilaafsan guud ahaanba ujeedadii uu Islaamku u yimid ee ahayd in ummadda loo simo sida shanlada ilkaheeda. Hase ahaatee beryo dambe ayey dad badan oo ka hari la'aa caado jaahiligii ku dhisnaa is xaqiridda iyo anaa kaa xoog badanta isku dayeen in ay soo been abuuraan waxyaalo ay ku magacaabeen xadiisyo oo ay ku kala masabiteen qaar ka mid ah asxaabtii ito taabiciyiintii. Wax kaste arintu ha ahaatee, akhristow waxaa Eebbe mahaddii ah in ay mas'aladu noogu sugan tahay kitaabka Quraanka ah iyo xadiisyada kuwooda la soo xaqiijiyey saxnimadooda.

[177] - Fatxul baari. Jus: 12, bog: 223

XAGGEE LAGA KEENAY NUSNIMADA DUMARKA?

Waxaa su'aal in la is weydiiyo mudan ah; maxaa guud ahaanba qawmiyadaha Islaamka ee intaa tiro iyo kala duwanaan la eg, ee weliba taariikhda guunka ah leh wada xafidsiiyey in ay ka wada dhigaan diyada dumarka qiimo ahaan mid u dhiganta kala badhka tan ragga.?. Dhab ahaantii su'aashu waa mid xidido dheer leh una baahan baaritaan cilmiyeed oo dheer, baaritaankaas cilmiyeed oo ay lagama marmaan tahay in uu ahaado mid si rasmi ah oo aysan inaba haba yaraatee eexi ku jirin loo daraaseeyo.

Waxa ay dunidu siddedaba soo martay sida ay culimada taariikhda waxa ka daraaseeyey ogyihiin marxalado iyo taariikho fara badan oo kala duwan. Hase ahaatee mararka aan gaar ahaan u tooganayno uujeedadatan aan iminka ka hadlayno awgeed, waxaa la arkayaa in ay muuqanayso sida ay isugu wada dardaarmeen ku dhaqankeeda hab qaldanaanta ah. Waxa ay u egtahay in ay iska wada dhaadhiciyeen si dhaxaltooyo ahaan ah mabad'a ku dhisan cadadin iyo xaqirid la xaqirayo haweenka. Waxaa jirtay in ay guud ahaanba qawmiyadihii kala duwanaa ee dunida soo maray, in yar mooyee, cadaysteen in ay yasaan dumarka. Taasna waxaa mararka qaarkoood loo aanayn karaa duruufaha jiray oo ku xeernaa awgood.

Haddaan ujeedada ku sii fogaano waxa qawmiyadahaas kuwa xusida mudan ka midka ahaa kuwii ku noolaa halka maanta loo yaqaan Bariga dhexe ama Gacanka Carbeed iyo nawaaxigiisa. Kuwaani maadaama ay ahaayeen kuwii ugu darnaa ee dumarka liida, xumaanahooda kale ee ay Cibaado qallocintu ka mid ahayd ka sokow, waxa uu Illaahay gargaar uga dhigay in uu iyagii ka bilaabo

helitaankii diintii ay aadanaha caalamka ku nool oo idili ku bad-baadi lahaayeen adduunkooda iyo aakhiradoodaba.

Bal haatan haddaan taariikhda wax ka yara jaleecsano oo aan tusaale usoo qaadano qaar ka mid ah ilbaxnimooyinkiii iyo xukuumadihii ka jiray Bariga dhexe iyo agagaaradiisa sida ay u qiimayn jireen magta dumarka iyo guud ahaanba halka ay ka joogtay ruuxa dumar ihi qiimo ahaan iyo wax tar ahaan.

1. Ilbaxnimadii hore ee Mosbataaniya waxay dumarka u aragtay in ay yihiin shar socota oo Rabbi ku imtixaamayo. Dhamaanba hawlaha ay qabtaana ay yihiin wax qalad ku dhacay. Waxaa taas u sii dheerayd in dambi kaste oo ay gasho qof dumar ihi uusan ka soo qaad lahayn waayo ruuxa dambiga galay looma aqoonsana ruux dhamaystiran oo wax garaad ah looguma dhibcin. Sidaa darteed, qofkii dambi ku eedeeya ama ka cabta dhib ay u geysteen dumar waa lagu qosli jiray oo lagu oran jiray waa nimow naag. Bal eega ficil ama war dumar buu ka soo qaad u yeelaye.

Arintani waxaad moodaa in aysan ilaa maanta go'inin ee ay halkeedii ka sii socoto. Waxa aan wada ognahay in haddii uu nin Soomaali ama waddan kale ee Carbeed ihi ka dacwoodo qof dumar ah lagu eedaynayo qudhiisa in uu naag ka qayliyey, sidaas darteed uusan nin rag ah ahayn. Waxaaa lagu leeyahay "waxaad ninyohow la doodaysaa waa ruux dumar ah, ee ha is ceebaynin". 'Ma hadal naageed baad meel ka soo qaadaysaa" iwm.

Intaas keliya maahan ee waxaa iska caadi ah xataa haddii ay iyadu inta gardarraysato ay lacalla kufsato ama wax kale ku samayso, in aan iyadana

su'aal qudh ah xataa la weydiinaynin isagana laga yaabo in bartiisa qudha looga jaro.

Taas waxaa ka sii daran in aan marnaba waxba laga soo qaadi jirin haddii iyada la dilo ama halaga gar darnaado ama yaan laga gar darnaane. Ama kas ha loo dilo ama kama' ha loo dilee. Wax Diya ah ama ciqaab gacan ku dhiiglaha la gaarsiiyo ihi kama ratimi jirin dilka loo geystay ruux dumar ah. Hadduu nin dilo haweeney waxa ay la mid ahayd isaga oo Quraanjo ama wax la mid ah dilay. In ciddii gabadha laga dilay loo magdhabo warkeeda iska daaye, xataa looma tacsiyeen jirin.

Sidaas si la mid ah waxa ay haweenku agtooda ka ahaayeen oo isla tabtaas iyo ka sii xun ula macaamiltami jiray Boqortooyinkii iyaga ka sii caansanaa, kana sii hormarsanaa sida; Boqortooyadii Sumeriyaanka, tii Assyriyaanka, tii Baabiliyoonka, tii Humuraabiiska iyo kuwa kale.[178].

Dhaqan midkaas aan soo xusnay ka sii foolxun waxaa iyaguna dumarka kula dhaqmi jiray Shiinaha. Waxa ay Shiinuhu iyagu u arkayeen in ay haweenku yihiin Shaydaan sidiisii ah oo halkaan soo taagan. Waxa ugu weyn ee ay dadkaasi kala dagaalami jireen dumarka in ay banaanka u baxaan ama ay arkaan cid aan ahayn qoyska ay markaa qofka dumar ihi ka dhalatay ama u dhaxday - qaba[179].

Sidaas si ka sii daran ama ugu yaraan la mid ah, waxaa iyaguna ku dhaqmi jiray ilbaxnimadii hore ee Giriiga. Geriigu waxa ay aaminsanaayeen in

[178] . eeg buuga la yiraahdo; "History of Civilization" boga: 1154.
[179] . M. Peter, Women through History. Boga: 54.

dumarku yihiin ceeb iyo cawro soo taagan oo ay shartuna had iyo gooraale la socoto iyaga jinsi ahaan iyo ficiladoodaba. Waxa ay si rasmi ah ugu adkaysanayeen in maskaxda dumarka ku jirtaa ay tahay oo keliya tan ku jirta Eyga oo ay la sii jirto tabardarri, khayaano badni, qumayanimo, bacawnimo, fasahaad, akhlaaq xumo, shar soo jiidid, dagaal iyo fidnayn dhan walba leh oo iyagu ay sii dheeryihiin maskaxda Eyga[180].

Ilbaxnimadii hore ee Roomaanka ayaa iyaguna khuraafaadka noocaas ah iyo mid ka sii xunba aaminsanaa. Aaminsanaan keliya ugama aysan harinine way dhaqan geliyeen weliba. Waxay kuwani aaminsanaayeen in ay haweenku yihiin fadeexo iyo cawro banaan taalla oo ninka ay u dhashaan uu qudhiisu ka hooseeyo ragga aysan gabadhi u dhalanin. Waxaa kale oo ay iska aaminsanaayeen in dumarku yihiin shar aakhiro lumis ah iyo caqli xayawaan aan wax garad ahayn.

Taasi waxa ay askunka u taagtay in aysan marnaba haweenku hawaysan waxyaalo fara badan oo ka mid ah xuquuqdeeda aadaminimo. Waxay ka xaaraantimeeyeen in ay soo gasho meelaha wax lagu caabudo ama macbadyada ay ku tukanayeen kuwa haystay diimihii hore ee samaawiga ahaa. Sidaas darteed waxay qoladani aaminsanaayeen in aysan haweenku Jannada galaynin carafteedana arkaynin. Sabata ugu weyn ee ay Janna la'aanta iyo cadaabka ku mutaysanyaana waxa ay ahayd in aysan wax cibaado ah samaysanaynin,

[180] . W. Duran, the History of Civilization. Qaybta 1 aad, juska 2 aad, boga: 188.

waayo loomaba ogolayn. Taasna ma ahan mid ku timid wax ka weyn ama ka kharaar in ay noqdeen dumar markii uu Eebbe samaynayey, oo ay ku dhasheen iyaga oo haween ah ee aan rag ahayn. Waa sababtaas dumarnimada uun midda keentay in uusan sharcigu iyagana wax u qaban, waxna ku qaban, islamarkaasna ka reebo Jannada gelitaankeeda[181].

Waxaas oo wada caado Jaahili ihi markii ay is biirsadeen ayna caawiyeen xaaladihii duruufihii qallafsanaa ee sida is daba jooga ah u jiray, ayaa fikradihii qaladka ahaa soo heleen boos ay ku nastaan. Xaalladda deegaan ee jirtay awgeed, waxa ay dumarkii ka qayb qaadan waayeen dilkii, boobkii, dhicii, iyo guud ahaanba kaa xoog badnidii socotay. Waxaa sheeko lagu waayey naag inta ay nin ama xattaa naag kale gardaraysato ka soo marooqsata wixii ay gacanta ku haysatay ee hanti ahayd ee markaas ku soo biirisa xoolihii lagu haystay reerkeeda. Waxaa is taray aqoonsigii loo aqoonsanayey dumarka iyo dadka jilicsan jidh ahaan in aysan wax xuquuq ah ku lahayn cidda ay la noolyihiin, waayo waxa ayba ku ahayaan culaab iyo canaab alle ku bed ah. Halkaa marka ay xaaladdu gaartay waxaa wadamo fara badan oo ay dawladii Carbeed ugu horayso laga dhaqan geliyey sharciyo xusaya in aysan haweeney wax dhaxal ah inaba haba yaraatee ku lahayn xoolihii uu aabeheed ka dhinto inkaste ha tiro la ekaadeene. Sidoo kale ama ha la helo cid kale oo dhaxasha ama ha la waayee kolley iyadu naag ahaan ma soo

[181] . M. Peter, History. (horay)

hawaysanayso. Sababtu waxay tahay miyey qaadi kartaa hub oo inta ay Faras fuusho xoolo soo dhici kartaa ama kuwii ay cidoodu lahayd cadaw ka hor istaagi kartaa. Tan ka sii weyn taas ee lagu eedaynayeyna waxay ahayd in ay maalinta dambe ugeli doonto cido kale oo haday doonaan noqonaya cadawga cideedii. Sidaas darteed, waxa ay Hindidu ilaa maanta ku maah-maahaan; " Gabadhaada kori waa talaaka deriskaaga waraabi".

Dhacdooyinkaas iyo rumaysadyadaas foosha xun xun awgood xumaanta ka soo horjeeda dumarku waxa ay dunida inteeda badan ka noqotay wax iska caadi ah ama muqadas ahaanba loo arko. Waxaase naxdin leh in rumaysadyada caykaa ihi ay soo dhex xaluushaan caqiidooyinkii iyo diimihii berigaas jiray. Tusaale ahaan diinta Masiixiyada ee maanta jirta waxa ka buuxa boqolaal aayadood oo xusaya in dumarku aysan bani aadam dhamaystiran ahayn. Bal eeg Baybalka sida uu qoray Yooxaana – John, kitaabka la yiraahdo "Jeremiah: 32" "Bilowgii Genesis: 3". Iyo meelo kale oo fara badan oo kuwada jira Axdigii Hore iyo Axdigii dambe labadaba.

Sidaa dartede waxaa iska caadi noqotay ka mamnuucidda dumarka laga mamnuucayey in ay hanti gaar lahaato, in ay danteeda cadaysato, dacwadeeda aan dheg jalaq loo siinin, in la gubo iyaga oo nool (sida maantaba weli si qarsoodi ahaan ah iyo si xataa cad ba uga socota meelo badan oo ka mid ah "dalka Hindiya". Iyo guud ahaanba in si silic iyo saxariir ah

loo adoonsado, tii nolosha ku sii negaata beryo.

Mar haddii ay arintu caynkaas tahay, waxa jirta hadana oo maanta qoran in ay inta badani diimihii ardigaas ku soo degay ka dayriyeen ama ka digeen hababkii naxariis darada ahaa ee dumarka loola macaamiltamayey dhan walba oo laga eegaba.

Aan hoos usoo daa degnee heer keebay Soomaalidu ka joogaan xaqsiinta dumarka iyo ku aabyood la'aantooda? Hadaan hadalkeenu ku xanibno xagga bixinta magta laga bixinayo qof haween ah oo la dilay, waxaan war oo dhanba isaga gaabin karnaa in horta ugu horayntaba magdhawga Soomaalidu uu isla sidii Carabtii hore ku salaysan yahay hadba inta ay gaarsiisan tahay awoodda qabiilka u ka dhashay qofka la dilay. Sidaas awgeed waxaaba iska caadi ah in iska daa dumar oo geedo akle loogu soo gabanayee, ragga ay iyagu dhexdooda si gooni ah uga qiimeeyaan awgood aysan isku mag noqonin.

Inkastoo ay taasi meelo badan oo maanta dunida ka mid ah ay weli ka jirto, hadana habka ay Soomaalidu uqiimeeyaan dhiiggu waa mid ku sii fogaaday dulmiga. Tusaale, wadamada qaarkood waxa lagu qiimeeyaa magta heerka uu derejo adduun ka joogay qofka la dilay. Hase ahaate Soomaalidu waxa ay marka ugu horaysaba arinta ka eegaan dhibaato ilaa intee la eg bay geysan karaan dadkiisii haddaan la qancinin. Marka qodobkaas isaga ah laga qanco aya waxaa loo yimaadaa qiimayntii qof ahaaneed, laakiin iyadana si xumaan ah ayaa loo

qadariyaa ama loo qiimeeyaa. Waxaa lagu qiimeeyaa qofkaasi ma ku wanaagsanaa hadduuba ka qayb geli jiray dagaallada lagula jiro qabilada kale? Haddii uu dagaalada iyo fidnooyinka gudaha ama dibada fariid ku ahaa waxa ay noqonaysaa diyadiisu mid aad loo qiimeeyo oo laga yaabo in dhawr jeer lagu soo cel celiyo. Laakiin haddii ay soo baxdo in uusan wax fidno ah ku firfircoonayn ee uu maskiin ahaa waxaa lagu yiraahdaa hadduu nin ahaa: “war nimow naag buu iska ahaa”, hadday haween ahaydna hadde maxaad ba ka sii sheegin? Waxa la leeyahay: “ War maxaad la qaylinaysaan ma nin rag ah oo boqolow ah baan idinka dilnay, sow naag maahan waxaan dilnay”?. Waxaa markaa laga yaabaa in ay xoogaa yar u baxshaan si aan loogu ceebaynin waa ciddii waagii naagta dishay.

Taas ayaa hadaba waxa ay samaysaa qaacido guud oo dhigaysa: “kii xoog leh baa xarquun leh”.

Si ay haddaba kaaba qabiilada ama odayaasha beeluhu nabad iyo derisnimo wanaag kuwada noolaansho ugu dabbaalaan beeshooda iyo kuwa la deriska ah ugu dhawaan, ugu fogaana iyaga iyo guud ahaanba Soomaalida inteeda kale ayaa waxa ay keentaa in masalan laba qabiil oo deris ah uu xeer iyaga ka dhexeeyaa u dhigan yahay (*bilateral treaty*).

Xeerkaas ayaa laga yaabaa in uu dhigayo ‘ Haddii nin reer (X) ah uu dilo nin reer (Y) ah, reer (X) waa in ay baxshaan mag laba jibbaaran (labanlaabkaasi waxa uu mararka qaarkood socdaa oo sii bataa ilaa shan

jibbaaran iyo ka sii badanba), laakiin haddii uu nin reer (Y) ah dilo nin reer (X) ah waxa ay reer (Y) bixinayaan mag iska caadi ah oo hal nin ama ka yar lagu qiimaynayo.

Sidaas ayaana laga yaabaa in marka ay muddo socoto ugu dambaysta loo arko wax diin ku lug leh. Ilaa maanta oo la yara ilbaxayna weli xeerarka noocaan ihi way ka sii jiraan dalka Soomaaliya.

Hadaba si taas ka qayb ah ayuu Islaamku si aad ah uga digay in la sii wado xaqiraadda dumarka lagu hayo iyo guud ahaanba in lagu hawl galo waxa kaste oo aadane lagu xaqirayo. Islaamku waxa uu xoog saaray in la soo celiyo xuquuqda insaanka ee dadyowga laga daagta roonyahay – *vulnerable group*.

Halkaas ayuu haddaba Eebbe, Sareeye wax walba oge, ku bayaaniyey kulliba xuquuqda dumarka, sida uu u cadeeyey guud ahaanba xuquuqda aadanaha. Laakiin waxaa nasiib darro aan laga soo waaqsan noqotay ka dib markii ay dadkii uxilsaarnaa in ay mabda'aas toosan dhaqan geliyaan siina faah-faahiyaan ay awoodi waayeen in ay ku guulaystaan tartan ay la galaan dhaqamadii hore ee haraadiga ahaa ee laga guurayey. Taasina waa midda maanta na gaarsiisay heer ay dumarka xuquuqdoodii weli taagan tahay meel aan wax saa usii dheer ka sokeynin halkii ay berigii jaahiliyada Islaamka ka hor joogtay.

GEBAN GEBO

Guud ahaanba marka aan dulmar ku samayno casharadii aan soo sharaxnay waxa aannu ogaanaynaa in aysan jirinin wax daliil go'an ah oo nagu qasbaysa in aan ku qiimayno diyada dumarka mid ka yar tan ragga intay doontaba ha ka yaraatee.

Waxaa aannu isla wada garan karnaa kolka aan daacad doon wada nahay in ummadda Muslimiintu isku wada qiimo yihiin dhiig ahaan, marba haddii naftooda qaaliga ah la gooyo. Ma jiro wax faraq ah oo u dhexeeya ninka, haweeneyda, cunugga, kan sheekha ahaa, kan ciyaal macna maleh (dhallinyarada xilliga kacaansanka ku jirta ee ku mashquulsan labiska iyo xaragada) ahaa, kan qabiil sare ka dhashay, kan qabiilka la yaso ka dhashay, kan taajirka ahaa, kan faqiirka ahaa, kan madaxda ahaa, kan raaciyadda hoose ahaa, kan aabihiis wanaagsanaa iyo kan aabihiis xumaa ama la nebcaa, iyo sidoo kale kan isaga la jeclaa iyo kan la nebcaa toona. Meesha waxaa taalla oo ugu yar ee wax lagu fahmi karaa maahmaahda Soomaaliyeed ee dhahaysa: "Mar hadduu dhiig dhaco dhabaqo meel beeshay".

Waa mid lagu farxo in tani ay ka mid tahay maah-maahooyinka Soomaaliyeed ee waafaqsan Sharciga Islaamka, ama ku toosnaanta muhimadda Islaamka. Laakiin waxaa mid laga naxo ah in tiiyoo maahmaahdana afka laga sheego, nusuusta Qura'anka ah iyo Sunnahana sidoo kale afkana laga sheego kutubtana laga akhriyo hadana lagu dhaqmo hab kaas ka duwan oo weliba ka soo horjeeda.

Waxaan ku soo gaabin karnaa daliilaha aan arintaan ku ayidayno, aayadaha Qura'nka ah ee aan kor ku soo xusnay ee caddaynaya in naf kastaaba ay nafta kale la mid tahay una bixi karto, oo arinta laga eegayo nafeey naf ma tahay, si aadaminimo ah. Sidoo kale waxaa daliil waafi ah inoo noqonaya axaadiista aan iyagana kor ku soo xusnay ee inoo sheegaya in nafta Muslimiintu ay isu dhiganto, ayna ku wada qiimaysan tahay boqol geel ah, haddii si ula kac ah loo gooyo. Sidaas darteed naagi waa boqolleey nina waa boqollow. Ha laga haro hana laga waantoomo sheekadii ahayd naagi waa nus oo waa kontonley.

Guntii iyo geban gebadii, waxa inoo cadaanaya marka aan qoraalkaan si miyir ku dheehan u akhrino oo ugu fiirsano, ka dibna aan dib usii baarno arinta inaga oo sii tixraacayna guud ahaanba daliilaha aan ku bayaaninay qoraalka, in dadka Muslimiinta ihi ay ku siman yihiin magta dhiigga iyo weliba kulli xubnaha oo idil. Sidaas darteed waxa aan garan karnaa in hadalka keenaya in Muslimiinta loo kala saaro rag iyo dumar uu yahay mid aan meel uu cuskado lahayn.

Haddaba maxaa inala gudboon ee aan hadda ka bacdi ku dhaqaaqnaa? Ma dhammaan culimadii hore ee sida aan maanta aragno jidaysay baan eedaynaa, mise kolley hadday marba iyagu inooga horeeyeen sidaas ayna ku adkaysteen baan inaguna ku sii adkaysannaa?.Waxay ila tahay in aysan jawaabta su'aalahakani ahayn mid shaki ku jirta. Waxaa inala gudboon in aan saacaddaas aan wax hubsanay laga bilaabo si caddaalad iyo sinaan Sharciga Islaamka waafaqsan ah ukala xukmino dhiig siinta kala khusaysa rag iyo dumar. In aan iska illowno wixii

horay u dhacay oo aanaan dib ugu noqon, isla markaasna aan adkayno in aysan mar dambe dhicinin xaq duudsiin tii hore oo kale.

Waxaa kale oo aan iyadana laga murmi karinin in aan iminka qaadano go'aan ku salaysan in mar haddii haweeney la dilo aan laga hadlin waxa la yiraahdo Diyah, laakiin uu xukunku isaga go'naado dil toogasho ah. Taas oo ah in laga reebay xukunka khafiifintii iyo fududayntii uu Ilaahay sheegay in ay ku imaanayso marka la fuliyo xukunka magdhawga ah. Weliba tani waa mid si guud ahaana ugu haboon dhacdooyinka gacankudhiiglenimo ee maanta dalka Soomaaliya ka jira. Waayo waxaa soo yaraan lahaa ku dhiiranaanta in la iska dilo qof Muslim ah xanaaq kaste oo sababa.

Culimadii hore nagama mudna wax eedayn iyo qalad ka fahmid ah ee waxa ay naga mudan yihiin xushmad iyo u ducayn. Sababtu waxa ay tahay in aysan iyagu marnaba is lahayn aad wax fasahaadisaan ee uu dadaalkoodii intaas gaarsiiyey. Taas macneheeduna maahan in ay cilmi la'aani haysay ee waxa ay tahay in go'aanada xukunkoodaasi ay ku beegnaayeen xilligoodii oo ay adkayd si looga baxo daahii iyo daboolkii ku gudbanaa fahmidda aragtidaan ama tafsiirkaan dambe.

HADDABA WAXA AAN GAAR AHAAN
CULIMADA SOOMAALIYEED, GUUD
AHAANA KUWA DUNIDA MUSLIMKA
AH, KULA TALIN LAHAA IN AY MAANTA
KA BACDI KA SOO HARAAN
FIKRADDAAS AAN DHUMUCDA LA
CUSKADO LAHAYN INTA AYSAN LA
LIICIN OO LA JABIN.

Waxaa soo diyaariyey oo soo
bandhigay:
Dr. Qaasim Xirsi Faarax.
P. O. Box 13670, 50818, Kuala
Lumpur, Malaysia.
P.O.Box 16069
Nairobi - Kenya
E-mail: qasimhersi@yahoo.com

TUSMO

1. Hordhac 2
2. Cutubka Koowaad:
Ma loo dooran karaa Dumarka in ay cid xukumaan?
2.1 . Madaxtinimada Dumarka 8
2.2. Miyey Qaalliyad noqon kartaa? 12
2.3. Daliisha kuwa diidan in ay Dumarku taliyaan iyo jawaabta la siiyey 16
2.4. Dawrkay Dumarku ku yeesheen Jihaadka Islaamka 36
2.5. Maxaa keenay kala saarka iyo jinsi takoorka? 40
2.6. Heerka ay Dumarkii Asxaabtu ka cayaareen siyaasaddii jirtay 44
Cutubka Labaad:
Dumarka iyo wilaayadda
3.1. Xorriyadda guur xulashada 48
3.2. Xujjada ay haystaan kuwa aaminsan in dumarka lagu qasbo guurka 54
3.3. Dawrkii ay Dumarku ka soo cayaareen siyaasadda Islaamka 31
3.4. Afarta Mad-hab iyo waxa ay ka qabaan Ijbaarka 51
3.5. Furrinka 62
3.6. Malaga daba hadli karaa Culimadii hore 67
3.7. Dardaaran 77
3.8. Culimadii hore oo mas'alooyin casriyeeyey 73